


**FAAFINTA**

الرسمية



**RASMIGA**

الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**  
لولاية أرض بونت الصومال

*Sanadka 7-aad Garowe 15 September 2005*

*lam 9*

*Faafinta bilwalba soo baxda*

جريدة الشهرية

**Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland**  
*Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba. Rukunka Sanadkii waa Sh/So. 170,000 dalka gudihiisa, dibadda Sh/So. 500,000 Rukunka la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yay waa Sh/So. 3,000 Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

## **TUSMADA**

**Qaybta Kowaad**

**Sharci**

**Qaybta Labaad**


**Xeer**

**Waxba Ma Leh**

**Qaybta Sadexaad**

***Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM***  
***Waxba ma leh***

Sharci Lr. 2. ee 8/09/2005, kuna saabsan sharciga Xanaanada Xoolaha Puntland.



Sharci Lr. 2. ee 8/09/2005, kuna saabsan sharciga Xanaanada xoolaha Puntland.

**K/simaha Madaxweynaha**

MARKUU ARKAY	Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.
MARKUU TIXGELIYEY	Muhiimadda sharciga Xanaanada Xoolaha Puntland u leeyahay.
MARKUU ARKAY	Ansixinta Golaha wakiillada Puntland ee Lr. XGGW /DGPL/ 140 /2005, ee 01/08/2005.
Asagoo hore u dhegeystay	Rayiga Golaha Xukuumada.

**WUXUU SOO SAARAY**

**Sharciga soo socda :-**

**Qodobka Kowaad**

Waxaa Golaha wakiillada Puntland ansixiyeen Sharciga Xanaanada Xoolaha Puntland.

**Qodobka Labaad**


Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada.

**Qodobka Saddexaad**

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka K/simaha Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Puntland, markaa ayaa sharcigani kamid noqonayaa shuruucda Dawladda Puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

Xasan Daahir Maxamuud  
Madaxweyne-kuxigeenka  
ahna Sii-hayaha xilka Madaxweynaha

**Dawladd Goboleedka Puntland ee Soomaaliya  
Wasaaradda X/Xoolaha Beeraha iyo Deegaanka**



**SHARCIGA XANAANADA XOOLAHA**

TABLE OF CONTENTS .....	8
LIFAAQYO .....	9
WAAXDA IAAD .....	9
CADDAYMO .....	15
TILMAAMO GUUD .....	15
CUTUBKA 2.1.....	15
UJEEDDOOYIN IYO QAAB HAWLEED GUUD .....	15
QODOBKA 2.1.1.....	15
QODOBKA 2.1.2.....	15
QAAB HAWLEEDKA /HAB RAACA ADEEGGA DARYEELKA XOOLAHA .....	15
.....	16
CUTUBKA 2.2.....	16
MAS'UULIYADDA SEKTORKA GUUD IYO KAN GAARKA AH EE .....	16
HAWLAHA CAAFIMAADKA XOOLAHA .....	16
QODOBKA 2.2.1 .....	16
DHAKHAATIIRTA XOOLAHA, SHARIKADHA CAAMKA AH IYO KUWA .....	16
GAARKA AH.....	16
QODOBKA 2.2.2 .....	16
MAS'UULIYADDA SECTORRADA DAWLADDA IYO KUWA GAARKA AH.....	16
.....	17
CUTUBKA 2.3.....	17
HAB RAAC HAWLEEDKA XAFIISYADA .....	17
QODOBKA 2.3.1 .....	17
QAAB DHISMEEEDKA HAWLAHA CAAFIMAADKA XOOLAHA .....	17
WASIIRKA.....	17
SARKAAL MADAXEEDKA DARYEELKA XOOLAHA .....	17
QODOBKA 2.3.2 .....	17
MAS'UULIDDA SARKAAL MADAXEEDKA DARYEELKA XOOLAHA .....	17
QODOBKA 2.3.3.....	18
AWOODDA NIDAAM-HOOSAAD / AWAAMIR DEJINTA .....	18
QODOBKA 2.3.4 .....	19
GUDDIGA SARE EE DARYEELKA CAAFIMAADKA XOOLAHA .....	19
CUTUBKA 2.4.....	20
DIYAARINTA XEER HOOSAADYO .....	20
QODOBKA 2.4.1 .....	20
QAYBTA 3AAD.....	21
ISLA SOCODSIINTA CUDURRADA IYO WAAJIBAAD YO GUUD .....	21
CUTUBKA 3.1.....	21
WAAJIBAADYO GUUD .....	21
QODOBKA 3.1.1 .....	21
XAALADDA GUUD EE ISLA SOCODSIINTA CUDURRADA .....	21
CUTUBKA 3.2.....	22
WAR GELINTA / OGAYSIINTA .....	22
QODOBKA 3.2.1.....	22
CUTUBKA 3.3.....	23
JIID-U-KALA SOOCIDDA IYO TALLAABOYINKA XOOLA - .....	23
DAAWAYNEED EE LAGA HIRGELIN KALO JIID AAFAYSAN .....	23
QODOBKA 3.3.1 .....	23
ASTAAMAYNTA JIIDAHA KALA DUWAN SI LOO XAKAMEEYO .....	23
CUDURRADA .....	23

<i>QODOBKA 3.3.2</i> .....	23
<i>TALLAABOYINKA Xoola DAAWEYNEED EE LAGA HIRGELIYO AAG</i> <i>AAFAYSAN (CUDUR KA JIRO)</i> .....	23
<i>CUTUBKA 3.4</i> .....	24
<i>WAR GELINTA/DIGIDDA CUDURRADA IYO AWOODAHA DALKA GUDIHIISA</i>	24
<i>QODOBKA 3.4.1</i> .....	24
<i>DIGNIIN KA BIXINTA CUDURRADA</i> .....	24
<i>QODOBKA 3.4.2</i> .....	25
<i>AWOODAHA</i> .....	25
<i>QAYBTA 4-AAD</i> .....	26
<i>GURMADKA DEG-DEGGA AH IYO WAX KA QABADKA CUDURKA</i> <i>XOOLAHA</i> .....	26
<i>CUTUBKA 4.1</i> .....	26
<i>HAY'ADAHAIYO WAKAALADAH</i> .....	26
<i>QODOBKA 4.1.1</i> .....	26
<i>KOOX WASAARADEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA EE CUDURRADA</i> .....	26
<i>QODOBKA 4.1.2</i> .....	27
<i>GUDDI QARAMEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA EE CUDURRADA</i> .....	27
<i>CUTUBKA 4.2</i> .....	28
<i>DEJINTA BARNAAMIJ KA GURMADKA DEG-DEGGA AH IYO WAX KA</i> <i>QABADKA CUDURRADA</i> .....	28
<i>QODOBKA 4.2.1</i> .....	28
<i>XIL-HAWLEEDKA KOOXDA-WASAARADEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA</i> <i>AH EE CUDURRADA</i> .....	28
<i>QODOBKA 4.2.2</i> .....	29
<i>XIL-HAWLEEDKA GUDDI-QARAMEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA AH EE</i> <i>CUDURRADA</i> .....	29
<i>QODOBKA 4.2.3</i> .....	29
<i>CUTUBKA 4.3</i> .....	30
<i>QODOBKA 4.3.1</i> .....	30
<i>QAYBTA 5-AAD</i> .....	31
<i>GANACSIGA CAALAMIGA/ DIBEDDA EE XOOLAHAIYO WAXYAABAHA</i> <i>LAGA SOO SAARO</i> .....	31
<i>CUTUBKA 5.1</i> .....	31
<i>HAY'ADDA U IDMAN</i> .....	31
<i>QODOBKA 5.1.1</i> .....	31
<i>CUTUBKA 5.2</i> .....	31
<i>DIB U DHOOFINTA/ KA KEENIDDA XOOLAHAIYO BADEECOYINKA</i> <i>XOOLAH</i> .....	31
<i>QODOBKA 5.2.1</i> .....	31
<i>CUTUBKA 5.3</i> .....	32
<i>QODOBKA 5.3.1</i> .....	32
<i>XARUMAHA IYO KAABAYAASHA GANACSIGA. CAAFIMAADKA XOOLAH</i>	32
<i>QODOBKA 5.3.2</i> .....	35
<i>QODOBKA 5.3.3</i> .....	36
<i>QAAB-HAWLEEDKA IYO SIDA AY ISUGU XIGAAN IJRAADKA</i> <i>CAAFIMAADKA XOOLAH SHIXNADEYNTA KA-HOR</i> .....	36

<i>QODOBKA 5.3.4</i> .....	37
<i>DHOOFINTA BADEECADAHA ISIR-XOOLAAD LEH</i> .....	37
<i>CUTUBKA 5.4</i> .....	38
<i>BAARITAAN-EEGISTA IYO SHAHAADA SIINTA KEENISTA XOOLLAHA IY</i> <i>BADEECO-XOOLAADKA</i> .....	38
<i>QODOBKA 5.4.1</i> .....	38
<i>KEENISTA XOOLAHA</i> .....	38
<i>QODOBKA 5.4.2</i> .....	39
<i>KEENIDDA BADEECADAHA SIDA MINADA XOOLAHA IYO UKUNTA LA</i> <i>DILLAACIYO</i> .....	39
<i>QODOBK 5.4.3</i> .....	39
<i>QODOBKA 5.4.4</i> .....	40
<i>QODOB KA 5.4.5</i> .....	40
<i>GAADIIDKA WADA XOOLAHA IYO BADEECA XOOLAADKA LA KEENAY...</i>	40
<i>QAYBTA 6-AAD</i> .....	42
<i>GAADIID KU QAADIDDA XOOLAHA</i> .....	42
<i>CUTUBKA 6.1</i> .....	42
<i>MABAADII GUUD IYO FARRIIMAHA</i> .....	42
<i>QODOBKA 6.1.1</i> .....	42
<i>WAXYAABAHA LA TIXGELINAYO MARKA LA SAMAYNAYO KORJOOGIDDA,</i> <i>KORMEERKA IYO ILAALINTA XOOLA-QAADISTA</i> .....	42
<i>QODOBKA 6.1.2</i> .....	43
<i>DABBIRAADDA GUUD</i> .....	43
<i>QODOBKA 6.1.3</i> .....	43
<i>DEBBIRAADDA U GAAR AH BADEECADO-XOOLAADKA</i> .....	43
<i>QODOBKA 6.1.4</i> .....	44
<i>DISINFEKSHAN IYO SIYAABA / TALLAABOYIN - HAWLEED KALE</i> .....	44
<i>CUTUBKA 6.2</i> .....	44
<i>RUQSADAHA IYO SHAHAADOOYINKA XAMMUULKA</i> .....	44
<i>QODOBKA 6.2.1</i> .....	44
<i>RUQSADAHA</i> .....	44
<i>QODOBKA 6.2.2</i> .....	45
<i>XAASHIYO/ RUQSADO KALE</i> .....	45
<i>CUTUBKA 6.3</i> .....	46
<i>HAWLAHA XOOLA QAADIDDA / DAABBULIDDA KA HOR INTAAY SAFARKA</i> <i>KU JIRAN IYO QAADIDDA / SAARIDDA IYO KA DEJINTA</i> .....	46
<i>QODOBKA 6.3.1</i> .....	46
<i>XOOLA QAADIDDA KA HOR</i> .....	46
<i>QODOBKA 6.3.2</i> .....	46
<i>MUDDADA XERYO KU HAYNTA XOOLAHA INTAAN LA SAFRIN</i> .....	46
<i>QODOBKA 6.3.3</i> .....	47
<i>GAADIID SAARIDDA / KA DEJINTA</i> .....	47
<i>QODOBKA 6.3.4</i> .....	48
<i>MUDDADA / INTA SAFARKA LAGU JIRO</i> .....	48
<i>CUTUBKA 6.4</i> .....	49
<i>FARRIIMO KU SAABSAN HAYKALLADA CAYIMAN</i> .....	49
<i>QODOBKA 6.4.1</i> .....	49
<i>SAFAR XOOLAADKA DHULKA</i> .....	49

<i>QODOBKA 6.4.3.</i> .....	49
<i>SAFAR Xoolaadka Badda</i> .....	49
<i>QODOBKA 6.4.4</i> .....	50
<i>Xoola Qaadidda Cirka</i> .....	50
<i>QAYBTA 7-AAD</i> .....	51
<i>GUDDIGASARE EE DARYEELKA Xoolaha (GSDX)</i> .....	51
<i>CUTUBKA 7.1</i> .....	51
<i>ASAASIDDA GUDDIGASARE EE DARYEELKA Xoolaha</i> .....	51
<i>QODOBKA 7.1.1.</i> .....	51
<i>Xubnaaha Guddiga Sare ee Daryeelka Xoolaha</i> .....	51
<i>QODOBKA 7.1.2.</i> .....	52
<i>JAGA Hayeyaal / Xil Hayeyaal Guddiga Sare ee DCX</i> .....	52
<i>QODOBKA 7.1.3</i> .....	52
<i>Muddada Xilhaynta Guddiga Sare ee D.C. Xoolaha</i> .....	52
<i>QODOBKA 7.1.4</i> .....	53
<i>Kulamada Guddiga Sare ee D.C.Xoolaha</i> .....	53
<i>QODOBKA 7.1.5</i> .....	53
<i>Awoodaha iyo Xil Hawleedyada Guddiga Sare ee D.C.X</i> .....	53
<i>CUTUBKA 7.2</i> .....	54
<i>DOORASHADA GUDDOOMIYAHA GUDDIGASARE EE DCX</i> .....	54
<i>QODOBKA 7.2.1</i> .....	54
<i>SHURUUDAHA LAGU SOO DOORANAYO GUDOOMIYAHA GUDDIGASARE EE DCX</i> .....	54
<i>QODOBKA 7.2.2</i> .....	55
<i>QAYBTA 8-AAAD</i> .....	57
<i>DARYEELKA CAAFIMAADKA Xoolaha ee Gaarkaah</i> .....	57
<i>CUTUBKA 8.1</i> .....	57
<i>DIIWAAN GELINTA IYO RUQSAD SIINTA DHAKHAATIIR Xoolaadka, FARMASHIISTEYAASHA IYO KAALIYEYAASHA CAAFIMAADKA Xoolaha.</i> .....	57
<i>QODOBKA 8.1.1</i> .....	57
<i>ARJIGA DIIWAAN GELINTA</i> .....	57
<i>QODOBKA 8.1.2</i> .....	57
<i>DADKA LOO JIDEYEY INAY CODSADAAN DIIWAAN GELINTA</i> .....	57
<i>QODOBKA 8.3.2</i> .....	58
<i>CODSIGA DIIWAAN GELINTA</i> .....	58
<i>QODOBKA 8.1.4</i> .....	58
<i>CODSIGA SHATISIINTA (LAYSANKA)</i> .....	58
<i>QODOBKA 8.1.5</i> .....	59
<i>SHURUUDAHA SHATI/LAYSAN BIXINTA</i> .....	59
<i>QODOBKA 8.1.6</i> .....	59
<i>DAW U LAHAANSHAHA SHAQAYSIGA DHAKH TARNIMO</i> .....	59
<i>QODOBKA 8.1.7</i> .....	60
<i>KA TIR TIRID AMA KALA NOQOSHADA SHATIGA DHAKHTAR Xoolaadka.</i> .....	60
<i>QODOBKA 8.1.8</i> .....	61
<i>DIIWAAN GELINTA IYO XAQ U LA HAANSHAHA KU SHAQAYSIGA ZOO TEKNISHAN IYO KAALIYAH DARYEELKA Xoolaha.</i> .....	61

CUTUBKA 8.2 .....	61
XIL WAAJIBAADKA DHAKHAATIIR Xoolaadka Rasmiga ah iyo kuwa GAARKA AH .....	61
QODOBKA 8.2.1 .....	61
DHAKHTAR Xoolaadka iyo xilalka guud / Rasmiga ah .....	61
CUTUBKA 8.3 .....	62
FULINTA ADEEGYADA CAAFIMAAD Xoolaadka ee dad aan ahayn DHAKHAATIIR Xoolaad .....	62
QODOBKA 8.3.1 .....	62
AWOODDA/XUKUNKA HAWLAHA CAAFIMAAD Xoolaad ee meel kasta .....	62
QODOBKA 8.3.2 .....	63
GARGAARAYAASHA CAAFIMAADKA Xoolaaha .....	63
CUTUBKA 8.4 .....	63
IIBSIGA IYO GADASHADA / QAYBINTA DAAWADA Xoolaaha iyo midda TALLAALIDDA .....	63
QODOBKA 8.4.1 .....	63
ISTICMAALKA DAAWOYINKA Xoolaaha .....	63
QODOBKA 8.4.2 .....	64
SHURUUDA DIIWAAN GELINTA QOFKA KEENA (IMPORER), QAYBIYA / GANACSIGA JUMLADDA AMA KAN Tafaariikhda DAAWOYIN Xoolaadka .....	64
QODOBKA 8.4.3 .....	65
TASHIILAADKA IYO SHURUUDAHA KAYDINTA / BAKHAAR KU HAYNTA DAWOYIN Xoolaadka .....	65
QODOBKA 8.4.4 .....	65
DIIWAANKA RASMIGA AH IYO SHURUUDAHA GELINTA GANACSATADA DAWOYINKA Xoolaaha .....	65
QODOBKA 8.4.5 .....	66
SHURUUDAHA KEENIDDA IYO QAYBINTA / GANACSI JUMLADEEDKA DAAWADA .....	66
QAYBTA 9-AAD .....	68
FARIIMA MAALIYADEED, CIQAABEED IY QAAR-KALE .....	68
CUTUBKA 9.1 .....	68
FARIIMAMA MAALIYADEED .....	68
QODOBKA 9.1.1 .....	68
CUTUBKA 9.2. ....	69
HAYNTA, GOWRACAAMA KA-TAKHALUSIDDA/FOGEYNTA Xoolaaha JIRAN/BUKA .....	69
QODOBKA 9.2.1 .....	69
GAAR-U-HAYNTA Xoolaaha buka ama aan fayoo bayn .....	69
QODOBKA 9.2.2 .....	69
MASUULIYAD-QAADISTA MILKIILAH Xoolaaha ama badeeco Xoolaadka luma ama dhibi gaarto inta baaritaanka lagu HAYO .....	69
QODOBKA 9.2.3 .....	69
GORACA Xoolaaha JIRAN .....	69
QODOBKA 9.2.4 .....	70
KA TAKHALUSIDDA / FOGAYNTA RAQDA Xoolaaha la gawracay .....	70



CUTUBKA 9.3 .....	70
XEERKA U GAARKAAHEYYDA .....	70
QODOBKA 9.3.1. ....	70
<i>DIIWAAN-GALINTA IYO LEESAN BIXINTA</i> .....	70
QODOBKA 9.3.2 .....	70
<i>EDEG-TAKOORIDDA IYO LAYNTA EEEYADA RAABIYADA (XABADDA)</i> <i>QABA AMA LAGU TUHUN-SAN YAHAY INAY QABAAN</i> .....	70
QODOBKA 9.3.3 .....	70
QODOBKA 9.4 .....	71
<i>QABASHADA /GACAN KU DHIGIDA XOOLAHA IYO BADEECOYINKA</i> <i>XOOLAADKA</i> .....	71
QODOBKA 9.4.1 .....	71
<i>SOO QABASHADA NEEFKA</i> .....	71
QODOBKA 9.4.2 .....	72
<i>LA WAREEGIDDA XOOLAHA AMA BADEECOYIN XOOLAADKA</i> .....	72
QODOBKA 9.4.3 .....	72
<i>SIDA LAGA YEELAAYO XOOLAHA LALA WAREEGAY</i> .....	72
CUTUBKA 9.5 .....	72
<i>MAG-DHAW-BIXINTA</i> .....	72
QODOBKA 9.5.1 .....	72
CUTUBKA 9.6 .....	73
<i>NIDAAMYO CIQAABEED</i> .....	73

**LIFAAQA 1AAD** (Annex I)

Cudurrada liiska "A" iyo liiska "B" (OIE,  
xeerka caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha)

**LIFAAQA 2AAD** (Annex II)

Doorashada Guddoomiyaha Guddiga Sare ee  
Daryeelka Xoolaha Dalka (National Veterinary  
Board)

Foom 2/1

Tallaabada kowaad, waa foomka magac soo  
jeedinta

Foom 2/1

Tallaabada labaad, waa xaashida caddaynta

**LIFAAQA 3AAD** (Annex III)

Foom 3/1

Diiwaan gelinta iyo Ruqsad siinta  
aqoonyahannada daryeelka caafimaadka xoolaha  
Waa foomka 'Arjiga' ay ku codsanayaan  
dhakhaatiirta xoolaha, Farmashiyeyaasha,  
liyeyaal/farsamayaqaannada caafimaadka  
xoolahu in la diiwaan geliyo

Foom 3/2

Waa xaashida diiwaan gelinta

Foom 3/3

Waa ruqsaq/Laysinka dhakhtarka xoolaadha  
awoodd hawlgal siinaysa

**LIFAAQA 4AAD** (Annex IV)

Foom 4/1

Diiwaan gelinta Rugta Farmashiyeha Ganacsiga  
Daawada Xoolaha  
Waa arjiga lagu codsado diiwaan gelinta  
Rugta/Farmaishiye, Ganacsiga Daawada  
Xoolaha

Foom 4/2

Waa xaashida diiwaan gelinta rugta/Farmashiye  
ganacsi ee daawada xoolaha

**LIFAAQA 5AAD** (Annex V)

Foom 5/1

Diiwaan gelinta/Ruqsadda keenista,  
(Importation) iyo ka ganacsiga Jumlo/ Tafaariiq  
daawada xoolaha

Foom 5/2

Waa foomka arjiga lagu codsanayo diiwaan  
gelinta laysinka (Ruqsadda) Ganacsadaha  
daawada xoolaha ee tafaariiqda iyo jumlada

Foom 5/3

Diiwaan gelinta Ganacsadaha tafaariiqda iyo  
jumlada ee daawada xoolaha

Waa ruqsadda ganacsade daawada xoolaha ee  
tafaariiq iyo jumlo

**WAAXDA 1AAD**

(SECTION 1)

**CADDAYMO**

(DEFINITIONS)

*Caddaymo iyo micna ka tarjumid guud (laga soo xigtay qaamuunka caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha, OIE 2002)*

*Ulajeedada qaamuunakan; ee erayada hoos ku qoran micnahooda waxaa loola jeedaa sida soo socota:*

**XOOLAHA/NEEF**

(ANIMAL)

Waxaa loola jeedaa kuwa dhashooda nuujiya, shimbiraha amase shinnida

**NEEF LA GAWRACAY**

(ANIMAL FOR SLAUGHTERING)

Waa neef la doonayo in dhaqso loo gawraco/qalo (muddo gaaban gudaheed) ayada oo uu koontaroolayo xafiis dawladeed ee ku hawl leh daryeelka caafimaadka xoolaha

**XAALADDA CAAFIMAADKA XOOLAHA**

(ANIMAL HEALTH STATUS)

Waxaa loola jeedaa xaaladda uu ku sugan yahay Dal amase Aag marka laga eego dhanka cudurrada xoolaha ayada oo la raacayo hab raacyada (siyaabaha) ku qoran qaynuunaka lagu wajahayo cudurrada

**KAWAAN LAANSIXIYEY/SHARCIYAYSAN**

(APPROVED ABATOIR)

Waa xarun lagu qalo/gawraco xoolaha hilibahooda dadku quuto, maamulka daryeelka caafimaadka xoolu'uns ufasexey in dibedda loo dhoofin karo

**BAR/KADIN XUDUUDEED**

(BORDER POST)

Waa bar (meel) kasta oo xuduudaha dalka ku taal oo ganacsiga caalamiga ah u furan, ha ahaato gegi dayuuradeed, deked amase kastam dhuleed

**XAALAD CUDUR**

(CASE)

Waa neef xoola ah oo qaba cudurka Caal (gaafa) ama Cashi

**XARUNTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA XOOLAHA**

(ANIMAL HEALTH SERVICES CENTER)

Waa xarun lagu sameeyo Shaybaarka (Clinical examination) sheegidda cudurrada (Diagnosis of diseases), daawaynta xoolaha jirran, qalliinka jirka xoolaha, tala bixinta caafimaadka xoolaha, bixinta shahaadada caafimaadka xoolaha (Provision of animal health certification), isticmaalka Anti-Ectoparasites iyo Anti-Endoparasites. Waxaa kale oo lagu sameeyaa adeegga tallaalka lagaga hortagayo cudurrada ee ku qoran taxanaha B ee cudurrada xoolaha (eeg Lifaaqa 1aad).

**QAANUUN  
(CODE/LAW)**

Waxaa loola jeeda sharciyad ah "Qaanuunka Caafimaadka Xoolaha" oo nuxurka murtidiisa loola jeedo mid waafaqsan tilmaamaha xeerka caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha (OIE, International Animal Health code).

**CUDUR  
(DISEASE)**

Waa jirro ku soo shaac baxda qaab Shaybaar (Clinical) ama/iyo qaab pathological ah (jirka neefka lagu ogaan karo).

**HUBINTA/SHEEGISTA CUDURKA  
(DISEASE DIAGNOSIS)**

Waa tuhun amase hubaal in cudur jiro (taagan yahay) amase jirro/Caal neefku qabo

**LA DAGAALLANKA WAXYAABAHA CUDURRADA XOOLAHA SABABA (DIS-  
INFECTION)**

Waa adeegsiga hab raac lagula dagaalo laguna baabi'yo waxyaabaha sababa cudurrada xoolaha ku dhaca (Infectious and Parasitic agents) sida kuwa ay dadka u gudbiyaan (Zoonoses) oo lagu buufiyo xerada, baabuurta iyo qalab kale oo contaminated noqday si dadban amase si toos ah.

**CAYAYAAN BAABI'IN  
(DISINSECTISATION)**

Waa hannaan loo adeegsado ciribtirka "Arthropods" kuwaas oo sababikara cuduro amase noqnkara cudur side (Potential vectors of infectious agents) ee cudurada xoolaha waxaana kamid ah: Zoonoses.

**HANAAN DURBADIIBA LAGU KASHIFO CUDURRADA  
(EARLY DETECTION SYSTEM)**

Waa hannaan ay isticmaalaan u heellanayaasha hawlaha caafimaadka xoolaha (Veterinary Services) si ay durbadiiba ay u ogaadaan una aqoonsadaan cudurrada xoolaha

**DALKA DHOOFIYA  
(EXPORTING COUNTRY)**

Waxaa loola jeedaa Dal ka badeecadaha u dhoofiya dal kale

**AAG FAYOW  
(FREE ZONE)**

Waxaa loola jeedaa aag cayiman oo ku dhexyaal dal aan laga soo sheegin/warbaahin wax cudur xoolaad ah oo ka mid ah kuwa qaynuunka ku qoran, oo wakhtigaasi isaga ah cudurkaas lagaga dhawaaqay OIE xeerka Caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha. Islamakaasi dalkaasi cuduudhiisa iyo gudhiisaba Hay'ada caafimaadka xooluhu waxay si dhab ah/taabba gal ah u adeegsadeen qaabka rasmiga ah ee xakamaynta cudurrada xoolaha, waxyaabaha xoolaha laga soosaaro iyo daabuliddooda.

**DALKA SOO ROGA/KEENA**

(IMPORTING COUNTRY)

Micnuhu waa dalka ugu danbaysta badeecado loo soo diray ay u soo degaan. Waa dalka ay uga soo degaan badeecado dal kale u Soo diray.

**XAWLIGA DILLAACA CUDURRADA**

(INCIDENCE)

Waxaa loola jeedaa: Inta jeer oo muddo/waḳhti cayiman kuna siman: Xaaladda/dhacdooyin cusub amase cudurro ay ka dhex dillaacaan xoolaha/dadka halista ku sugan ee jooga/carri gaar ah (BAR TILMAAMEED AH)(A GIVEN AREA) Jiid markaasi looga dan leeyahay.

**AAG AAN FAYOOBAYN**

(INFECTED ZONE)

Waxaa loola jeedaa Aag laga shakisan yahay in uusan ka jirin cudurka goortaasi laga arrinsanayo, iyada oo loo hoggaansamay shuruudaha ku qoranxeerka Caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha (OIE CODE).

**CAAL HURGUN**

(INFECTION)

Waxaa loola jeedaa kolka Bathojeenic Ajent (Pathogenic Agent) uu ku jiro neefka jirkiisa

**SHAHAADADA/XAASHIDA CAALAMIGA AH EE CAAFIMAAD QABKA XOOLAHA**

(INTERNATIONAL VETERINARY CERTIFICATE)

Waxa weeye xaashida ama shahaadada ka warbixinaysa fayaqabka/caafimaadqabka xoolaha ama badeecadda la dhoofinayo. Isla markaasina xaashidaasi waxay u qorantahay loona soo saaray hab raac waafaqsan xeerka caalamiga ah ee OIE.

**GANACSIGA CAALAMIGAAH**

(INTERNATIONAL TRADE)

Waxa weeye badeecada dalalka isaga gudubta ha ahaato mid dal dhoofinayo (Export) mid la soo rogayo (Import) amase dal/dalal sii maraysa (Transit).

**RUQSAD**

(LICENCE)

Waxaa loola jeedaa ruqsad qaanuunkani u jideeyey in dhakhaatiirta xooluhu ay xirfaddooda ku shaqaystaan

**DHAKHTAR XOOLAAD RUQSAD LEH**

(LICENSED VETERINARY SURGEON)

Waxa weeye dhakhtar xoolaad ruqsad (License) qaanuunkani u jideeyey haysta, taas oo u suurto gelinaysa inuu qaban karo waxyaalaha la xiriira caafimaadka xoolaha oo idil sida dawaynta iyo qalliinka (surgery) xoolaha

**CUDURRADA KU QORAN LIISKA "A"**

(LIST "A" DISEASES)

Waxa weeye liiska cudurrada la isu gudbiyo (Transmissible diseases), waxayna aalaaba u faafaan si halis iyo deg-degba leh. Maaddaama ay xuduudaha dalalka ay si fudud uga kala tallaabaan

cudurradaasi waxay leeyihiin khatartooda bulsho-anaqaale amase caafimaadka guud (public health) kuwaas oo ahmiyad iyo saamayn wayn ku leh ganacsida caalamiga ah ee xoolaha iyo badeecadda xoolahaba (Animal Products). Mar allaale iyo markii laga war helo cudurradaasi waxaa la war geliyaa hay'adda caalamiga ah ee OIE.

### **CUDURRADA KU QORAN LIISKA "B"**

(LIST 'B' DISEASES)

Waa cudurro la isu gudbiyo (Transmissible Diseases) oo loo aqoonsanyahay in ay ahmiyad iyo saamayn ku leeyihiin bulshada-dhaqan dhaqaale iyo/amase ay caafimaadka guud ku leeyihiin dalalka gudahooda, kuwaasi oo ahmiyad wayn u leh ganacsiga caalamiga ah ee xoolaa iyo badeecadaha (Animals and Animal Products). Cudurradaas warbixintooda waxaa la gudbiyaa sanadkiiba hal jeer amase inta jeer oo hadba loo arko in ay lagama maarmaan tahay.

### **HILBO**

(MEAT)

Waxaa loola jeedaa dhammaan hilbaha neef xoolo ah ee la cuni karo (edible parts of an animal)

### **WASIIR**

(MINISTER)

Waxaa weeye: Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Cimilada (MOLAE).

### **WAREEGTO WASAARADEED**

(MINISTERIAL DECREE)

Waxaa weeye wareegto wasiirku ka soo saaro arrimaha hawsha wasaaradda la xiriirta sida ku qeexan qaanuunkan

### **CUDDUR LA ISKA WARGELIYO**

(NOTIFIABLE DISEASE)

Waa cudur uu liiska geliyey maamulka caafimaadka xoolahu (Veterinary Administration) oo mar allaale markii jiritaankiisa la kashifo amase la tuhmo, durbadiiba lala socodsiiyo xafiiska dawladeedka caafimaadka xoolaha (Veterinary Authority).

### **WARGELIN**

(NOTIFICATION)

Waxaa weeyey hab raaca waafaqsan tilmaamaha xerka caalamiga ah ee OIE, oo mar allaale markii la tuhmo amase la xaqiijiyo in cudur dillaacay:

- a) Maamulka caafimaadka xoolahu war geliyo xafiiska dhexe.
- b) Xafiiska dhexena uu war geliyo maamulka caafimaadka xoolaha.

### **DHAKHTAR XOOLAAD RASMI AH**

(OFFICIAL VETERINARIAN)

Waa dhakhtarka xoolaha ee awoodna ka haysta maamulka caafimaadka xoolaha dalka una idman (Authorized) hawl fulinta la xiriirta caafimaadka xoolaha iyo/amase biaritaanka caafimaadka guud ee badeecooyinka marka ay munsib tahay iyo soo amridda (bixinta) shahaadada fayaqabka iyadoo la raacayo tilmaamaha ku qeexan xeerka Caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha ee OIE.

**BADEECADA DADKU QUTO EE ISIR-XOOLAADKAAH**  
(PRODUCTS OF ANIMAL ORIGIN INTENDED FOR HUMAN CONSUMPTIONS)

Waxaa loola jeedaa: Hilbaha aan maraxa ahayn (Fresh meat), Waxyaabaha hilbaha laga sameeyo amase ay isin u yihiin (Meat products) (Gelatine) ukunta, waxyaabaha ukunta lagala soo baxo (Egg products), caanaha iyo waxyaabaha lagala soo baxao sida farmaajadda iyo malabka marka loogu talagalo in uu dadku quto.

**XERO/RUG/EDEGTAKOOR**  
(QUARANTINE STATION)

Waxa weeye: Rug/Xero maamulka daryeelka caafimaadka xooluhu ay si gaar ah ugu hayaan xoolo edeg- katakoraan (animals isolation) oo laga ilaalinayo in ay si toos ah amase dadban ugu dhawaadaan xoolaha kale, iyo si loo darso xaaladdooda caafimaad muddo cayiman gudaheed iyo weliba in haddii ay munaasib tahay baaritaan iyo daaweynba lagu sameeyo xoolahaas edeg-takoraan.

**DIWAAN HAYAHA**  
(REGISTRAR)

Waxaa weeye: Diiwaan hayaha caafimaadka xoolaha u xil saran sida ku qeexan qaybta 7-aad ee qaanuunakan.

**DIWAANKA**  
(REGISTER)

Waxaa weeye: DIWAANKA caafimaadka xoolaha (Veterinary Register) ee uu hayo Diwaan hayuhu, ayna ku qoran-yihiin magacyada Diwaanka- gashan (Registered) ee dhakhtaradda caafimaadka xoolaha Farsamo yaqaanadda daawada xoolaha (Zoo-Technicians Pharmacists) iyo kaaliye-yaasha caafimaadka xoolaha (Animal Health Assistant)

**DHAKHTAR DIWAAN-GASHAN**  
(REGISTERED VETERINARY SURGEON)

Waxaa weeye = Dhakhtar xoolaadka magaciisu ku qoran yahay Diwaanka.

**AAGLA ILAALINAYO**  
(SURVEILLANCE ZONE)

Waxaa loola jeedaa: Aag xuduud ay isla wadaagaan Aag fayow oo kala dhexgala/ kala sooca. Aag fayaw iyo Aag aafeysan. Aagga la-ilaalinayo waa in xoog la saaraa ilaalinta iyo u kuur galka cudurrada

**GAADIID**  
(VEHICLE)

Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo gaadiika la rarto/wax lagu daabbulo, ha ahaato mid dhulka, badda amase cirka mara.

**MAAMULKA DARYEELKA XOOLAHA**  
(VETERINARY ADMINISTRATION)

Waxaa loola jeeda adeegga daryeelka xoolaha ee dawladda (Government Veterinary Services) oo dalka dhammaantiis u xilsaaran fulinta iyo kormeerka hawlaha la xiriira caafimaadka xoolaha iyo shahaaadada caalamiga ah ee caafimaadqabka xoolaha oo soo saariddeeda loo maro shuruudaha ku cad xeerka OIE.

**XAFIISKA DARYEELKA XOOLAHA**  
(VETERINARY AUTHORITY)

Waa xafiiska adeegga daryeelka xoolaha (Veterinary Services) oo hoos taga maamulka daryeelka xoolaha (Veterinary Administration), waxayna si toos ah mas' uul ka yahay dabbaqaadda taabba gelinta hawlaha caafimaadka xoolaha ee ku wajahan jiid cayiman oo dalka ka mid ah (Specified area in the country). Waxa kale oo xafiiskaasi mas' uul ka noqon karaa amase uu kor ka ilaalin karaa (Supervision) bixinta shahaadada caalamiga ah ee caafimaad qabka fayoobida xoolaha (Issuing of International Veterinary Certificate).

**GUDDIGA DARYEELKA XOOLAHA**  
(VETERINARY BOARD)

Waxa weeye guddiga daryeelka xoolaha ee dawlad goboleedka Puntland ee Somaaliya

**ADEEGYADA/HAWLAHA DARYEELKA XOOLAHA**  
(VETERINARY SERVICES)

Adeegyada/hawlaha daryeelka xooluhu waxa uu ka koobanyahay: Maamulka daryeelka xoolaha iyo dhammaan xafiisyada daryeelka xoolaha.



**TILM**  
(SECTION 2)

**CUTUBKA 2.1**  
(CHAPTER 2.1)  
**UJEEDDOOYIN IYO QAAB HAWLEED GUUD**

**QODOBKA 2.1.1.**  
(ARTICLE 2.1.1)

Adeegga daryeelka/daawaynta xoolaha ee dawlad goboleedka Puntland waxay xaqiijinaysaa/kifaala qaadaysaa daryeelka caafimaadka xoolaha dalka iyada oo raacaysa hab waafaqsan siyaasadda iyo strajeyiyadda horumarineed ee dhaqaalaha dalka; awooddeeduna waxay ku fidsantahay dhammaan dalka Puntland si loo fuliyo hawlaha hoos ku taxan:

- a) Sare u qaadidda iyo gacan ku ahaynta xaaladda caafimaad ee xoolaha
- b) K qayb qaaadashada daryeelka caafimaadka dadka
- c) Tababar gelinta qaab hawleedyada iyo hab raaca shahaadada caalamiga ee caafimaadka xoolaha iyo kormeerka, ilaalinta iyo dhawrista ku dhaqankooda
- d) Kifaala qaadka (xilka) xannaanada iyo daryeelka xoolaha.

**QODOBKA 2.1.2**  
(ARTICLE 2.1.2)

**QAAB HAWLEEDKA /HAB RAACA ADEEGGA DARYEELKA XOOLAHA**  
(FUNCTIONS OF THE VETERINARY SERVICE)

Xilalka adeegga daawaynta xoolaha waxaa ka mid ah:

- a) Ilaalinta iyo la socodka cudurrada
- b) Baarista, xog warranka, war baahinta iyo sheegista cudurrada
- c) Ka hortagga, xakamaynta iyo cirib tirka/daba goynta cudurrada
- d) Xakamaynta Zoonoses, nadaafadda calafka iyo baaritaanka hilbaha (Meat inspection).
- e) Qorshaynta iyo tabaabushaha ku wajahan xaaladaha gurmada deg-degga ah.
- f) Edeg takoorka (Karantiinka)
- g) Baaritaan iyo Shahaado fayaqab siinta xoolaha dalka laga dhoofiyo iyo kuwa la soo geliyaba looguna sameeyo qaab waafaqsan nidaamka caalamiga ah
- h) La socodka/daba galka cudurrada duur joogta
- i) La socodka arrimaha khuseeya daryeelka caafimaadka kalluunka biyaha berriga lagu beero
- j) Xog warran u gudbinta hay'adaha caalamiga ah iyo dalalka kale ee arrimahani khuseeyaan
- k) Adeegyaha Shaybaarka
- l) Baaritaan lagu sameeyo daawada, fayadhawrka (Vaccines) xoolaha iyo waxyaabaha kale ee biyolojikada ah
- m) Sugitaanka in xoola loo dhaqo guud ahaan si naxiriis leh iyo qaab daryeel wacan leh suuqgayntooda, daabbuliddooda iyo daadgureentooda
- n) Fulinta tababarro, cilmibaaris, xirfad kordhin iyo horumarin
- o) Nidaamin, la socod iyo taageeridda dan-wadaagaha kale (sida ururrada caalamiga ah) oo ku hawllan arrimaha daryeelka caafimaadka xoolaha.

**CUTUBKA 2.2**  
(CHAPTER 2.2.)

**MAS'UULIYADDA SEKTORKA GUUD IYO KAN GAARKAAH EE HAWLAHA**  
**CAAFIMAADKA XOOLAHA**  
(PUBLIC AND PRIVATE SECTOR ANIMAL HEALTH SERVICES)

**QODOBKA 2.2.1**  
(ARTICLE 2.2.1)

**DHAKHAATIIRTA XOOLAHA, SHARIKADAHHA CAAMKA AH IYO KUWA**  
**GAARKA AH**  
(PUBLIC, ENTERPRISES OR PRIVATE VETERINARY SURGEONS)

- 1) Adeegga caafimaadka xooluhu wuxuu ku salaysan yahay: Hawlaha ay fuliyaan hay'adaha dawladda, sharikadaha iyo dhakhaatiirta xoolaha ee gaarka ah.

**QODOBKA 2.2.2**  
(ARTICLE 2.2.2)

**MAS'UULIYADDA SECTORRADA DAWLADDA IYO KUWA GAARKA AH.**  
(RESPONSIBILITIES OF THE PUBLIC AND PRIVATE SECTORS)

- 1) Xilalka iyo kaalimaha khuseeya sektorka gaarka ahi waxay ka kooban yihiin:
  - a) Hawlaha shaybaarrada.
  - b) Dibad ka keenista (soo dejinta), qaybinta, suuqgaynta, bakhaar ku keydinta iyo ganacsiga tafaariiqda ah ee daawada xoolaadka, kiimikada iyo qalabka loo adeegsado hawlaha xannaanada iyo caafimaadka xoolaha
  - c) Maaraynta sharikadaha wax soo saarka iyo ganacsiga xannaanada xoolaha iyo badeecooyinka la xiriira, sida baayac mushtarka xoolaha nool iyo mira dhalkooda (caanaha, hilibka iyo hargaha iyo saamaha, iwm)
- 2) Xilalka hawlaha daryeelka caafimaadka xoolaha (*Qod. 2.1.2*) ee aan u tilmaaneen "Gaarka ah" (*Qod. 2.2.2*) waxay hoos tegayaan dawladda. Laakiinse fulinta hawlahaasi "Guud" waxaa loo wakiilan karaa amase qandaraas lagu siin kara sektorka gaarka ah, Islamarkaasna "Maamulka guud ee daryeelka caafimaadka xooluhu" wuxuu gacanta ku haynayaa nidaaminta iyo kormeerka (Control) hawlahaasi.
- 3) Maamulka daryeelka caafimaadka xooluhu wuxuu abuurayaa jawi dhiiri gelinaya horumarinta sektorka gaarka ah, iyo markay suurto gal tahayba inuu xilalkiisaasi ku wareejeo sektorka gaar ka ah, taas waxaa loola jeedaa: Maamulka guud wuxuu hawlihiisa qandaraas ku siin karaa dhakhtar xoolaad, sharidad amase urur gaar ah oo khibrad xirfadeed sare iyo qalabka loo baahanyahay haysta.

- 51
- 4) Maamulka guud wuxuu awood u yeelankaraa fulinta adeegyo kale oo hawlaha caafimaadka xoolaha la xiriira isaga oo kharash iska bixinteeda (Cost Recovery) ka qaadayaa mar allaale marka ay suurto gasho cidda adeegga lo qabtay, khidmaddaasi waxaa loo qaadayaa qaabka qaanuunkani jideeyey.

**CUTUBKA 2.3**  
(CHAPTER 2.3)  
**HAB RAAC HAWLEEDKA XAFIISYADA**  
(INSTITUTIONAL PROCEEDURE)

**QODOBKA 2.3.1**  
(ARTICLE 2.3.1)

**QAAB DHISMEEDKA HAWLAHA CAAFIMAADKA XOOLAHA**  
(VETERINARY SERVICE STRUCTURES)

**WASIIRKA**  
(THE MINISTER)

- 1) Wasiirku waa maamulka ugu sarreeya maamulka daryeelka xoolaha, wuxuuna mas' uul ka yahay guud ahaan siyaasadda dalka ee ku wajahan xannaanada xoolaha iyo hawlaha la xiriira.

**SARKAAL MADAXEEDKA DARYEELKA XOOLAHA**  
(CHIEF VETERINARY OFFICER)

- 1) Hawlaha daryeelka xooluhu waxay hoos imanayaan xukunka/awoodda Sarkaal-Madaxeedka daryeelka xoolaha (Chief Veterinary Officer, CVO) kaas oo loola jeeda madaxa agaasinka caafimaadka xoolaha (Head of the Directorate of Animal Health) Wuxuuna warbixin u gudbiyaa oo hoos tagaa Agaasimaha Guud iyo Wasiirka Wasaaraddiisa (WXXBC).

**QODOBKA 2.3.2**  
(ARTICLE 2.3.2.)

**MAS'UULIDDA SARKAAL MADAXEEDKA DARYEELKA XOOLAHA**  
(RESPONSIBILITIES OF CHIEF VETERINARY OFFICER)

- 1) Waajibaadka Sarkaal - Madaxeedka daryeelka xoolaha waxaa ka mid ah kuwa soo socda:  
a) Soo jeedinta siyaasadda iyo stratijiyadda dawladda ee ku wajahan caafimaadka xoolaha

- b) Kala mudnaan siinta tallaabooyinka wax qabad ee ku qotoma natiijada ilaalinta (surveillance) xaaladda caafimaad ee hadba xooluhu ku sugan yihiin
  - c) Qorshaynta iyo taabba gelinta barnaamijyada kala duwan ee lagu horumarinayo xannaanada xoolaha
  - d) Diyaarinta miisaaniyadda la xiriirta barnaamijyadasi
  - e) Maaraynta shaqaalaha, qalabka iyo imkaaniyaadka
  - f) Qiimaynta (Evaluation) Barnaamijyada/Mashaariicda iyada oo laga eegayo is barbar dhigga kharashka iyo dakhliga (Cost Benefit analysis)
  - g) Sugitaanka iyo adkay ita iskaashiga lala leeyahay dalalka deriska ah, kuwa xiriirka ganacsi lala leeyahay iyo Hay'adaha caalamiga ah (International Organizations)
  - h) Dejinta/asaasidda qaab iskaashi iyo wax wada qabsi ee dhex mara Sektorrada qaabilsan adeegyada caafimaadka dadka iyo kan xoolaha, iyo waxyaabaha kale ee WXXBC (Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Cimilada)
  - i) Kontorolka/ilaalinta waraa ha xooluhu ka cabbaan oo ay ka dhalan karaan cudurrada dadka ku dhaca
  - j) Faafinta khabaarta iyo warbixinta ku saabsan cudurrada iyo xakamayntooda oo si loo baraarujio loona dardar geliyo dadwaynaha.
- 2) Sarkaal - Madaxeedka daryeelka caafimaadka xooluhu (CVO) wuxuu ka jawaabayaa mas'uulna ka yahay wixii ka yimaada ruqsadda caafimaad qabka xoolaha ee loo isticmaalo Ganacsiga Dawliga ah (The CVO is accountable for Veterinary Certification used for International Trade).

**QODOBKA 2.3.3.**  
(ARTICLE 2.3.3)

**AWOODDA NIDAAM-HOOSAAD / AWAAMIR DEJINTA**  
(POWER TO ISSUE INSTRUCTIONS)

- 1) Wasiirku isaga/iyada oo la tashanaya Agaasimaha Guud, SMDCX (CVO) iyo mas'uuliyiinta kale ee hawlaha khuseeyaan, wuxuu dejin karaa nidaam hoosaadyo, wareegtooyin iyo awaamir qoraal ah oo lagu sugayo habsami u taabbo gelinta qaanuunkan. Waxyaabaha ku qeexan qaanuunkan ka sokoow, Wasiirku wuxa kale oo uu awood u leeyahay:
  - a) Mamnuucidda amase nidaaminta (Regulate) marka ay la gudboonaato ganacsiga caalamiga ah ee xoolaha amase nooc ka mid ah, amase badeecooyinka isir xoolaadka ah sida: hilibaha, hargaha, maqaarada, dhogorta, digada/saalada, minada, daawada tallaalka, seerada (Sera) iyo waxyaabaha kiimikada amase biyoolojiga ah ee loo isticmaalo xakamaynta cudurrada xoolaha ee loo dirayo amase laga keenayo dal, deked amase carri kasta oo cayiman (To/From any specified country, Port or territory)
  - b) Soo saaridda amar Edeg - takoor (Karantiin) amase ku dabbaqid tallaabooyin cayiman ee baaritaan/kontrool caafimaad ee lagu sameeyo ganacsiga caalamiga ah ee xoolaha

- c) Dejinta/dhisi dda nidaam (hab-raac hawleed) rasmid ah oo dhakhaatiirt-xoolaadka dawladda u oggoanaya inay baaritaan ku sameeyaan caafimaadka xoolaha iyo/amase caafimaadka guud (Public health inspection) ee badeecooyinka, iyo inay bixiyaan shahaadada caafimaad qabka (Certification) marka ay munaasib tahay iyada oo la raacayo nidaamka ku qeexan xeerka caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha (OIE Code)
- d) Dejinta / soo saaridda hab-raac hawleed rasmi ah isaga o la tashanaya guddiga daryeelka caafimaadka xoolaha oo kaas oo u oggolaanaya fuliyeyaalka gaarka ah sida dhaktar-xoolaadyada, sharikadaha amase ururrada. Xafiisyada xilal rasmi ah (dawli)
- e) Hab raac lagu kala sooco hadba xaaladda caafimaad ee aagagga kala duwan si cudurrada loo xakamayeyo oo loola socdo iyada oo la raacayo xeerka caalamiga ah ee OIE, iyo soo saaridda farriimo-hawleedyo/awaamir (Instructions) hawl gal dheeri ah loo gelayo
- f) Dejinta wareegtooyin iyo hab raac hawleedyo ku saabsan cidda matalaysa (Liaison) iyo qaabka loola xiriirayo hay'adaha dawlaga ah (FAO, WHO, OIE, IAEA, WTO, iyo iwm), Shaybaarrada iyo xarumaha cilmi baaris goboleedyada/dawlaga ah (KARI, ILRI, iyo iwm), Waddamada deriska ah iyo kuwa dalkeenna la leeyahay xiriir ganacsi
- g) Go'aaminta heerka/qiimaha laga qaadayo (ka dib markii uu la tashado guddiga daryeelka caafimaadka xoolaha iyo ciddii kale ee ay hawlahaasi khuseeyaan), khidmadda adeegyada, khidmadda macaamiishu bixiyaan iyo khidmado kale ee qaanuunkani jideeyey in laga qaado ciddii hawl loo qabto
- h) Dejinta hab raac dawladeed rasmi ah iyo soo saaridda wareegtooyin ku saabsan maaraynta iyo isticmaalka daawo-tallaalka iyo waxyaabaha kale ee biyolojiya ah (Other biological materials). Ee xoolaha khuseeya
- 2) Ka dib markii uu wada tashi iyo is afgarad la yeesho xafiisyada / hay'adaha dawladda ee ay hawshu khusayso, Wasiirku xilal-hawleedyo cayiman ee adeegga caafimaadka xoolaha ku wareejin / xilsaari karaa guddiyo, wakaalado amase hay'ado uu dusha ka ilaaliyo lana xisaabtamo maamulka daryeelka xoolahu.

#### **QODOBKA 2.3.4**

(ARTICLE 2.3.4)

#### **GUDDIGA SARE EE DARYEELKA CAAFIMAADKA XOOLAHA (THE VETERINARY BOARD)**

- 1) Dawlad goboleedka Puntland waxay yeelanaysa guddi nidaamsan oo loo yaqaan: (Guddiga Daryeelka caafimaadka xoolaha) sida ku qeexan qaanuunkan wuxuu:
- a) Ahaanayaa mid ka madax bannaan oo uu aqoonsanyahay maamulka daryeelka xooluhu (Veterinary Administration)

54  
b) Dejiya nidaamka diiwaan gelinta dhakhaatiirta xoolaha iyo aqoonyahannada kale sida (Farmashiste, Entomolojist, Micro-biolojiste Iwm), kaaliye caafimaad xoolaad iyo farsamo yaqaan Shaybaar (Laboratory Technician), Cunno baare, rimay gacmeed sameeye, xirfadle tallaal sameeye iyo gargaare xoolaad.

c) Diyaarinta dhaqan-asluubed wanaagsan iyo anshaxa shaqada oo lagu hanuuniyo ayna ku dhaqmaan aqoonyahannada iyo xirfadleyaasha ku xusan qodoban faqraddiisa "b".

d) U heellanaanta hawl karnimo iyo hab-sami u fulinta hawlaha la xiriira caafimaadka xoolaha iyada oo lala kaashanayo maamulka daryeelka xoolaha., Goosanka Aqoonyahannada/Ururka dhakhaatiirta iyo Farsamo-yaqaannada daryeelka xoolaha. (Professional bodies, Association of Veterinary and Zoo-Technicians)

\*Guddiga sare ee daryeelka xooluhu waxa kale ee uu u xilsaaran yahay dhisidda iyo nidaaminta Ururka Dhakhaatiirta iyo Farsam-yaqaannada daryeelka xoolaha ee Dawlad Goboleedka Puntland.

## **CUTUBKA 2.4** (CHAPTER 2.4)

### **DIYAARINTA XEER HOOSAADYO** (DRAFTING LAWS AND REGULATIONS)

#### **QODOBKA 2.4.1** (ARTICLE 2.4.1)

1) Awoodda diyaarinta iyo soo saarridda xeer hoosaadyo iyo nidaam dheeri ah oo khuseeya ganacsiga caalamiga ah (Import / Export) iyo sugidda caafimaadka xoolaha si loo dhawro shuruudaha ay nagu xiraan dalalka xoolaha DGPL loo dhoofiyo iyo sida ku qeexan xeerka OIE, waxaana iska leh Maamulka daryeelka xoolaha iyaaga oo la tashanaya guddiga sare ciddii ay arrintani khusayso siiba Guddiga sare ee Daryeelka Caafimaadka Xoolaha.

**QAYBTA 3AAD**  
(SECTION 3)

**ISLA SOCODSIINTA CUDURRADA IYO WAAJIBAAD YO GUUD**  
(DISEASE NOTIFICATION AND GENERAL OBLICATIONS)

**CUTUBKA 3.1**  
(CHAPTER 3.1)

**WAAJIBAADYO GUUD**  
(GENERAL OBLIGATIONS)

**QODOBKA 3.1.1**  
(ARTICLE 3.1.1)

***XAALADDA GUUD EE ISLA SOCODSIINTA CUDURRADA.***  
(GENERAL CONDITION OF DISEASE NOTIFICATION)

1) Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu:

- a) Waa inuu abuuraa jawi suurto geliya fulinta xeerarka iyo nidaamyada caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha, uuna dhawraa hab raacyada iyo farriimaha hay'adaha caalamiga ah ee shahaada bixinta OIE, WTO, iyo nidaamyada hay'adaha hawlahaan dowlada ka ciyaara (FAO, WHO, IAEA) iyo inuu dhawro shuruudaha / hab dhaqanka la isula socodsiinayo cudurrada
- b) Inuu aqoonsado xaqa dal kale u leeyahay inuu qiimayn uu ku sameeyo isaga oo cuskanaya xeerka OIE hawlaha caafimaadka xoolaha ee DGPL, marka ay jirto asbaab la xiriirta ganacsiga labada dal ka dhexeeya ee xoolaha, badeecadda isir xoolaadka ah iyo badeecooyin kale
- c) Inuu dalalka kake ogaysiiyo (isagoo war ku u sii marinaya OIE) wixii xog warran ah oo loo baahanyahay si aad loogu yareeyo. Xadiddo fiditaanka cudurrada xoolaha oo ay muhiim tahay in la isla socodsi iyo (Notifiable current diseases), gaar ahaan maamulka daryeelka caafimaadka xooluhu waa inuu gudbiyaa xog warranada iyo war faafinta hoos ku taxan:
  - i) War baahin (Information) ku saabsan xaaladda caafimaadka xoolaha iyo hannaanka ilaalinta (Surveillance system) aagagga ka fayooow cudurrada ku qoran Liiska "A" iyo kan "B", iyo hab raacyada iyo nidaamyada taabba galka ah si loo joogteeyo xaaladda caafimaad ee aagagga fayooow. Warbaahintaasi cudurrada Liisaska "A" iyo "B" waa in loo gudbiyaa sida ugu dhakhso badan
  - ii) War baahin ku saabsan kaabayaasha loo Isticmaalo edeg-takoorka iyo qawaaniinta/ nidaamyada caafimaadka xoolaha ee khuseeya ganacsiga caalamiga ah (Dhoofinta / Keenista) xoolaha iyo badeecada ay isirka u yihiin.

- iii) Macluumaad tifaftiran oo ku saabsan kartida dawladdu u leedahay inay ku dhaqaaqdo tallaabooyin lagu xakameeyo cudurrada la isu gudbin karo (Transmissible diseases)
- iv) War baahinta arrimaha farsamada (Technical information) gaar ahaan kuwa khuseeya baarista / tijaabooyinka biyolojiga ah (Biological tests) iyo daawa-tallaalka (Vaccines) laga isticmaalo dhammaan amase qayba ka mid ah dalka Puntland.

**CUTUBKA 3.2.**  
(CHAPTER 3.2)

**WAR GELINTA / OGAYSIINTA**  
(NOTIFICATION)

**QODOBKA 3.2.1.**  
(ARTICLE 3.2.1)

Maamulka Daryeelka Xannaanada Xooluhu wuxuu OIE-d a u dirayaa:

- 1) War gelin lagu diray e-mail, Fax ama Telegraam 24 saac gudahood marka uu dillaaco cudur ku jira liiska "A" (eeg lifaaqa 1aad) ha ahaado mid caadi ah amase cudur soo cusboonaaday, haddii dalka ama aag ka mid ah horay loo aqoonsanaa inuu cudur ka fiyoow yahay
- 2) Natiijoohyin cusub oo muhiim oo laga gaaray cudur ku jira liiska "A" oo miena Epidemiojikal ah u leh dalal kale
- 3) Diagnoosiska mid gaar ah oo lagu arkay cudur ka mid ah kuwa ku jira liiska "A" waa haddii kaasi xambaarsan yahay xag caafimaad macluumaad Epidemiojikal ah
- 4) Warbixin bileed (Monthly report) ku saabsan jiritaanka ama jiritaan la'aanta, iyo waxyaabaha soo baxa oo muhiimad Epidemiojikal ah u leh dalalka kale kuna saabsan cudurrada aan ku susnayn liiska "A"
- 5) Warbixin sanadeed ku saabsan dhammaan cudurrada ku qoran liiska "A" iyo "B" iyo cudurrada kale oo ahmiyad dhaqaale – bulsho caafimaad ka xoolaha.



**CUTUBKA 3.3.**  
(CHAPTER 3.3.)

**JIID-U-KALA SOOCIDDA IYO TALLAABOYINKA XOOLA-DAAWAYNEED  
EE LAGA HIRGELIN KALO JIID AAFAYSAN**  
(ZONATION AND ZOO-SANITARY MEASURES APPLICABLE IN AN  
INFECTED ZONE)

**QODOBKA 3.3.1**  
(ARTICLE 3.3.1)

**ASTAAMAYNTA JIIDAHA KALA DUWAN SI LOO XAKAMEEYO CUDURRADA**  
(ZONAL CHARACTERISTICS FOR DISEASE CONTROL PURPOSES)

- 1) Maamulka daryeelka cudurrada xooluhu isagoo raacaya nidaamyada – hab raacyada (Guidelines) ee xeerka caalamiga ah ee OIE, wuxuu si sharci ugu jideeyey ugu dhawaaqi karaa jiidaha hoos ku xusan si loo xakameeyo cudurrada:
  - a) Aag cudur ka fayow (Disease free Zone)
  - b) Aag la ilaaliyo (Surveillance Zone) oo aag aafaysan (Infected Zone) ka sooca dalka intiisa kale
  - c) Aag dhexyaal ah (Buffer Zone) oo ah jiid ay dhammaan xoolaha ku nooli tallaalan yihiin si looga badbaado / samatabixiyo kuwa nool aag / jiid cudurka ka fayow
  - d) Aag aafaysan (Infected Zone) waa meel / jiid cudur ka jiro halka dalka intiisa kale uu cudurkaas ka fayow yahay.

**QODOBKA 3.3.2**  
(ARTICLE 3.3.2)

**TALLAABOYINKA XOOLA DAAWAYNEED EE LAGA HIRGELIYO AAG  
AAFAYSAN (CUDUR KA JIRO**  
(ZOO-SANITARY MEASURES TO APPLY IN AN INFECTED AREA)

- 1) Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu, waxa uu ballaarin karaa, ka dhimii karara amase wax ka beddeli karaa baaxadda ay ku egtahay aagga lagu dhawaaqay in uu yahay mid cudur ka jiro (Infected Zone)
- 2) Aaaggan waxaa loo aqoonsanaanayaa inuu yahay mid cudur gaar ahi (Cayiman) ka jiro ilaa laga dhaafdo (ka dib) muddada jiritaanka cudurkaasi ee ku qeexan xeerka caalamiga ah ee OIE, kana gudbo muddadii warbixintii ugu dambaysay laga soo saaray muddadaasi oo Maamulka Daryeelka Caafimaadka xooluhu uu xaqiijiyey in la qaaday tallaabooyin munaasib ah ee caafimaada iyo daawaynta xoolaha, si looga hortago rogaal celinta amase sii faafidda cudurkaasi

- 3) (Infected Zone) iyo qaybta aagga fayow ee dalka, waa in qummaati loo ilaaliyaa (Kontoroolaa) waxaan la qaadi karaa lagu dhaqaaqi karaa tallaabo kasta oo ka mid ha kuwa soo socda:
- Neef nooli waa reebban yahay inuu ka baxo aaggaai amase
  - Xoolaha waxaa aaggaa si looga dhaqaajin karaa iyada oo lagu daabbulo gaadiid matoor ku socda oo geeya kawaan khaas ah oo ku yaal aag la ilaaliyo. (Surveillance Zone) si durbadiiba loogu gowraco, amase
  - Marar dhif ah xoolaha nool ayaa geli kara aagga la ilaaliyo, bi-shardo inay xoolahaasi soo mareen kontorool caafimaad oo uu go'aamiyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu, isla markaasna cudur ka fayoo bida xoolahaasi waa inay tahay mid lagu caddeeyey / sugay baaritaan caafimaad ka hor inta aanay soo gelin aagga la ilaaliyo, amase
  - Xoolaha noolli waa inay ka bixi karaan aaggaasi aafaysan kol haddii aanay suurto gal ahayn isu gudbinta cudurradii xaaladda Epidemiololojikaalka ah awgood

#### **CUTUBKA 3.4** (CHAPTER 3.4)

### **WAR GELINTA/DIGIDDA CUDURRADA IYO AWOODAHA DALKA GUDIHIISA** (DISEASE NOTIFICATION AND POWERS WITHIN THE TERRITORY)

#### **QODOBKA 3.4.1** (ARTICLE 3.4.1)

#### **DIGNIIN KA BIXINTA CUDURRADA** (DISEASE NOTIFICATION)

- Dhakhtar xoolaad (Any Veterinary doctor) amase aqooyahan kasta (oo ka mid ah kuwa ku tilmaaman qaybta 2-aad, (Gutubka 2.3, Qodobka 2.3.4.b) oo aaminsan amase shakisan in cudur faafaa jira waa inuu durbadiiba ogaysiiyaa oo war baahin u gudbiyaa dhakhtar xoolaadka rasmiga ah (Official Veterinarian) amase Sarkaalka ugu sarreeya xafiis dawladeedka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ee ku sugan meesha ugu dhaw
- Warbixintaas (Reporting) loo dirayo Saraakiishaasi kor ku xusan iyo Chief Veterinarian Officer (CVO) waxaa loo samaynayaa/diyaarinayaa wakhtiyo/muddo u dhaxaysa (sida: maalinle, toddobadle, bille, iyo sanadle) qaab iyo hab raacyada ku qeexan qaanuunakan iyo go'aamada ka soo baxa Maamulka Daryeelka Xoolaha.

**QODOBKA 3.4.2**  
(ARTICLE 34.2)

**AWOODAHA**  
(POWERS)

- 1) Dhakhtar-xoolaadka rasmiga ah (*Official Veterinarian*) amase Xafiis dawladeedka Daryeelka Caafimaadka Xoolahu wuxuu leeyahay awood kormeer/baaritaan fitisheed uu ku sameeyo:
  - a) Xoolaha iyo badeecooyinka laga soo saaro
  - b) Badeecooyinka loogu talagalay in xoolaha la siiyo
  - c) Badeecooyinka loogu talagalay daawaynta, baarista/baaraandegga iyo ka hortagga cudurrada xoolaha
  - d) Dulka, Dhismeyaasha, Hoosooyinka Qalabka iyo meelaha kale ee loo adeegsado xannaanada xoolaha
  - e) Gaadiidka xoolaha daabbula (Baabuurta, Maraakiibta) si loo hubiyo in xooluhu qabaan cudur cudur ka mid ah kuwa la isaga digo (la iska war geliyo) iyo in la hubiyo dhawrista hab raaca iyo nidaamyada qaanuunkan ku qaaxan oo la xiriira sugidda nadaafadda, fayadhawrka iyo la dagaallanka waxyaabaha cudurradu ka abuurmaan ee lagu sameeyo kaabayaasha sida qalabka iyo waxyaabaha kele ee la xiriira adeegyada xoolaha.
- 2) Xafiis dawladeedka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu wuxuu leeyahay awood sharciyeed uu ku geli karo kuna baari karo dhammaan kaabayaasha iyo qalabka ku xusan dhamman faqradda (d) iyo (e) ee qodobka (3.4.2 (1) si loo ilaaliyo caafimaadka xoolaha waana sida ku cad awaamirta iyo nidaamyada Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha.
- 3) Sida ku qeexan qaybta 2-aad, Cutubka 2.3, Qodobka 2.3.4.b ee qaanuunkan CVO-ku wuxuu fari karaa xafiis dawladeed kasta ee Daryeelka Caafimaadka Xoolaha amase aqoonyahan kasta inay ku dhaqaaqaan hawlgal kasta oo ka mid ah kuwa soo socda:
  - a) In la waydiiyo cidda ku shaqo leh keenista xog warranka iyo war baahinta ku saabsan cudur xoolaad ka jira amase la tuhunsanyahay inuu aagga ka jiro.
  - b) Sugitaan dhab ah oo lagu sameeyo dhawrista awaamiirta iyo tallaabooyin kasta oo CVO-ku u arko inay yihiin lagama maarman looga hortegayo laguna xakamaynayo cudurka.
- 4) Xafiis dawladeedka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu wuxuu awaamiir awooddiisa ku siman ku bixin karaa taabbagelinta iyo ku dhaqaaqidda tallaabooyin cayiman (Specific measures) oo la xiriira caafimaadka xoolaha aaggaas, isla markiina waxaa arrinta lala socod siinayaa CVO-ga.

**QAYBTA 4-AAD**  
(SECTION 4)

**GURMADKA DEG-DEGGA AH IYO WAX KA QABADKA CUDURKA  
XOOLAHA**  
(ANIMAL DISEASE EMERGENCY AND RESPONSE MANAGEMENT)

**CUTUBKA 4.1**  
(CHAPTER 4.1)

**HAY'ADAHA IYO WAKAALADAHA**  
(INSTITUTIONS AND AGENCIES)

**QODOBKA 4.1.1**  
(ARTICLE 4.1.1)

**KOOX WASAARADEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA EE CUDURKADA**  
(MINISTERIAL DISEASE EMERGENCY TASK FORCE)

- 1) WXXBC (The MOLAE) khusuusan/siiba Waaxda Caafimaadka Xoolaha waxay u fidsaaran tahay qorshaynta iyo hawlaha gurmadka deg-degga ah ee lagu xakamaynayo cudurrada xoolaha.
- 2) Wasiirka WXXBC wuxuu magacaabayaa / abuurayaa Koox wasaaradeedka koolaha hawlaha gurmadka deg-degga ah ee cudurrada xoolaha lagana ansixiyo gobolka iyo dalka. Kooxdaasi waxay ka kooban tahay xubnaha soo socda:
  - a) CVO-ga (Chief Veterinarian Officer) oo noqonaya guddoomiyaha kooxda guddiga mas'uulna ka ah ol-ole kasta oo lagu xakamaynayo cudurrada xoolaha
  - b) Madax-Qaybeedyada (Divisional Heads) xakamaynta cudurrada gurmadka gaarka ah (Privatization), caafimaadka guud ee xoolaha (Veterinary Public Health) iyo kuwa shahaado bixinta (Certification Division)
  - c) Madax qaybeedyada (Sectional Heads) ee xog warran iyo warbaahin cudurrada iyo feejignaanta gurmadka deg-degga ah, adeegyada shaybaarka iyo ilaalinta tayada (quality control) dhakhtar xoolaadka gaarka ah iyo aqoonyahannada caafimaadka xoolaha (CBAHW) baarista caafimaadka xoolaha iyo shahaada bixinta xoolaha hoofabaga iyo kuwa hilba baarista (Meat Inspection)
  - d) Isuduwe/xiriiriye goboleedka caafimaadka xoolaha (Regional Veterinary Coordination)
  - e) Guddoomiyaha guddiga Sare ee Daryeelka Caafimaadka Xoolaha (Chairman of Veterinary Board) iyo,
  - f) Laba sarkaal oo aqoonya hannaada caafimaadka xoolaha gaarka ah kana socda Ummada Aqoonyahannada Xannaanada Xoolaha Puntland (PULPA).

**QODOBKA 4.1.2**  
(ARTICLE 4.1.2)

**GUDDI QARAMEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA EE CUDURRADA**  
(NATIONAL DISEASE EMERGENCIES COMMISSION)

- 1) Dawlad Goboleedka Puntland waxaa ka jiri doona Gudi-Qarameedka Gurmada Deg-degga ah ee cudurrada, oo 18-kiisa xubnood ay soo magacaabeen wasaaradaha ama hay'adaha khuseeya ayna ansixiyeen golaha xukuumadda / Madaxwaynaha. Xubnaha guddiga gurmada waxay ka koobnaan ayan:
  - a) Ergo metesha xubnaha doox-awaaradeedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada (Qod.4.1.1.) ee WXXBC kuwaas oo noqonaya gatrabka / dhinaca farsamada ee guddi qarameedka iyo
    - b) Min hal qof oo ka socda:
      - i) Xafiiska Madaxtooyada/Golaha Xukuumadda
      - ii) Wasaaradda Caafimaadka (Xakamaynta cudurrada dadka iyo xoolahau isu gudbiuayaan/is qabadsiiyaan amase Zoonases Control)
      - iii) Wasaaradda Maaliyadda (Isuduwidda-maaliyadeed) (Financial Coordination)
      - iv) Wasaaradda Arrimaha Gudaha/Amniga Abaabulka iyo hawlgelinta guddoon goboleedka iyo Booliiska
      - v) Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer-miyiga (Abaabulka iyo Hantigelinta Dawladaha Hoose)
      - vi) Wasaaradda Qorshaynta iyo Tirakoobyada (Gudiga Gargaarka Caalamiga) hawlaha taakulaynta /saadka.
- 2) Guddi –Qarameedku wuxuu awarbixin u gudbinayaa wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Cimilada oo iyana warbixintaasi u sii gudbinaya Golaha Xukuumadda.

**CUTUBKA 4.2**  
(CHAPTER 4.2)

**DEJINTA BARNAAMIJ KA GURMADKA DEG-DEGGA AH IYO WAX KA  
QABADKA CUDURRADA**  
(DEVELOPMENT OF THE DISEASE EMERGENCY AND RESPONSE PROGRAM)

**QODOBKA 4.2.1.**  
(ARTICLE 4.2.1)

**XIL-HAWLEEDKA KOOXDA-WASAARADEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA AH  
EE CUDURRADA.**  
(FUNCTIONS OF THE MINISTERIAL DISEASE EMERGENCY TASK FORCE)

Koox-Wasaaradeedka gurmada deg-degga ah ee cudurradu wuxuu u xilsaaran yahay:

- 1) Diyaarinta iyo ka baaraandeg caadi ah ee Liiska cudurrada xoolaha ee loo baahan yahay in lagu wajaho gurmada deg-deg ah mar allaale marka ay dalka ku dhacaan iyo qeexidda startejiyadda iyo qorshyaal hawl-fulineed ee ku wajahan cudur kasta oo noocan ah
- 2) Diyaarinta iyo gacan ku aheynta / cusboonaynta liiska hay'adaha iyo wakaaladaha haysta khraad (Resources) iyo imkaaniyaad looga baahan karo barnaamijka gurmada deg-degga ah ee cudurrada xoolaha
- 3) Dejinta heshiisyo fududaynaya ka ayb-gal hawleed dhab ah ee hay'adaha iyo wakaaladaha kala duwan (Dawladda, Gaarka, iyo bulshada rayidka ah)
- 4) Diyaarinta xeer hoosaadyo ay ku dhaqmaan shirkadaha. Warshadaha wax soo saarkoodu, adeegyadooda iyo mehradahooda halis ka dhalan karto sida: kuwa daawada-tallaalka soo saara (Vaccine Production) amase wax yaabaha Biyolojiiga ah, warshadaha hilibaha iyo badeecada caanoodka (Meat and Dairy processing Plants), Kawaannada iyo Suuqyada xoolaha iwm.
- 5) Gacan ku haynta iyo ururinta xogta ku saabsan duunyada/xoolaha iyo duur jootgaba
- 6) Gacan ku haynta iyo kaydinta khariirado (Maps) xog tifaftirani ku qoran tahay oo ku saabsan (sida xooluhu deegaanka ugu qaybsan yihiin, qaab hayaanka iyo guuritaan xilliyeedka xoolaha, meelaha waraabka iyo xarumaha lagu hayo xoolaha (Holding Grounds)
- 7) Fulinta Qorshayaasha wax qabad (Plans of Action) heer qaran, gobol iyo degmabaiyo sugitaanka (ensure) isuduwidada/xiriirinta xag jiir (horizontal) iyo xag joog (vertical) ee hawlahaasi

**QODOBKA 4.2.2.**  
(ARTICLE 4.2.2.)

**XIL-HAWLEEDKA GUDDI-QARAMEEDKA GURMADKA DEG-DEGGA AH EE CUDURRADA**  
(FUNCTIONS OF THE NATIONAL DISEASE EMERGENCY COMMISSION)

Guddi-qarameedka gurmada deg-degga ah ee cudurradu wuxuu u xil searan yahay ku dhaqaaqid tallaabooyin hawl fulineed:

- 1) Ku dhaqaaqidda tallaabooyin hawl fulineed ee lagu hananayo laguna kasbanayo gargaarka caalamiga ah, maal gelin lacageed, qalab, gaadiid, adeegyo iyo khayraad kale oo dad, dhaqaale iyo kaabayaasha dhaqaale ee loo baahanyahay si loo fuliyo hawsha gurmada deg-degga ah ee lagu wajahayo cudurrada xoolaha markaay ku dhawaaqdo hay'ad-dawladeedka xilkaas lihi (Veterinary Authority)
- 2) Inay war geliso kuna boorriso ka qaybgalka hawlaha gurmada deg-degga ah dhammaan hay'adaha taakulaynta saadka iyo kuwa kale ee hawlahaasi khuseeyaan.

**QODOBKA 4.2.3**  
(ARTICLE 4.2.3)

**KAALINTA CVO-ga MARKA AY JIRTO XAALAD GURMAD DEG-DEG AH EE CUDUR.**  
(ROLE OF THE CVO DURING DISEASE EMERGENCY)

Dawrka uu ciyaaro CVO-gu waa sidan:

- 1) La talinta dawladda ee arrimaha la xiriira qaab dhismeedka, abuur sharciiyeedka koox wasaaradeedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada iyo guddi qarameedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada oo ay dejiyaan nidaam/xeer hoosaadyo, awaamir iyo itijaah siyaasadeed iyo u kuur gal (hadba muddo ka dib sii socodkooda iyo habboonaantoodaba)
- 2) La talinta guddi qarameedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada, xagga barnaamijka iyo qorshayaasha hawl-fulineed ee ku wajahan curmada deg-degga ah ee cudurrada
- 3) La talinta guddi qarameedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada arrimaha ku saabsan lacagaha kharashyada, iyo wax yaabaha kale ee lagu hawlgelayo loona baahanyahay si durba wax looga qabto cudurradaasi, dib u soo celinta beddelka hantida baaba'day amase horay loo isticmaalay,
- 4) Wax kale ee uu tala ka bixinayaa ururinta, abaabulka iyo raadinta kaalmada, deeq bixiyeyaasha (Donor's Emergency Aid)

**CUTUBKA 4.3**  
(CHAPTER 4.3)

**WAAJIBAADKA SHAKHSIYAAD KALE EE CAAFIMAADKA XOOLUHU  
KHUSEEYO MARKAAY DHACDO XAALAD GURMAD DEG-DEGA EE  
CUDURRADA XOOLAHA.**  
(OBLIGATIONS OF OTHER LIVESTOCK STAKEHOLDERS DURING DISEASE  
EMERGENCIES)

**QODOBKA 4.3.1.**  
(ARTICLE 4.3.1.)

- 1) Dhammaan dhakhaatiirta xoolaha, aqoonyahannada kale ee ku hawl leh daryeelka caafimaadka xoolaha sida: Mikrobiyoolojiistayaash, Entomoolojisteyaasha, Zoo-Tekniishanada kaaliyeyaasha caafimaadka xoolaha, Shaybaareyaasha, baareyaasha hilbaha (meat inspectors), tallaalayaasha iyo gargaareyaasha caafimaadka xoolaha iyo kuwa xoolaha ilaaliya / nafaqeeya iwm, waxay ku khasbanyihiin in ay si buuxda uga qayb qaataan hawlgalka kooxda gurmada deg-degga ah ee cudurrada xoolaha mar allaale markii uu ka codsado xafiisdawladeedka caafimaadka xoolaha ee arrintaasi daw u leh (Wherever requested by a competent Veterinary Authority)
- 2) Dhammaan shakhsiyaadka kale (stakeholders) ee xukuumiga (Public) amase gaarka ah (Private) siiba kuwa daawa xoolaaadka iyo midda biyolojiga dibedda ka keena / qaybiya (importers / distributors), ganacsatada xoolaha, kuwa xoolaha daabbula cir/ bad iwm. Waxaa loogu yeerayaa ka qayb qaadashada barnaamijka gurmada deg-degga ah ee cudurrada xoolaha; waana inay taakulayn iyo ka qayb gal hawleedba ugu deeqaan barnaamijkaasi markii, iyo qaabka uu uga codsado guddi qarameedka gurmada deg-degga ah ee cudurrada xoolaha. (National Disease Emergency Commission).



**QAYBTA 5-AAD**  
(SECTION 5)

**GANACSIGA CAALAMIGA / DIBEDDA EE XOOLAHA IYO WAXYAABAHA**  
**LAGA SOO SAARO**  
(EXPORT / IMPORT OF ANIMAL AND ANIMAL PRODUCTS)

**CUTUBKA 5.1**  
(CHAPTER 5.1)

**HAY'ADDA U IDMAN**  
(AUTHORIZED INSTITUTION)

**QODOBKA 5.1.1**  
(ARTICLE 5.1.1)

- 1) Adeegga daryeelka caafimaadka xooluhu (The veterinary service) wuxuu dalka oo idil ku leeyahay awood buuxda oo uu ku nidaamiyo dibed u diridda iyo ka keenista (Import/Export) xoolaha iyo badeecadda isir xoolaadka ah, isla markaas wuxuu xushmaynayaa / dhawrayaa shuruudaha ku xiran caafimaadka xoolaha iyo hab raac nidaamiyaha shahaado bixinta caalamiga ah ee faya qabka xoolaha (international veterinary certification procedure)

**CUTUBKA 5.2**  
(CHAPTER 5.2)

**DIB U DHOOFINTA / KA KEENIDDA XOOLAHA IYO BADEECOYINKA**  
**XOOLAHA**  
(ANIMAL AND ANIMAL PRODUCTS FOR IMPORT AND EXPORT)

**QODOBKA 5.2.1**  
(ARTICLE 5.2.1.)

- 1) Xoolaha nool iyo badeecooyinkooda loogu tala galay inay cunaan / quutaan dadka iyo xooluhu, iyo inay isticmaalaan warshadaha daawooyinku (Pharmaceuticals) iyo cilmi beeraad (Agricultural) waxaa la dhoofin karaa (Export) marka laga soo baxo / la dhawro shuruudaha laga doonayo sida ruqsadaha (Licences) iyo shahaadooyinka caafimaad qabka. Lama oggola in la dhoofiyo xoolaha iyo badeecooyinka hoos ku xusan:
- a) Xoolo loo soocday amase u xeraysan in la dhaqdo amase ay tarmaan iyo badeecooyin xoolaad wax soo saar loogu tala galay (sida: Ukumo dillaacinta, Shahwo xoolaadka iyo Embriyo-ga / Ova
- b) Xayawaanka duur joofta ah iyo siiba nabaatda (flora) u gaarka ah dhulka Somalia (Specific to Somali Ecology) amase qaarka u raaran nabaad guurka / suulid (On the verge of extinction)

- 2) In kasta oo ay jiraan caddaymaha ku qeexan qodobka 5.2.1 maamulka daryeelka caafimaadka xooluhu (Veterinary Administration) wuxuu bixin karaa ruqsad aan caadi ahayn oo uu ku oggolaanayo dhoofinta xoolo iyo badeeco xoolaad si gaar ah u tilmaaman. Waase marka ay jiraan xaalado ku qeexan qaanuunkan
- 3) Dhammaan xoolaha amase xoolo si gaar ah u tilmaaman amase badeecad xoolaad loogu tala galay quudista dadka, xoolaha, isticmaalka daawo soo saaridda (Pharmaceuticals) iyo cilmi beereedka (Agricultural use) waa la keeni karaa dalka (can be imported) waase in la dhawraa nidaamyada u degsan ruqsadaha iyo shahaadada caafimaadka iyo in aanay jirin shuruudo iyo nidaamyo xeerka dawladda ee arrintan khuseeya.

**CUTUBKA 5.3.**  
(CHAPTER 5.3)

**XARUMA HORIDDA/URURINTA, NASASHADA, XERAYNTRAAMASE  
BAARITAANKA XOOLAHA.**  
(COLLECTION CENTER, EN-ROUTE RESTING AREAS, OR CONTROL FACILITIES OR ESTABLISHMENTS)

**QODOBKA 5.3.1**  
(ARTICLE 5.3.1)

**XARUMAHA IYO KAABAYAASHA GANACSIGA. CAAFIMAADKA XOOLAHA  
(FACILITIES AND ESTABLISHMENTS)**

- 1) Daabayaasha iyo qalabka baaritaanka (Control) iyo xarumaha dhoofista, keenista iyo daabbulka xoolaha iyo badeecad xoolaadka dalka ku yaalli waxay ka kooban yihiin kuwa soo socda:
  - a) Xaruma - /Soohdimaadka (Border Posts) ku yaal xuduudaha DGPL la leeyahay gobollada / aagagga kale ee Somaaliya iyo Kilinka 5-aad ee Ethiopia oo ah gobolka ay Soomaalidu degto ee dalkaasi ka tirsan
  - b) Waddooyinka la soo mariyo xoolaha la dhoofinayo ee loo wado bartii laga dhoofin lahaa amase ay dalka uga bixi lahaayeen
  - c) Xeryaga xiikaha dhoofaa ay ku nastaan amase lagu hayo inta annay gaarin dekedda laga dhoofin lahaaa
  - d) Saldhigyada edeg-takoorka /karantiinka (Quarantine Stations)
  - e) Xeryaha lagu sii hayo ama lagu baaro ka hor intaan la dhoofin
  - f) Kawaanno oggolaasho sharciiyeed u haysta / qaanuunku u ansixiyey in lagu qali karo xoolaha hilbahoodana la dhoofin karo
  - g) Bakhaarrada meelaha lagu ururiyo / kaydiyo badeecado xoolaadka siiba bargaha. saamaha iho lafaha

- h) Kaabayaasha kale ee loo adeegsado fulinta hawlaha khuseeya xoolahaiyo badeeco xoolaadka la dhoofiyo sida kuwa ku yaal xaruma – soohdimaadka ihyo gegooyinka dayuuradaha.
- 2) Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xoolahu (Veterinary Administration) wuxuu u xilsaaranyahay wadidda iyo ku hawl-galka / adeegsiga dhammaan xeryaha / xarumaha. kaabayaasha ku tilmaaman qodobkan (5.3.1) faqraddiisa 1-aad iyo meelaha iyo qalabka kale oo kuwasi la jaadka ah oo si toos ah u hoos taga mas'uuliyadda iyo xukunka saraakiisha daryeelka caafimaadka xoolaha.
- 3) Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu (Veterinary Administration) marka ay u suurto gashaba waa inuu kaabayaashaasi, xarumahaasi iyo imkaaniyaadkaas ku debbiraa wax yaabaha loo adeegsado / isticmaalo hawl-galka adeegga daryeelka caafimaadka xoolaha oo isugu jira; shaqaale, qalab iyo meela lagu shaqeeyo, gaar ahaanna kuwa loo adeegsado:
- Doofinta, calaf-siinta iyo waraabinta xoolaha
  - Samaynta shaybaarista iyo sagbad ka qaadidda (detaining specimen)
  - Qabashada gaar u soocidda iyo edeg-takoorka (isolation) xoolaha jirran amase lagu tuhmayo inay qabaan cudur EPIEZOOTIC ah
  - Baaris lagu sameeyo gaadiidka / baabuurta xoolaha iyo badeeca-xoolaadka daabbula si loogu sameeyo cayayaan baabi'in (Disinsectisation) iyo (disinfection).
- 4) Marka ay habboontahay, maaraynta xeryaha; xarumaha amase qalabka loo adeegsado hawlaha la xiriira caafimaadka iyo daryeelka xoolaa iyo badeeco-xoolaadka la dhoofinayo. waxaa lagu warjeejin karaa Goosanka Dhaqaalaha Gaarka ah (Private Sector). Markaas oo kale sida qaanuunkani qeexayo, Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu waa inuu sameeyaa:
- Diiwaan gelin, ruqsad bixin iyo kormeerid khaas ah ee xarumaha iyo kaaba dhaqaale. iyo cid kasta oo loo xilsaaray fulinta hawsha iyo wax qabad cayiman
  - Kala noqoshada ruqsaddii iyo diiwaan gelintii loogu xilsaaray fulinta hawlaha iyo maaraynta meelaha ku tilmaaman qodobkan faqraddiisa 4-aad, xarafka (a) Shakhsiyaadka amase Shirkadaha kolka maamulka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ay u caddaato amase uu sabab macquul ah u hayo inaysan karti u lahayn amase u qalmin sii wadidda hawlahii horay loogu xilsaaray, waana in laga joojiyaa lagana mamnuucaan maaraynta kaabayaashaasi iyo ka sii shaqayntoodaba
  - Waa inuu sugaa in aysan koox yar oo ka kooban shakhsiyaad xayn ah amase dhawr shirkadood oo suuq xirato ahi, keligood gacanta ku dhigin oo isku koobin isticmaalka iyo ka faa'iidaydiga xarumaha, kaabayaasha iyo tashiilaadka kale ee loo adeegsado xoola dhoofinta.

- d) Waa inuu sugaa hirgelinta iyo dhawrista nidaamka ud egsan iyo hab raac hawlcedka lagu xaqiijinayo caafimadka xoolaha iyo bixinta shahaadada caafimaad qabka xoolaha la dhoofinayo.
- 5) Marka xeryaha, macmallada, xarumaha iyo kaabayaasha isticmaalkooda ganacsiga iyo maarayntooda ay gacanta ku hayaan shakhsiyaad amase shirkado gaar ahi, nidaamka iyo hab raacyada caafimaad (Prescribed Sanitary Measures) la rabo in la dhawro waxaa fulintooda sameeya dhakhtar-xoolaad rasmi ah (*Official Veterinarian*) oo hawlahaasi loo xilsaaray, wuxuuna yeelanayaa awood uu ku sameeyo / fuliyo baaris / kormeer dhab ah.e caafimaadka xoolaha, taasi waxay u bannaynaysaa inuu:
- a) Mamnuuco, xadeeyo, joojiyo amase nidaamiyo soo gelinta (Introduction) amase ka saaridda xoolaha, badeecadaha iyo qalabk kale xarunta /meela cayiman/ tilmaaman
  - b) Mamnuuco, xadeeyo, joojiyo amase nidaamiyo soo gelitaanka dadka xarumo / meelo cayiman / tilmaaman (Specified places of defined premises)
  - c) Ku shaabbadeyo/ calaamadeeyo summado rasmi ah (Official marks) ee lagu aqoonsado xoolaha, badeecadaha, Kontaynarada (Containers), xarumaha, qalabka (Equipment) iyo gaadiidka
  - d) Amar ku bixiyo fuliyana baaritaan/shaybaarid (Examination) tijaaba cilmiyeed (Testing) iyo edeg takoorka xoolaha (Isolation of Animals)
  - e) Sameeyo amase amro in la sameeyo la socod macmaleed (Clinical Monitoring) tijaabo baaritaanno, cudur caddaymeed (Diagnostic Tests) tallaalid iyo daawayn BROFILAATIK (Prophylactic) amase TERABIYUUTIK (Therapeutic) ah ee xoolaha, warshadaynta/habaynta badeecadaha iyo disinfection lagu sameeyo xarumaha, qalabka, kaabayaasha iyo gaadiidka.wax lagu daabbulo
  - f) Ururiyo / qaado, sagbado (collect sample) si loo sameeyo caddayn cudureed (Diagnosis) ilaalinta caafimaadka amase tayada la jaangooyey (Sanitary on quality control standard) amase natiijooyin sharci ahaaneed ee caafimaadka xoolaha, iyo in sagbadaha (Samples) la geeyo shaybaar lagu eego (Laboratory Examination)
  - g) La wareego (Confiscate) qabto xoolo iyo badeecad xoolaad amase amar ku bixiyo la wareegidda / qabashadooda.
  - h) Soo saaro / bixiyo ruqsado lagu hawl galo / dhaqdhaqaaqo amase shahaadooyin caafimaad (Health Certificates) qaabka iyo marka ay ku habboonyihiin (Nidaamka u degsan waafaqsan yihiin)

**QODOBKA 5.3.2****(ARTICLE 5.3.2)****NIDAAM RAACYADA CAAFIMAADKA XOOLAHA GOORTA AY AMB-ABAXAYAAN IYO INTA KA HORRAYSA.****(ANIMAL HEALTH MEASURES BEFORE AND AT DEPARTURE)**

- 1) Xoolaha keliya ee la oggolyahay in dalka laga dhoofiyo (Authorized for Export) waa kuwa si nidaamka waafaqsan loo aqoonsaday inay ka yimaadeen xarun / jiid (Establishment) ka maran / fayow cudurrada liiska "A" kuna oollayn aag aafaysan / cudur ka jirin (Not situated in an infected area)
- 2) Tijaabooyinka Shaybaarista, Diagnoostigga iyo Biyolojiga ee ku lug leh gnaacsiga caalamiga ah iyo tallaalada sida ay doonayaan (As required) dalalka loo dhoofiyo xoolaheenna iyo badeecadahoodaba qaata (Importing Countries) waa in loo sameeyaa / fuliyaa hab waafaqsan farriimaha iyo nidaamyada hay'adda caalamiga ah ee OIE, iyo kuwa hab raacyada cayayaan baabi'inta (Disinsectisation) iyo cudur baabi'inta (Disinfection)
- 3) Eegidda / u dhabba galka (Observation) xaaladda caafimaad ee xoolaha inta aanay dalka ka dhoofin waxa lagu samayn karaa marka ay ku sugan yihiin meelaha lagu ururiyo / horo, kuwo ay ku nastaan, lagu hayo (Transit and holding areas), xarumaha iyo ugu dambayn edeg takoorka. Marka ay dhakhtar xoolaad rasmi ah ay u sugnaato in xooluhu caafimaad qabaan (Clinically Healthy) ayna ka maran yihiin cudurrada liiska "A" iyo cudurro kale oo INFEKSHIYUUS ah. Xoolahaasi waxaa loo rarayaa meesha Markabka / Doonnida laga saarayo, iyadoo laga ilaalinayo inay xoola kale ku darsamaan, laga reebo marka labada xoolayowba caafimaadkoodu sugan yahay 100%
- 4) Ka hor intaanay xooluhu dalka ka dhoofin, xafiis dawladeedka daryeelka caafimaadka xooluhu (Veterinary Authority) ku hawl leh dekedda / gegida dayuuradaha amase degmada ay ku taal saidhig xuduudeedku ay xoolahaasi ka dhoofayaan haddii ay daw la noqoto waxay baaritaan ku samaynayaan (Clinical Examination) xoolahaasi, wakhtiga iyo meesha baaritaankaasi lagu sameeyeyna waa in loo daabbulaa qaab aan is hortaagayn ama aan dib u dhac / daahin u keenayn dhoofidda xoolahaas
- 5) Xafiis-dawleedka D.C.X. (Veterinary authority) ku xusan faqradda kore ee (4aad) waa inay ku dhaqaaqdaa talaabooyinka loo baahan yahay si:
  - a) Looga hortago dhoofinta xoolo aafaysan/jiran amase lagu tuhmay inay qabaan cudur ka mid ah kuwa ku qoran liiska A amase cudur kale oo infekshoows ah
  - b) Loo reebo in gaadiidka sida Vektorro suurto gal amase mar soo baxaya (Casual agents of infection).
- 6) Xafiis-Dawleedka D.C.X. (Veterinary Authority) waxay bixinaysa/soo saaraysaa shahaado caafimaad qaabka xoolaha dhoofinta (Veterinary export certificate) raacaysa qaab waafaqsan nidaamyada OIE. Laguna qorayo luqada ay ku heshiiyeen DGPL iyo dalka loo dhoofinaayo xoolaha (Importing Country), isla saacad gudeheed, ka dib marka xoolaha oo idil la shixnadeeyey, markabkuna diyaar u yahay inuu dhaqaaqo

**QODOBKA 5.3.3.****(ARTICLE 5:3.3)****QAAB-HAWLEEDKA IYO SIDA AY ISUGU XIGAAN IJRAADKA CAAFIMAADKA XOOLAHA SHIXNADEYNTA KA-HOR**  
**(MODALITIES AND SEQUENCES OF THE ANIMAL HEALTH MEASURES BEFORE SHIPMENT).**

- 1) Fulinta nidaamyada caafimaadka xoolo dhoofintu waa inay/xushmayaan xaqiiqada iyo duruufaha maxaliga ah isla markaasina waa in lagu dambeeyaa shuruudaha dawladdaha xoolaha loo diraayo (Importing countries) iyo nidaamyada/xeerarka caalamiga ah
- 2) Noocyada loo sameeyo baaritaan-caafimaadka (veterinary inspection) xoolaha iyo hab raaca shahaado bixinta fayo-qabka (Certification process) oo lagu jaangoynayo hadba duruufaha taagan laakinse la dhwayo shuurdaha layska doonayo ee ku qeexan faqradda kore ee lambar (1) waxay ka koobnaan-karaan sida soo socota:
  - a) Saraakiisha/dhakhaatiirta caafimaadka xoolaadka ee rasmiga ah (*Official Veterinarians*) ee fiilka jooga waxay ka fulinaayaan xarumaha xoola-horidda/ururinta, saldhigyada xooluhu ku nastaan (en-route or transit stoppint stages) amase ku negaadaan kolka dhulka la marinayo amase xeryaha lagu hayo intaan la dhoofin howlahakan:
    - i) Kormeerid shaybaar caafimaad (clinical monitoring) iyo eegid buuxda ee jir-xoolaadka, iyo calamaynta/sumadaynta xoolaha (marking of animals)
    - ii) Talaalidda, shaybaarista biyoloojiga (biological tests) iyo ijra'adadka kale ee caafimaadka oggada (dipping/spraying), hadba sida ay doonaayaan dalalka xoolaha loo dhoofiyo amase xaadada gaar ah oo ka jira meesha awgood (because of specific site conditions)
    - iii) Soo-saaridda ruqsada oggolaanaysa in xooluhu isaga gooshaan/daabbulaan rugta ay joogaan ma ahee tan loo gudbinaayo ilaa ay ka gaaraan xarunta edeg-takoorka ee ku ag taal dekedda shixnadeyta (issuance of movement permits).
    - iv) Kormeeridda iy nidaaminta/habaynta gaadiidka iyo marinka (route) xoolaha-daabulidda.
  - b) Dhakhaatir-xoolaadka rasmiga ah (*Official Veterinarian*) u xilsaaran maareynta saldhigyada edeg-tookoorka (quarantine stations) iyo xeryaha dekedda ku ag-yaal ee xoolaha lagu sii hayo shixnadeynta ka hor waa in ay sameeyaan:
    - i) Fuliyaan talaabooyinka / howlaha baaritaanka caafimaad xoolaadka ay doonayaan dawladdaha xoolaha loo dhoofiyo sida daaweeynta, eegista/baarista / , sumadaynta xoolaha iwm (testing, treatments, marketing)

- ii) Kormeer-baaritaanka dhammaadka ka harreya shixnadeynta (final ante-imbarkation inspection)
  - iii) Soo saaridda qoraal siidayneed (clearance) amase caddaynt kormeer-baaritaaneed ku socda xafiis-dowleedka caafimaadka xoolaadka (Veterinary authority) cadaynaysana in ay xoolahaasi soo mareen dhamaan ijaaraadkii laga doonayey ee lagu hubinayey faya qabkooda ayna diyaar u yihiin dib u dhoofin (Export)
- c) Xafiis-dawladeedka caafimaadka xoolaaha (the veterinary authority) waa inuu:
- i) Baaritaan ku sameeyo gaadiidka qaada xoolaha iyada laga eegayo habboonaanta: gurada/baaxadda adeegyadda hawada, waraabka iyo daaqsiiinta, diga xaarista iwm
  - ii) Soo saaridda xaashida /ruqsada dhoofinta xoolaha (fayow) ee wehlinaysa una raacaysa meesha ay u socdaan xoolaha ruqsadaasi waa mid dhammaad ah (final). Oo XDCX uu soo saaro saacad gudaheeda ka hor intaan xoolaha maraakiibta la saarin hab-raac howleedkaasi ka sakow, Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu wuxuu isticmaali karaa hab-raacyo kale isaga oo la socodsiinaya dowladaha xoolaha loo dhoofsho (hadba akhbaarta ay doonayaan in loo diro ee xoola dhoofinta ku saabsan)
  - iii) Xarumaha xoola-ururinta (collection), sii –marinta/nasashada, amase kuwa edeg-takooreed iyo kuwa lagu sii hayo shixnadeynta ka hor (agagaarka dekedda) waxaa loo isticmaali karaa kabayaal kontorol ahaan si loo sameeyo qaab-adeq-takooreed dhammaystiran (a comprehensive rolling quarantine system) ayada oo lala jaan qaadaayo/la oofinaayo shuruuda lagula heshiiyey dalal xoolo naga qaata (importing countries) lana dhowraayo qaab jaangoynta edeg-takoorka caalamiga ah.
- 3) Ka dib marka dhakhtaro-xoolaad rasmi ah ku sameeyo baaritaanka koowaad ee caafimaadka xoolaha ku sugan goobta-ururita (collection site), Xafiis Dawladeedka Daryeelka Caafimadka Xooluhu taasi waxay noqonaysaa maalinta kowaad ee edeg-tokoorista, haddii loo baahdo wadarta maalmaha edeg-tookoorka waxay noqonaysaa in uu dhexeya 15-21 cisho, sida ku cad xeerka OIE.

**QODOBKA 5.3.4.**  
(ARTICLE 5.3.4)

***DHOOFINTA BADEECADAHА ISIR-XOOLAAD LEH***  
(EXPORT OF PRODUCTS OF ANIMAL ORIGIN)

- 1) Hilbaha iyo badeecadaha kale ee isir-xoolaad leh ee dadku quuto oo kali ah ayaa loo ogolaan karaa dhoofinta haddii ay u qalmaan quudsiga dadka (if they are fit for human consumption). Ruqsada fayoaqabka, dhoofinta badeeco xoolaadka (export veterinary certificate) waafaqsan nidaamyada OIE iyo habraacyada lagula heshiiyay dalalka loo dhoofinayo, ayaa raacaysa/wehlinaysa badeecooyinkaasi

- 2) Badeecooyinka isir xoolaadka leh ee loogu talagatay daaqsiiin xoolaad, isticmaal beereed amase warshadeed ee la dhoofinayo waxaa wehlinaysa ruqsada dhoofinta badoocooyinka (Export Veterinary Certificate) oo waafaqsan nidaamyadda OIE.

**CUTUBKA 5.4**  
(CHAPTER 5.4)

**BAARITAAN-EEGISTAIYO SHAHAADA SIINTA KEENISTA XOOLLAHA IY**  
**BADEECO-XOOLAADKA**  
(INSPECTION AND CERTIFICATION OF IMPORTED ANIMALS AND ANIMAL PRODUCTS)

**QODOBKA 5.4.1**  
(ARTICLE 5.4.1)

**KEEF STA XOOLAHA**  
(IMPORTED ANIMALS)

- 1) Waxaa keliya oo dalka la keeni karaa xoolo ay la socoto shahaadada caafimaad qabka xoolaha rasmi ah uu soo saaray xafiis dowladeedka caafimaadka xoolaha (VETERINARY AUTHORITY) ee dalka ay ka yimaadeen, oo XDCX, DGPL uu aqoonsado in xaashidaasi sax tahay, dabadeed xoolaha waxaa loo daabulayaa meesha ay u socdeen iyada oo la-raacayo nidaamyada ku qeexan qaanuunakan
- 2) Akhbaar la-soo hor-mariyey ayaa la weydiisan karaa dalka xoolaha soo diraya inta aanay dalka soo gelin, xoolo lagu keenaayo qaabka ku qeexan qodobka 5.4.1.1 ee kor ku xusan iyada oo la caddeynayo nooca, tirada, gaadiidka sida iyo meesha ay ka soo galayaan dalka DGPL.
- 3) Waxaa loo diidi karaa inay Puntland soo galaan:
  - a) Xoola aanay la socodn shahaado caafimaadeedka dhoofinta xoolaaha (Export Veterinary Certificate) ee waafaqsan habka ay doonayso DGPL
  - b) Xoola baaritaanka caafimaad ee barta / meesha ay dalka ka soo galeen XDCX-hu ka helay astaan cudur amase lagu tuhmayo astaan cudur amase inay qabaan cudur dadka ama xooluhu u gudbin karaan
- 4) Marka ay dhacdo xaalada ku qeexan qod.5.4.1:
  - a) Maamulaha D.C. xoolaha ee ay kasoo dhoofeen (Exporting Country) durbadiiba la wargaliyaa si loo siiyo jaanis uu u aqbalu/ku raacid ugu sameeyo natiijada soo baxday amase uu ku saxo xaashida/shahaado caafimaadka xoola-dhoofinta (Export veterinary certificate)
  - b) Xoolaha dibedda laga keenay waa in durbadiiba la edegt-akoora (Quarantine) la si sameeyo eegis iyo baaritaan klin'ka iyo biyolojiikaalba ah iyadaoo looga danle eyahay ka gungaarista caddeyn-dhakhtareeda (Diagnosis) xoolahasi. Haddii natiijada caddeyn dhakhtareedku notoqo mid sheegaysa in Epideemik jiro amase haddii aan la sixi karin shahaadada xoolo-dhoofinta talaabooyinka soo-socda ayaa la qaadi karaa/lagu dhaqaaqi karaa:



- i) Xoolaha oo dib-loogu celiyo dalkii soo dhoofiyey
- ii) In xoolahaasi la gawraco lana baabiiyo/gubo (slaughter and destroy) kol haddii khatar caafimaad ay ka dhalan karto dib-ugu-celinta dalka soo doofiyey amase aan dib-ucelin loo samayn karin duruufo caqabada taagan aawadeed.

**QODOBKA 5.4.2**

(ARTICLE 5.4.2)

**KEENIDDA BADEECADAHA SIDA MINADA XOOLAHA IYO UKUNTA LA DILLAACIYO**

(IMPORT OF PRODUCTS SUCH AS SEMEN AND HATCHING EGGS)

- 1) Badeecadda sida mina-xoolaad, ukunta digaagu ka dhasho marka ay dillacdo/bislaato iyo abuurka shinnida (Brood-combs of bees) waxaa la ogolaan karaa inay dalka soo galan marka ay weheliso/la socoto ruqsadda caalamiga ah ee caafimaad-qabka xoolaha (International Veterinary Certificate)
- 2) Ogaysiis/Warglin hormarin ah (An advance notice) ayaa la weydiinsan karaa/lagu xiri-karaa (dalka soo dhoofin-raba) badeecad ku xusan qodobka 5.4.2.1. ee kor ku qoran, iyada oo war-bixintaasi lagu sheegayo nooca, tirada iyo qaab-galeynta badeeco iyo magaca dekedda lagu wado inay ka soo galaan dalka PL. Sidaas oo kale waxaa hab-raac howleedkan lagu dabbaqayaa dhaqan gal ku yahay keenista (IMPORTATION) badeeco kale e ku xusan qoddobka hoos ku qoran ee lambar: 5.4.3 iyo 5.4.4
- 3) Badeecada kor ku xusan waa loo diidi karaa inay dalka PL soo galaan haddii aanay la socon shahaadada dhakhtareedda xoola dhoofinta (Export Veterinary Certificate). Markii xaaladdaasi dhacdo waa in durbadiiba la ogaysiiyaa maamulka a daryeelka caafimaadka xoolaha (Veterinary Administration) ee dalka soo dhoofshay (Exporting Country); badeecada dalkaasi ayaa dib loogu celin karaa amase waa la edeg-iakoori karaa (quarantine) iyo/ amase waaba la baabin karaa (destroyed).

**QODOBK 5.4.3**

(ARTICLE 5.4.3.)

**KEENIDDA HILBAHA IYO DABEECADAHA KALE EE ISIR XDOOLAADKA AH OO LOOGU TALAGALAY QUUDINTA DADKA.**

(IMPORT OF MEAT AND PRODUCTS OF ANIMAL ORIGIN INTENDED HUMAN CONSUMPTION)

- 1) Hilbaha iyo badeecadaha kale oo isir xoolaad ee loogu tala galay quudinta Aadamaha / Insaanka oo ay weheliso shahaadada dhoofinta badeeca xoolaadku (Export Veterinary Certificate) waa la oggolaan karaa in ahy dalka Puntland soo galaan / la keeno haddii ay waafaqsan yihiin nidaamka Islaamiga ah "Xalaal".
- 2) Haddii natiijada baaritaan/ cegidda shixnadda soo degtay ay caddaynayso in hilbaha amase waxyaabaha kale ee la quutto ay halis u noqon karaan caafimaadka dadka amase xoolaha. amase haddii shahaadada dhoofinta (Export Veterinary Certificate) aanay sax ahayn amase aanay shaqo ku lahayn badeecadahaasi Maamululka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha (Veterinary Authority) Hilbaha / badeecadaha dib ayuu u celin karaa amase wuu turxaan

bixin karaa oo daawayn ku habboon ayuu ku sixi karaa wixii ka xun si loo sugo ammaankeeda/shifadeeda ( Ensure that they are safe), amase waaba la baabi'in karaa /la gubi karaa (haddii labada tallaabo oo hore aanay suurto galin.)

**QODOBKA 5.4.4**  
(ARTICLE 5.4.4.)

**KEENIDDA BADEECADO ISIR XOOLAD AH OO LOOGU TALA GALAY DAAQSIINTA/NAFAQAYNTA XOOLAHA, ISTICMAAL BEEREED AMASE WARSHADEED.**

(IMPORT OF PRODUCTS OF ANIMAL ORIGIN INTENDED FOR USE IN ANIMAL FEEDING, OR FOR AGRICULTURAL OR INDUSTRIAL USE)

- 1) Badeecdaha isir xoolaadka ah ee loogu tala galay in loo isticmaalo daaqsiin xoolaad, isticmaal beereed amase mid warshadeed (sida daawa soo saaridda) keeniddooda dalka Puntland waa la oggolyahay markii ay la socoto / wehelisi xaashida/shahaada dhoofka caafimaadka xoolaaha (Export Veterinary Certificate). Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ee DGPL wuxuu amar ku bixin karaa in xarumo (Establishments) hoos taga kormeerkiisa iyo ilaaladiisa (Supervision)
- 2) Haddii natiijada baarid eegiddu (Inspection) shixnaddu ((Consignment) ay caddayso in badeecadahaasi khatar gelin karaan caafimaadka dadka amase xoolaha, amase haddii shahaadada caafimaadka xoola dhoofintu aanay sax khusayn badeecadahaasi, Xaffiis Dawladeedka Caafimaadka Xooluhu (Veterinary Authority) dib ayeey u gu cilin karaan dalkii soo dhoofiyey (Exporting Country) amase waa uu cillad – tiri karaa oo waa shifayn karaa, amase waaba baabi'in karaa.

**QODOBKA 5.4.5**  
(ARTICLE 5.4.5)

**GAADIIDKA WADA XOOLAHA IYO BADEECA XOOLAADKA LA KEENAY**  
(VESSELS TRANSPORTING IMPORTED ANIMALS AND ANIMAL PRODUCTS)

- 1) Marka uu yimaado saldhig xuduudeed laga soo galo dalka Puntland daadiid wada xoola qaba cudur ka mid ah kuwa ku qoran liiska "A", amase lagu tuhmayo inay cudur kuwa liiska "A" ka mid ah qabaan, gaadiidkaasi waxaa loo aqoonsanayaa inuu yahay mid aafaysan (Contaminated) oo Xaffiis Dawladeedka Daryeelka Caafimaadka xooluhu (Veterinary Authority) wuxuy adeegsanaysaa ku dhaqaaqayaa tallaabooyinka soo socda:
  - a) Xoola ka dejinta gaadiidka aafaysan (Unloading the contaminated vehicle) iyo durba ku wareejinta gaadiid qaada xoolahaasi oo aan waxba sii daynayn / waxba aanay ka tifqayn, kuna jeeda:
    - i) Xarum (An Establishmet) uu Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu ansixiyey (approved) in lagu gawraco xoolahaasi laguna baabi'iyo, iyo haddii ay suurto gal

tahay Sterilization lagu sameeyo raqdooda (Sterilization of their carcasses), amase

- ii) Saldhig edeg takoor (Quarantine Station), amase haddii aaney taasi jirin / dhisnayn meel horay loo diyaariyey oo aad u edeg-takooran (Well Isolated) kuna taal barta xooluhu ka soo galeen dalka.
  - b) In gaadiidka laga dejiyo isla markaasna mid kale lagu qaado digada, cawska iyo waxyaabaha kale ee Kontaminatedka noqon kara (Other Potentially contaminated materials), lana geeyo xarun horay loo diyaariyey in lagu baabi'yo.
  - c) Disinfekshanka (Disinfection)
    - i) Dhammaan alaabta, dharka IWM ee ay siteenn shaqaalihii xoolaahaasi la socday (all baggage of the attendants)
    - ii) Dhammaan qaybaha gaadiidka ee loo adeegsaday qaadista, daaqsiiinta, waraabinta, dhaqaajinta (moving) iyo saaridda / ka dejinta xoolahaasi
  - d) Cayayaan la dagaalanka (Disinsectisation) markii uu jiro cayayaan kasta oo cudur sida ah (Insect vectors of disease)
  - e) Kol haddii la fuliyey tallaabooyinkaasi ku tilmaaman hab-raacyo hawl fulineed ee uu dejiyay xafiis Dawladeedka Daryeelka Caafimaadka Xooluhu (Veterinary Authority) gaadiidkaasi looma sii aqoonsanayo inay weli yihiin Kontaminated (Shall no longer be considered contaminated)
- 2) Maraakiibta iyo dayuuradaha looma diidi karo inay soo galaan (ku soo xirtaan / degaan) deked amase gegi dayuuradeed ee DGPL, asbaab caafimaad - xoolaad awgeed, marka ay jiraan xaalado ka fursan waa ' kedis ah (In case of Emergency). Ha yeeshee, Markabka amase dayuuraddaasi waxaa la marinayaa dhammaan ijraa'adka iyo nidaamyada khuseeya caafimaadka xoolaha oo Xafiiska Daryeelka Caafimaadka Xoolaha oo qaabilsan dekedda / gegida ay arato in loo baahanyahay fulintooda (Veterinary Authority may consider necessary).

**QAYBTA 6-AAD**  
(SECTION 6)

**GAADIID KU QAADIDDA XOOLAHA**  
(TRANSPORT OF ANIMALS)

**CUTUBKA 6.1**  
(CHAPTER 6.1)

**MABAADII GUUD IYO FARRIIMAHA**  
(GENERAL PRINCIPALS AND RECCOMENDATIONS)

***QODOBKA 6.1.1***  
(*ARTICLE 6.1.1*)

***WAXYAABAHA LA TIXGELINAYO MARKA LA SAMAYNAYO KORJOOGIDDA, KORMEERKA IYO ILAALINTA XOOLA-QAADISTA***  
(*FACTORS TO BE TAKEN INTO ACCOUNT IN THE SUPERVISION AND CONTROL OF THE ANIMALS*)

- 1) Waxyaabaha la xiriira cimilada sida xaraaradda / ruduubadda (Tuska) hawad xilliyeedka (climate), iyo wakhtiga dharaar / maalin iyo habeen (time of the day)
- 2) Dherarka masaafada la marinayo iyo waddada xoola safrinta
- 3) Qaabka safrinta xoolaha: (Lugaysiin, gaadiid saarid, dhuleed, badeed ama dayuuradeed (mode of transport: on hoof, road , sea or air)
- 4) Habboonaanta gaadiidka
- 5) Nooca xoolaha
- 6) Shiilanaanta gura saarka / xeraynta xoolaha (Stocking density)
- 7) Xaaladda Fisiyolojikalka: xaaladda jirka neefka, geesaha / seenyoon / giiran (Physiological Status)
- 8) Tashiilaadka iyo karaanka jir ee nafaqaynta/waraabinta inta ay xooluhu gaadiidka guradiisa saaranyihiin oo safarka ku jiraan (Facilities and ability to feed/water on board)
- 9) Meelaha xoolaha lagu nasiyo / ay ku jimicsadaan inta ay safarka ku jiraan (Staging post facilities on the journey).

**QODOBKA 6.1.2**  
(ARTICLE 6.1.2)

**DABBIRAADDA GUUD**  
(GENERAL ARRANGEMENTS)

- 1) Dhamman gaadiidka matoorka leh: doonyaha, maraakiibta, baabuurta (Lorries, trailers) iyo gaadiid kale ee xoolo ku sida (wada) dalka Puntland gudihisa ama dibeddiisa haystana xaashida ruqsada dhaqdhaqaaqa (Movement Permit) uu soo sameeyey / bixiyey Maamulka caafimaadka xooluhu (issued by the veterinary administration) iyo weliba ruqsadaha kale ee qawaaniinta dawladdu ku waajibisay laga doonayo (Required) gaadiidkaasi, ruqsadda dhaqdhaqaaqa waa inay ku-qoran tahay tirada ugu badan ee xoolaha la saari karo nooc kasta gaadiidkaasi iyada oo la dhawrayo hab raaca iyo midaamyada ku qeexan qaanuunakan (Veterinary Code) iyo hab waafaqsan jaangooyada la caadaystay ee daryeelka xoolaha.
- 2) Gaadiidka ama sanaadiiqda (Containers) xoolaha qaadistooda loo isticmaalo waa in loo farsameeyaa loona habeeyaa (Designed, constructed and fitted) qaab munaasib ah una adkaysan misaan/culayska xoolaha lagu sugo samata-bixinta iyo daryeelka xoolaha muddada ay safarka ku jiraan, iyo qaab u saamaxaya xoola - ilaaliyeyaasha (Livestock attendents) inay si fudud ula socon karaan una daryeeli karaan xoolahaasi
- 3) Xoolaha waa in loo habeeyo boos (adequate space) ku filan iyo meel ay fariistaan / jiiifsadaan (room to lie down) haddii nidaamya gaar ahi aanay hab raac sidaasi ka duwan qeexayn / tilmaamayn in lagu dhaqmo xoolaha waa in la kala soocaa halka marka ay habboon tahay hadba nooca isleh la israaciyo, oo lo'da geesaha leh waa in gaar looga sooca xoolaha giiran / aan geesaha lahayn
- 4) Gaadiidka xoolaha sida waa in ay la socdaan tira ku filan oo xola ilaaliyeyaal ahi, waa inuu leeyahay aaladaha/adeegyada marawaxadaha hawada (Ventilation) iftiinta (lighting) marinmo/ meelaha la maro (gangways), meelaha digada iyo wasakhda kale lagu asturo (Waste cutlets) biyo la cabbo (drinking water, cunto (food) iyo qalab lagu seexo/gogol (Bedding materials) oo qaab waafaqsan hab raacyada iyo nidaamyada waajibka ha ee qaanuunakani qeexayo (Provisions of this Code) iyo xeerka caalamiga (International Standards).

**QODOBKA 6.1.3**  
(ARTICLE 6.1.3)

**DEBBIRAADDA U GAAR AH BADEECADO-XOOLAADKA**  
(PARTICULAR ARRANGEMENTS FOR ANIMAL PRODUCTS)

- 1) Sanaadiiqda/saxaaradaha ay ku jiraan badeeca - xoolaadku waa in loo yeelaa / sameeyaa daaqad ama dalool (window or latch) laga eegi karo waxa gudahooda ku jira, sanaadiiqdaas waxa keliya oo furi kara Xafiis-dawladeedka caafimaadka xoolaja (Veterinary Authority) iyo markaasi ka dib waxaa la qaadayaa tallaabooyin lagaga hortegayo, lagana tabaabushaysanayo khatar Kontaminashan ee sanaadiiqda ka iman karta.

**CUTUBKA 6.2**  
(CHAPTER 6.2.)

**RUQSADAHA IYO SHAHAADOOYINKA XAMMUULKA**  
(TRANSPORT PERMITS AND CERTIFICATES)

**QODOBKA 6.2.1**  
(ARTICLE 6.2.1)

**RUQSADAHA**  
(PERMITS)

Daad-guraynta / dal-dalidda:

- 1) Marba haddii xoola qaadidda/dal-dalidda loo adeegsanayo gaadiid dhulka mara (Baabuurta Waa-wayn), milkiilaha gaadiidkaasi ayaa laga doonayaa inuu arji la yimaado uu ku codsanayo xaashida / ruqsadda dhaqdhaqaaqa (Movement Permit) waana inuu tilmaan gaar ah ka bixiyaa tanka, awoodda xamuul - qaadidda (Carrying capacity). Tirada shaqaalaha iyo sifooyin kale ee gaadiidkiisa khuseeya oo Maamulka caafimaadka Xooluhu doonayo inuu tixgeliyo
- 2) Marka la adeegsanayo gaadiidka cirka ama kan badda codsiga xaashida ruqsadda waa inay weheliyaan naqshad (Drawings ) iyo xog (data ) ku saabsan dhismaha / qaabka loo sameeyey, aaladaha (Equipment) , shaqaalaha, Maamulka , (Crew) iyo tanka (Tonnage) gaadiidkaasi (Markab ama Dayuurad)
- 3) Maamulka Caafimaadka Xooluhu haddii uu ku qanco in gaadiidku munaasib u yahay qaadidda xoolaha dhan-kasta oo laga eegaba, wuxuu bixin karaa ruqsad hal sano ku siman, uu cusboonaysiin karaa sanad walba goorta ay noqotaba. Haddii gaadiidkaasi wax laga beddelo / wax iska beddelaan sifooyinkii ruqsaddii hore lagu siiyey, waxaa lama huraan noqonaysa in arji cusub la keeno laguna caddeeyo waxyaabaha laga beddelay gaadiidkaasi Ka hor inta uusan ruqsad cusub la soo saarin.

**QODOBKA 6.2.2.**  
(ARTICLE 6.2.2)

**XAASHIYO/ RUQSADO KALE**  
(OTHER CERTIFICATES)

- 1) Markii laga codsado Xasiif-dawladeedka caafimaadka Xoolaha (Veterinary Authority) waa inuu siiyaa xoola daabbulaha (Transporter) markab saaraha (Shipper), xoola dhoofiyaha (Exporter) iyo xoola qabte / loo dhiibaha (Consignee) ama wakiilladooda (Their representatives) xaashiyaha soo socda:
  - a) Xaashi (Certificate) tilmaamaysa/caddaynaysa tallaabo hawleedyada wax looga qabtay dhammaan gaadiidka iyi saamaanta/qaybaha gaadiidka xoolaha / hab raaca yada la adeegsaday iyo asbaabta kaliftay tallaabooyinkaas lagu dhaqaaqo sida: Disinfakshin, cayayaan baabi'in iyo qaar kale.
  - b) Warqad caddaynaysa taariikhda xooluhu yimaadeen iyo tan ay dhoofeenba (Date of arrival and departure of the animals)

**CUTUBKA 6.3**  
(CHAPTER 6.3)

**HAWLAHA XOOLA QAADIDDA / DAABBULIDDA KA HOR INTA AY SAFARKA  
KU JIRAAN IYO QAADIDDA / SAARIDDA IYO KA DEJINTA  
(PRETRANSPORT, DURING TRANSPORT, LOADING AND UNLOADING)**

**QODOBKA 6.3.1**  
(ARTICLE 6.3.1)

**XOOLA QAADIDDA KA HOR  
(PRE-TRANSPORT)**

- 1) Ka hor inta aan xoolaha meel la isugu ururin waa in loo diyaariyaa daaqsiiin ku filan, biyo, hooy (holding) qalabka loo isticmaalo daryeelka caafimaadka xoolaha (Veterinary Equipment) iyo daawa xoolaad la isticmaalo muddada safrinta ka horreysa oo xeryaha lagu sii hayo iyo muddada ay safarka (dhulka) ku jiraan.
- 2) Dhammaan xarumaha loo isticmaalo edeg takoorka xoolaha inta aan dibedda loo dhoofin (Pre export quarantine premises) ama kuwa lagu hayo (xereeyo xoolaha safarrada ka hor) waxay hoos tegayaan kormeerka XDCX (Veterinary Authority) qaabilsan, waxayna yeelanayaan xoolo ilaaliyeyaal si door ah u tababaran (Attendants).

**QODOBKA 6.3.2**  
(ARTICLE 6.3.2)

**MUDDADA XERYO KU HAYNTA XOOLAHA INTAAN LA SAFRIN  
(HOLDING PERIOD BEFORE TRANSPORT)**

- 1) Meeshii hawlahaas laga doonayo (Where required) muddada shaybaariddu dhererkeedu wuxuu ku xiran yahay waxyaabaha soo socda:
  - a) Caafimaad xoolaadka (Veterinary inspection tests) daawaynta iyo tallaalidda xoolaha ha ku sugnaadeen xeryaha nasashada / nagaadinta ama goobaha edeg takoorka (Either in transit holding areas or in quarantine) hawlahaas oo ay waajib tahay in loo fuliyo hab waafaqsan sidii lagula heshiiyey Maamulka Caafimaadka Xoolaha (Agreed with Veterinary Administration) ee dalka xoolaha loo dhoofinayo (Importing Country).
  - b) Baahida ka dhalata is beddellada shuruudihii hore ee nidaamka daaqsiiinta iyo waraabinta xoolaha, matalan: daajinta caadiga ah oo loo beddelo daaqsiiinta cawska xir xiran (from grazing to pellet feeding)
  - c) Muddada loo baahanyahay in lagu garto / qabto laguna reebo (for detecting and removing) xoolaha aan ku habboonayn safrinta lagu tala jiro, sababo la xiriira hab dhaqameed (Behavioral) Fisiyoolojikaal (Physiological) ama caafimaad aawadeed

- d) Muddada safrinta xoolaha / wakhtiga ay xooluhu jidka ku sii jiri doonaan (Time period of the proposed journey)
  - e) Muddada ay xooluhu u baahan yihiin inay ku nastaan xeryaha gaadiidka lagu geeyey.
- 2) Xarunta lagu meeleeyo (Holding facility) ama / iyo midda edeg takoorka dhoofinta (Pre export quarantine premises) waa inay ku yaallaan meesha ugu dhow ee suurtoogalka ah, barta ay ka ambabaxayaan xooluhu (Dekedda Akteeda)
  - 3) Dhakhtar xoolaadka rasmiga ah (*Official Veterinarian*) ama qof kale oo aqoon sare leh ee hoos taga kormeer hawleedka Xafiis-dawladeedka caafimaadka xoolaha (*Veterinary Authority*) waa inuu si is daba joog ah u eegaa xoolaha (*Shall examine regularly*) uuna sugaa inay ahaadaan jar fayow oo u diyaarsan in la dhoofiyo (*Fit for Export*)
  - 4) Waa in la hayaa xog warran qoraal ah oo ku saabsan nooca (species), da'da (age), jinsiga (sex) iyo tirada xoolaha la qaadayo (animals pre-transport), iyo magaca cidda iska leh (milkiile/yaasha), meesha ay ka ambabaxayaan iyo halka ay u socdaan xoolahaasi (name of the owner, place of departure and destination).

**QODOBKA 6.3.3.**  
(*ARTICLE 6.3.3.*)

**GAADIID SAARIDDA / KA DEJINTA**  
(*LOADING AND UNLOADING*)

- 1) Xoolaha lama fuulin karo/gaadiid saari karo illaa/jeer Xafiis-dawladeedka Caafimaadka Xooluhu (*Veterinary Authority*) hawsha u xilsaarani uu gacanta ku dhigo/ku hubsado oo dhammaystiro ruqsadaha caafimaadka iyo dokumentiga kale ee la iska rabo (untill all required documents have been obtained and completed).
- 2) Gaadiid saarka (loading) waxaa loo fuliyaa qaab caddibaadda ugu yar gaarsiin kara (loading in a manner which causes minimum distress) waana in la sameeyaa goorta suurtoogalka ah ee ugu dhow wakhtiga ambabixidda markabka.
- 3) Xafiis-dawladeedka Caafimaadka xoolaha, ama qof kale oo u idman / fulin kara hawshaas (sida kormeeraha u xilsaaran raridda xoolaha waa inuu kormeeraa hawsha gaadiid saarka (loading) xoolaha. Shiillanaanta (density of loading) Markaa xoolaha waa in lala socdaa oo kuwa u muuqda inaan la dhoofin karin laga dejiyo markabka oo la reebo.
- 4) Xoolaha waa in la isu raaciyaa koox/xayn is leh xagga xajmiga ziisaaka (uniformity of size) oo isku hal qol ah (compartment) ama hal gaadiid (vehicle) la saaraa / la isla fuuliyaa.
- 5) Gaadiid ka dejinta (Unloading Operation) sidaasi oo kale ayeey mashaakil ugu leedahay xoolaha marka waa in hawlaheeda laga digtoonaadaa.



**QODOBKA 6.3.4**  
(ARTICLE 6.3.4.)

**MUDDADA / INTA SAFARKA LAGU JIRO**  
(DURING TRANSPORT)

- 1) Xoolaha waa in gaadiidka loogu qaadaa qaabka ugu habboon iyadoo la raacayo waddada ugu toosan (most direct route), gaadiidkana lagu wadayo xawliga (speed) ugu habboon inta safarka lagu jiro, waa in la diyaariyaa qalab lagu sameeyo/loo isticmaalo gawraca/qalliinka gurmada deg-degga ah (emergency slaughter) haddii loo baahdo.
- 2) Inta safarka lagu jiro haddii loo baahdo in la iska fogeeyo/tuuro bakhti (xoolo), digo / dhiriq ama khashin; waa in hawshaasi loo fuliyaa/sameeyaa qaab looga hor tago fiditaanka cudurrada iyo hab raac waafaqsan dhammaan xeer nidaamyada caafimaadka iyo cimilada ee muhiimka ah.
- 3) Xoolaha waa inay la socdaan shaqaale qummaati loo tababaray oo tiro iyo tayo hawl karnimo ahaanba si fiican u dabooli kara hawlaha daryeelka xoolaha. Waxaa shaqaalahaas ka mid noqon kara shufeer gaadiid (vehicle driver) la doonayo inuu ka diiwaan gashanyahay (registered) kana haysto ruqsad dhaqdhaqaaq (circulation). Maamulka Caafimaadka xoolaha (Veterinary Administration) waa inuu
  - a) Kafaalo qaadaa ilaalinta xaaladda caafimaad ee rarka loo dhiibay (health status of the consignment).
  - b) Sugaa sahay siinta laga rabo: Cunto, biyo, gogol iwm. Uuna dalbadaa gar gaar caafimaad xoolaad mar allaale markii loo baahdo lama huraan noqoto.
  - c) Sugaa in gaadiidka guradiisa iyo aaladihiisa/qalabkiisa hawadu (marawaxadaha) ay noqdaan kuwo mug waafi ah leh oo dabooli kara baahida loo qabo isticmaalkooda.
  - d) Inuu qoraa xog warran ku saabsan dhacdooyinka safar walba (Mashaakilka cudurrada / noocyada dhimashada iyo daawaynta xoolaaha). Isla markaasna waa inuu akhbaartaasi u gudbiyaa XDCX (Veterinary Authority) ku shaqa leh.
- 4) Meeshii ay ka fuli karto, xoolaha waa in la nasiyaa marka ay muddo cayimaba safar ku jiraan, taasina iyada oo ku xiran nooca uu yahay gaadiidku, waxaa loo baahan karaa in xoolaha lagu dejiyo si ay ugu nastaan xarumo loogu tala galay oo waddada ku yaal.

**CUTUBKA 6.4**  
(CHAPTER 6.4)

**FARRIIMO KU SAABSAN HAYKALLADA CAYIMAN**  
(RECOMMENDATIONS ON SPECIFIC FORMS OF TRANSPORT)

**QODOBKA 6.4.1**  
(ARTICLE 6.4.1)

**SAFAR Xoolaadka Dhulka**  
(ROAD TRANSPORT)

- 1) Masaaxadda loo baahan yahay in xoolaha la sido loo diyaariyo waxaa go'aaminteeda iska leh Maamulka Caafimaadka Xoolaha, waana in la waafajiyo hab dhaqanka caalamiga ah (Comply with International Standards), iyo neef kasta (oo baabuurta saaran) waa in loo qoondeeyaa meel/boos (adequate space) ku filan oo uu si caadi ah u taagnaano karo.
- 2) Gaadiidka dabaqyada kala sarreeya leh waa in laga kaashadaa oo xoolaha saaran dabaqa hoose inay gaarto saxarada kuwa dabaqa sare saaran ay dhigaan (protection from excrement).
- 3) Markii gaadiidka xoolaha sidaa meel taagan yahay (when parked) waa suurto gal in loo baahdo in xoolaha laga ilaaliyo cadceed (Qorrax) toos u gaarta.
- 4) Dareewallada gaadiidka wadaa waa inay maanka ku hayaan xil/waajibadka ka saaran daryeelka xoolaha ay sidaan, iyo inay ka jawaabi doonaan (accountable) xilkaas, sida ku qeexan qaanuunakan (This Code)

**QODOBKA 6.4.3.**  
(ARTICLE 6.4.3.)

**SAFAR Xoolaadka Badda**  
(SEA TRANSPORT)

- 1) Xoolaha (markabka dul saaran) waa in loogu tala galaa sahay siin (daaqsiin / biyo) kayd ah si looga kaashado dhacdooyin lama filaan ah sida: Cillad farsamo, ama dib dhac (Delay) IWM oo markabka soo food saara. Xoolaha waa in la daaq / waraab la siiyaa goor ka goor wakhtiyo munaasib ahi u dhexeeyaan. Inkasta oo sidatan wax laga beddeli karo iyada oo la raacayo jaangooyada xeerarka caalamiga ah, saami / sed maalmeedka (daaqsiin / waraab) loo qoondaynayo ugu yaraan waa sida shaxdatan ku qoran:

SAAD MAALMEEDKA LA RABO /WAAJIBAY UGU YARAAN WAA: (Minimum daily requirements)			
Nooca xoolaha	Biyo liter/Neeffiiba	Daaqsiin/Caws neeffiiba	kg/
Geel	50	12	
Lo'	40	8	
Ido/Riyo	5	2	

- 2) Sida ku qeexan qaanuumakan, xoolaha waa in habsami loogu meeleeeyaa (gurada markabka) boos aamin ah (secured) xoolahu ka xannaanaysan yihiin dhibaatooyinka hawada (Qorra, dhaxan, roob, neefsi xurno / ciriiri IWM)
- 3) Hoyaad gaar ah (Separate accommodation) waa in markabka guradiisa looga meeleeeyaa xoolaha u baahan in la cdeg takooro (Animals requiring isolation).

**QODOBKA 6.4.4**  
(ARTICLE 6.4.4.)

**XOOLA QAADIDDA CIRKA**  
(AIR TRANSPORT)

- 1) Qaabka xoolaha loogu qaad o dayuuradaha waa inuu waafaqsan yahay xeerarka / nidaamyada u degsan hab raaca dayuurad ku qaadidda xoolaha nool ee ururka caalimiga gaadiidka cirka (International Air Transport Association, IATA) ayna ku talisay in lagu dhaqmo Hay'adda Caalamiga ah ee Caafimaadka Xoolaha (OIE)
- 2) Hawlaha laga qabto: Caafimaadka, Shaybaaridda (health interventions, serological tests), tallaalidda (vaccination) iyo bixinta shahaadada caafimaadka xoolaha waa in la fuliyaa wakhti waafi ah / in doora ka hor taariikhda ambabaxa (enough in advance of departure date).
- 3) Muddada duullimaadka cirka lagu sii sidayo haddii ay ka badantahay lix (6) Saacadood, dayurradda waa inay diyaar ku yihiin biyo / daaqsiiin xoolaha la siiyo inta duullimaadkaas lagu jiro.
- 4) Haddii xoola ku bakhtiyaan dayuuradda gudaheeda, waa in durbadiiba la war geliyaa hay'ad dawladeedka qaabilsan ee ku sugan gegida (Airport) loo socdo (Dalka xoolaha loo wado).

**QAYBTA 7-AAD**  
(SECTION 7)

**GUDDIGA SARE EE DARYEELKA XOOLAHA (GSDX)**  
(THE VETERINARY BOARD)

**CUTUBKA 7.1**  
(CHAPTER 7.1)

**ASAASIDDA GUDDIGA SARE EE DARYEELKA XOOLAHA**  
(ESTABLISHMENT OF VETERINARY BOARD)

**QODOBKA 7.1.1.**  
(ARTICLE 7.1.1.)

**XUBNAHA GUDDIGA SARE EE DARYEELKA XOOLAHA**  
(MEMBERS OF VETERINARY BOARD)

- 1) Madaxwaynaha DGPL ayaa magacaabaya Guddiga Sare ee Daryeelka Caafimaadka Xoolaha (Shall appoint the Veterinary Board) marka uu eego / dhegaysto tala soo jeedinta (Recommendations) wasiirka Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Cimilada.
- 2) Guddiga Sare ee Daryeelka Caafimadka Xoolaha (The Veterinary Board) waxa uu ka koobnaanayaa toddoba (7) xubnood oo kala ah sidatan:
  - a) Guddoomiye lagu doorto shirwaynaha Ururka PULPA (Shuruudaha ka eeg Qod.7.2.1)
  - b) Sarkaal madaxeedka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha / agaasimaha adeegyada / hawlaha daryeelka caafimaadka xoolaha oo noqonaya diiwaan geliyaha daryeelka caafimaadka xoolaha.
  - c) Laba farsamo yaqaan xoolaad (Zoo Technicians) oo ka diiwaan gashan Maamulka Daryeelka Caafimaadka Xoolaha
  - d) Hal khakhtar xoolaad diiwaan gashan iyo Hal Zoo technician diiwaan gashan, labaduba waa inay khibrad ku leeyihiin ama ka shaqeeyaan hawlaha la xiriira ganacsiga, baarista iyo adeegsiga daawada xoolaha. Waxaana lagu dooranayaa shirwaynaha Ururka PULPA
  - e) Hal xubin sharaf oo wasiirka lagu maamuusay inuu soo xulo / magacaabo. Xubinatan waxaa loo aqoonsan yahay inuu yahay xubin xafiiseed (Ex Officio Member).

**QODOBKA 7.1.2.**  
(ARTICLE 7.2.1.)

**JAGA HAYEYAAL / XIL HAYEYAAL GUDDIGA SARE EE DCX**  
(THE OFFICE BEARERS OF VETERINARY BOARD)

- 1) Jaga / mansab hayeyaasha GSDCX ee DGPL waxa uu ka kooban yahay:
  - a) Guddoomiyaha (The Chairman)
  - b) Diiwaan geliyaha (DCX Sarkaal madaxeedka)(Veterinary Registrar - Chief Veterinary Officer).
  - c) Xoghaye uu magacaabo GSDCX kana soo xulo xubnihiisa. Waxa uu ka hoos shaqaynayaa Diiwaan geliyaha. Dhammaan la xiriira maamulka, una qaada mas'uuliyadda fariimaha Guddiga Sare.

**QODOBKA 7.1.3**  
(ARTICLE 7.1.3)

**MUDDADA XILHAYNTA GUDDIGA SARE EE D.C. XOOLAHA**  
(THE TENURE OFFICE OF THE MEMBERS OF VETERINARY BOARD)

- 1) Xubnaha Guddiga Sare ee DCX muddada ay xilka hayn karaan waa saddex sano, laakiinse magacaabid kale ayaa u bannaan.
- 2) Xubin kasta oo guddiga sare ka mid ah marka laga reebo halka xubin xafiiseed (Ex Officio Member) wakhti kasta (goorta uu go'aansado) waa iska casili karaa xilkiisa, isaga oo go'aankiisa qoraal ahaan ugu gudbinaya Wasiirka marka laga bilaabo taariikhda istiqaaladaas uu wasiirku helo/gaarto xubintaasi waa ay luminaysaa xubinnimadiisii Guddiga Sare ee DCX.
- 3) Madaxwaynaha ayaa u magacaabaya isagoo eegaya tala soo jeedinta (Recommmendations) Wasiirka Dhakhtar xoolaad diiwaan gashan ama zoo technician si ku meel gaar ah xilka uu horay u hayey xubin ka tirsan guddiga sare ee DCX marka ay dhacdo xaalad: Dhimasho, Is casilaad, ka maqnaasho dalka DGPL ama xilgudasho la'aan.
- 4) Xil hayeyaasha guddigu (Guddoomiyaha, Diiwaan geliyaha iyo Xoghaynta) waa inay fuliyaan xil waajibaadka la xiriira jagooyinkooda iyo sida ku qeexnaan karta qaanuunakan.

**QODOBKA 7.1.4**  
(ARTICLE 7.1.4)

**KULAMADA GUDDIA SARE EE D.C.XOOLAHA**  
(THE MEETINGS OF VETERINARY BOARD)

- 1) Guddigu wuxuu shir kal fadhi ah isugu imanayaa/yeelanayaa marka ay lama huraan noqoto ama laga xaajoonayo arrimo hawshiisa khuseeya laakiinse ugu yaraan saddex (3) biloodba mar in guddigu shir kal fadhi ah uyeesho.
- 2) Kulamada (meetings) Guddiga waxaa guddoominaya Gudoomiyaha marka uu muddo gaaban maqnaadase xubnaha jooga oo tira ansaxeed gaara (Shan Xubnood) ayaa shir guddoomiyaha kal fadhigaas iska dhex dooranaya.
- 3) Tira ansaxeedka (Quorum) guddigu waa shan xubnood.
- 4) Go'aannada guddiga waxaa lagu qorayaa codaynta aqlabiyad hal dheeri ah (ee xubnaha).
- 5) Nuxur (Minutes) habaysan waa in laga qoraa lana xafidaa doodaha shir/fadhi kasta ee guddigu isugu yimaado, waxaana rajcinaya (Confirmed) guddoomiyaha sida ugu dhakhsaha badan ee suurta gal ah wakhtiga la qaban doono shirka xiga ee guddigu fariisan doono.

**QODOBKA 7.1.5**  
(ARTICLE 7.1.5)

**AWOODAHA IYO XIL HAWLEEDYADA GUDDIGA SARE EE D.C.X**  
(POWERS AND FUNCTIONS OF VETERINARY BOARD)

Guddigu waxa uu lahaanayaa awoodaha iyo xil hawleedyada soo socda:

- 1) Diiwaan gelinta iyo ka tirtiridda dhakhaatiirta xoolaha, Farmashiistayaasha, kaaliyeyaasha caafimaadka xoolaha iyo Farmashiyeyaasha Daawada Xoolaha, iyada oo la raacayo hab waafaqsan nidaamyada ku qeexan qaanuunakan.
- 2) Caddaynta tilmaamidda (Specify) hab jaangooyada (Standards) la iska doonayo in wax looga qabto xarumaha (Premises), hab raac hawleedyada iyo tayada adeegyada caafimaad xoolaad ee loo fuliyo macaamiisha.
- 3) Dejinta nidaamyada lagu dhisayo Ururrada Xannaanada/Daryeelka Caafimaad xoolaadka Puntland (Veterinary/Livestock Associations) oggolaadaan (Approve) uuna aqoonsado (Certify) xeer hoosaadyadooda kormeero wax qabadkooda iyo inuu guddigu sameeyo/dejiyo nidaamyada ay la noqoto in lagu habeeyo/wanaajiyo xil gudashadooda iyo doorkooda (Their functions and roles).
- 4) Diyaariyo dibna u derso (Prepare and Review) xeer asluubeedka daryeelka caafimaadka xoolaha (The veterinary code of ethics).

- 5) Sugaa dhawrista xeer asluubeedkaasi ee dhammaan xubnaha aqoonyahannada/shaqooyinka daryeelka caafimaadka xoolaha iyo inuu qaado tallaabooyinka lagu ciqaabo xilkasnimo la'aanta hawl fulineed/ku xad gudub shaqo fulineed sida ku qeexan Qod.8.1.7 ee qaanuunakan.
- 6) Soo saaro/dejiyo xeer hoosaadyo iyo xeer nidaamiyeyaal lagu dhaqo adeegyada/hawlaha gaarka ah iyo daryeelka caafimaadka xoolaha (Private veterinary services).
- 7) Inuu ka caawiyo (Assist) maamulka DCX dejinta xeer nidaamiyeyaal, wareegtooyin wasaaradeed iyo nidaamyo kale ee khuseeya hawlaha daryeelka caafimaadka xoolaha.
- 8) Kaalmeeyo Wasaaradda XXBC Diyaarinta/dejinta siyaasadda iyo stratijiyadaha lagu horumarinayo xannaanada xoolaha.
- 9) Talo ka bixiyo una qiimeeyo tayada barnaamijka/dugsiyada daryeelka caafimaadka xoolaha ee heer kasta.
- 10) Xagga kala sarraynta guddigu waxa uu si toos ah warbixin u siinayaa Agaasimaha Guud ee wasaaradda XXBC.

**CUTUBKA 7.2**  
(CHAPTER 7.2)

**DOORASHADA GUDDOOMIYAHA GUDDIGA SARE EE DCX**  
(ELECTION FOR APPOINTMENT TO THE CHAIRMAN OF VETERINARY BOARD)

**QODOBKA 7.2.1**  
(ARTICLE 7.2.1)

**SHURUUDAHA LAGU SOO DOORANAYO GUDDOOMIYAHA GUDDIGA SARE EE DCX**  
(QUALIFICATIONS FOR APPOINTMENT TO BE CHAIRMAN OF THE VETERINARY BOARD)

Shuruudaha laga doonayo qofka noqonaya guddoomiyaha guddiga sare ee DCX waa sidan:

- 1) Inuu yahay Soomaali, haysta shahaada jaamacadeed: ee dhakhtar-xoolaad (Degree in Veterinary Medicine) ama wax-soo saarka xoolaha (or animal production) ama Zoo-technishaan ee jaamacad la aqoonsan yahay, iyo inuu ka diiwan-gashan yahay guddiga sare ee daryeelka caafimaadka xoolaha dalka.
- 2) Waa inuusan ka yarayn 40 sano kana Waynaan 70 sano jir.
- 3) Waa in uu khibrad/waayo aragnimo 15 sano ku lee yahay howlaha xannaanada/caafimaadka xoolaha.
- 4) Leeyahay xirfad hogaamineed, maarayn cilmiyeed, karti iyo khibrid maaraynta howlaha iyo/ ama mashaariicda xannaanada caafimaadka xoolaha.

- 5) Bulshada uu la joogo waa inuu sumcad fiican iy ixtiraam, iyo inuu leeyahay khibrad la arki karo ee la shaqaynta hay'adaha iyo wakaaladaha caalamiga ah.
- 6) Waa inuu leeyahay aqoon wanaagsan ee luqadda Englishka qoral iyo hadalba af kale oo qalaad wuxuu ahaanayaa door-rooni (Advantage) siyaado ah.

**QODOBKA 7.2.2**  
(ARTICLE 7.2.2)

**DOORASHADA IYO MAGACAABIDDA GUDOOMIYAHA GUDDIGA SARE EE DCX**  
(ELECTION AND APPOINTMENT OF THE CHAIRMAN OF THE VETERINARY BOARD)

- 1) Gudoomiyaha ururka PULPA ayaa shirweyne guud kongres (General Assembly) ee xubnaha ururkaasi isugu yeerayo si loo doorto Guddoomiyaha gudiga. Gudoomiyaha PULPA ayaa ku shaacinaya warbaahinta Electronikada, qaab qoraal, wargaysyada, Raadiyeyaasha loo diro xubnaha PULPA loona sheego taariikhda la qabandoono shirweynahaasi! Ugu yaraan 15 cisho ka hor taariikhdaas.
- 2) Si shirweynahaas u qabsamo waa in ay joogaan/yimaadaan ugu yaraan 2/3 ee tirada guud (2/3 of the total number) ee dhakhaatiir xoolaadka iyo zoo-technishaaniska diiwaan gashan (registred veterinary surgeons and zoo-technicians).
- 3) Guddi doorasho (an election committee) ayaa u xilsaarnanaya ilaalinta iyo kormeerka (supervision) doorashada wuxuuna ka koobnaanayaa:
  - a) Xubin-maamuus uu soo magacaabo wasiirku noqonayana Guddoomiyaha Gudiga Doorashada.
  - b) Sarkaal madaxeedka caafimaadka xoolaha (the Chief Veterinary Officer).
  - c) Zoo-Teknishaan diiwaan gashan (registred) oo ka tirsan sektaarka gaarka ah (private sector) ayna soo doorteen xubnaha shirweynaha guud ee PULPA.
- 4) Dhakhtar-xoolaad ama wax-soo saar xoolaad kasta oo diiwaan gashan shirweynaha joogaa isaga oo isticmaalaya foomka magacaabid-soo jeedinta, gooshka koowaad (lifaaqa 1) (First Schedule nomination form in Annex 2, Form 2/1) wuxuu soo jeedin u magacaabi karaa qof kasta oo doonaya inuu u tartamo jagada Gudoomiyaha boodhka ee buuxin-kara shuruudaha ku qeexan qodobka 7.2.1. Foomka soo-jeedin magacaabida inay ku qoran yihiin (xuruuf far waaweyn ama "BLOCK letters): magaca (saddexan) ee magaca aabaha, magaca (saddexan) musharraxa (candidate) iyo saxiixa labadoodaba. Foomkasi magacaabida musharraxa waa in shaqsiyan loogu geeyaa Guddiga doorasha (Gudoomiyaha) ka hor inta ay doorasha bilaabmin.



- 5) Dabadeesd, gudiga Doorashadu waxa uu siinayaa Dhakhtar xoolaad Zoo- Teknisshaan walba xaanshida cadaynta (voting paper) ee ku taal fomka loogu talagalay gooshka labaad, lifaaqa 2, foom 2/2 (Second Schedule Annex 2 Form 2/2) kaasi oo ay ku qoran yihiin dhamaan magacyada musharaxiinta, lagu soo magacaabay hab waa faqsan qoraalka. Baragrafkaasi 4aad (ee la soo dhaafay ama kor ku qoran).
- 6) Dhakhtar-xoolaad (Veterinarian) ama Zoo-Teknisshaan kasta ee la siiyay xaanshida codbixinta haddii uu doonayo inuu inay cadeeyo/cadeeyso: iskutalaab X ayuu ku hor qorayaa magaca musharraxa uu rabo inuu ku cadeeyo. magaciisa oo xuruuf waaweyn ah (BLOCK LETTERS) ah ayuu ku qoroyaa xaanshida cadaynta waana saxiixayaa meesha loogu tala-galay. Xaanshi cadayn kasta haddii aanay sidaasi ugu qornayn waxyaaba-haasi oo wax la rabay in lagu qoro ay ka dhiman-yihiin ama wax aan loo baahnayn lagu qoro waxay noqonaysaa "baadi" ama cadayn xumaatay/khasaaro (Spoilt voting paper) oo aan tixgalin doorasho yeelanayn.
- 7) Xaashida cadaynta (Voting paper) waa in codbixiyuhu shakhsiyan gacantiisa ugu soo celiyaa oo u dhiiba guddomiyaha guddiga.
- 8) Isla maalinta doorashada guddiga waa inuu tiriyaa/xisaabiyaa codadka uu helay/la siiyey musharrax walba, dabadeedna uu ku dhawaaqo (declare) musharraxa codeynta ugu tira badan helay inuu yahay Gudoomiyaha boodhka/gudiga sare ee si nidaam ah loo doortay.
- 9) Haddii ay dhacdo in codadku is le-ekaadaan (equality of votes), waa cadeynta lagu celiyaa. Haddii ay taasi marka xigja dhacdo, guddiga doorashada ayaa go'aanminaya hab-qoritur ah / (a lot drawn) bakhtiyaa-nasiib ay ku xalliyaan arinta oo ay ku dhawaaqaan musharaxa ku guulaystay tartanka.
- 10) Guddiga wuxuu warbixin (report) ka geynayaa musharaxa si nidaamka waafaqsan loo doortay in loo magacaabo: gudomiyaha guddiga sare, warbixintaasi waxaa loo gudbinayaa Wasiirka, isaguna Madaweynaha ayuu talo u soo jeedinayaa si uu rasmiahaan ugu magacaawo guddomiyahaasi.

## (SECTION 8)

**DARYEELKA CAAFIMAADKA XOOLAHAA EE GAARKAAH  
(VETERINARY PRIVATIZATION)****CUTUBKA 8.1  
(CHAPTER 8.1)****DIIWAAN GELINTA IYO RUQSAD SIINTA DHAKHAATIIR XOOLAADKA,  
FARMASHIISTEYAASHA IYO KAALIYEYAASHA CAAFIMAADKA  
XOOLAHA.  
(REGISTRATION AND LICENSING OF VETERINARIANS, PHARMACISTS AND  
ANIMAL HEALTH ASSISTANTS)****QODOBKA 8.1.1  
(ARTICLE 8.1.1)****ARJIGA DIIWAAN GELINTA  
(APPLICATION FOR REGISTRATION)**

Qof kasta oo qaanuunakani (This Code) uu diiwaan geliyo wuxuu arji u qoran karaa diiwaan hayaha (Registrar) caafimaad xoolaadka in la diiwaan geliyo.

**QODOBKA 8.1.2  
(ARTICLE 8.1.2)****DADKA LOO JIDEEYAY INAY CODSADAAN DIIWAAN GELINTA  
(PERSONS WHO QUALIFY TO APPLY FOR REGISTRATION)**

Dadka loo jideeyey inay codsadaan diiwaan gelinta dhakhtar xoolaad, Farmashiiste ama Kaaliye caafimaad xoolaad ahaan waa inay ahaadaan:

- 1) Muwaadiniin Soomaali ah oo ka hawl gala dalka Puntland (Practicing in Puntland) haysta shahaadada (Degree) Dhakhtarnimada caafimaadka xoolaha (Veterinary Medicine) waa haddii ay yihiin dhakhaatiir xoolaad (Veterinary Surgeons) ama cilmiga farmashiye/daawooyinka (Pharmacy/Pharmaceuticas) haddii ay yihiin Farmashiisteyaal (In case of Pharmacists) ee jaamacad la aqoonsan yahay ansixiyeyna guddiga sare ee DCX, (The Veterinary Board).
- 2) Muwaadiniin Soomaali ah, ka shaqeeya Puntland oo haysta shahaadada "Diploma" ah caafimaadka xoolaha, cilmiga shaybaaridda (Laboratory Techniques) ama hilbo baraaridda (Meat Inspection) ee dugsi caafimaad xoolaad (From a veterinary School) ama dugsi cilmiga xoolaha khuseeya (Animal Science) uu aqoonsanyahay uuna asixiyey/aqbalay guddiga sare ee DCX (The Veterinary Board).
- 3) Ajaanib (Non Somalis) haysta shahaadooyinka kor ku xusan oo guddiga sare ee DCX aqoonsanyahay ama/iyo uu aqbalay.

**QODOBKA 8.3.2**  
(ARTICLE 8.3.2)

**CODSIGA DIIWAAN GELINTA**  
(APPLICATION FOR REGISTRATION)

- 1) Qof kasta oo Qod.8.1.2 (ee kore) u jideeyey in la diiwaan geliyo waxa uu soo qoranayaa isagoo hab raacaya qaabka foomka 3/1 ee codsiga (Application form 3/1) oo lagu maakuubay (set out) lifaaqa III-aad (Annex III)
- 2) Foomkaasi la iska rabo 3/1 (Prescribed Form 3/1) waa in ay weheliyaan waxyaabaha soo socda:
  - a) Khidmadda la iska rabo (USD 10) toban doollar ama inta hadba xeer nidaamiye wasaaradeed wasiirku gooyo (As determined by the Minister) ka dib tala soo jeedinta (Recommmendations) guddiga sare (of the Veterinary Board)
  - b) Shahaado jaamacadeed ama diploma (asalka nuqulladiisa - Original copies) oo markhaati cad u noqonaya tayada waxbarasho ee codsada (Proof of the applicant's qualification)
  - c) Haddii guddigu (The Veterinary Board) wax la iska doonayo ka dhigo waa inay arjiga la socotaa qoraal sharciyeed (Legal Statement or an affidavit) (Tasdiq Maxkamadeed) oo ay ku qoran yihiin magaca iyo cinwaanka arjiilahu (Applicant) caddaynaysa in shahaada jaamacadeedda ama diplomuhu yahay xaashi sogan (Authentic) shaqaynaysana (Valid)
  - d) Warqado ka yimi laba qof oo wax ka sheegi kara habdhaqanka, dabciga, hawl karnimada iyo waayo aragnimada arjiilaha (Letters from two referees).
- 3) Markii arjiiluhu ka soo baxo shuruudaha kor ku xusan oo guddigu ku qanco shahaadooyinkiisa (Qualifications), ayaa arjiilaha la diiwaan gelinayaa (Registered in Registry) lana siinayaa xaashida diiwaan gelinta (Certificate of the Registration) ee ku maakuuban foomka 3/2, ee lifaaqa III-aad.

**QODOBKA 8.1.4**  
(ARTICLE 8.1.4)

**CODSIGA SHATISHINTA (LAYSANKA)**  
(APPLICATION FOR LICENCING)

Qofka xaq u leh / mutaysta inuu laysan codsado waa inuu yahay:

- 1) Dhakhtar xoolaad ka diiwaan gashan sida ku qeexan Qod.8.1.3 ee qaanuunakan oo la yimaada xaashida diiwaan gashanaanta (Registration Certificate) iyo xaashi caddaynaysa inuu bixiyey khidmaddii ku waajibtay ayaa xaq u leh / mutaystay in la siiyo laysan / ruqsad uu ku hawl geli karo dhakhtar xoolaad ahaan (Licence to practice veterinary service) (Foomka 3/3 ee lifaaqa III-aad).
- 2) Mar allaale markii guddiga sare (The Board) ay la noqoto / ula muuqato inay dan guud (Public interest) tahay / ku jirto, wuxuu awood u leeyahay inuu talo ku bixiyo (Recommmend)

in laysankaas la siiyo qof kasta oo aan Soomaali ahayn ee haysta shahaado jaamacadeed (Veterinary Degree) oo u jidayn lahayd inuu dhakhtar xoolaad ah noqon karo shaqaysiyo dalka laga siiyey / uu ka qaatay shahaadada jaamacadeed.

**QODOBKA 8.1.5**  
(ARTICLE 8.1.5)

**SHURUUDAHA SHATI/LAYSAN BIXINTA**  
(ACCEPTANCE APPLICATION FOR A LICENCE)

- 1) Aqbalidda codsiga laysanka waxaa ku xiran shuruudaha hoos ku taxan:
  - a) Bixinta khidmadda la iska rabo oo ah (konton dollar) (Payment of prescribed fee USD\$0).
  - b) Keenidda/la imaashaha xaashida diiwaan gashanaanta (production of a registration certificate).
  - c) Shahaada-jaaamacadeed caafimaadka xoolaha iyo xaashi guddiga sare ka socota oo lagu fasaxayo bixinta shatiga / laysanka.
- 2) Shatiga / laysanka qaabkiisu wuxuu noqonayaa (Shall be) foomka 3/3, lifaaqa III-aad, waxaana bixintiisa lagu xirayaa shuruudaha ay ka mid yihiin (Subject to such conditions): Xaddidaadda jiidada ee shatiilluhu shatiga kaga shaqaysan karo (Area in which licence holder may practice) iyo muddada (for such a period) ay la noqoto guddiga (as the Board thinks fit).
- 3) Guddiga sare (The Board) wuxuu amar ku bixin karaa laalidda (Suspension of registration), taasina waxay dhalaysaa diidmada (refused) shatiga ama bixintiisa/ka noqoshadiisa, haddii guddigu mugdi/nidaamdarro (if it finds irregularities) ka helo hab raaca codsiga diiwaan gelinta ama shati bixinta (Application process for registration or licencing)

**QODOBKA 8.1.6**  
(ARTICLE 8.1.6)

**DAW U LAHAANSHAHA SHAQAYSIGA DHAKH TARNIMO**  
(ENTITLEMENT TO PRACTICE)

- 1) Dhakhtar xoolaad kasta oo shati / laysan haysta (Every licenced veterinary Surgeon) wuxuu daw u leeyahay ku shaqaysiga takhasuskiisa dhakhtarnimo (Be entitled to practice) iyo inuu waydiisto (to demand) u dacwodo (Sue for) iyo hanashada / helitaanka isagoo adeegsanaya maxkamadda qaabilsan (Competent Court) ama maamulka DCX (Veterinary Admin) ama/iyo guddiga sare (And /or the Vet. Board) hadba sida ku qeexan qaanuunakan, khidmad macquul ah oo la xiriirta gargaar xirfadeed (Professional aid), la talin (Advice) iyo eegid dhakhtareed (Visits) iyo qiimeyso deeqooyinka (Medicines) oo ay ka mid yihiin (And shall be entitled to demand for) (Professional aid, Advice, Visits and Medicines) oo ay ka mid yihiin (And shall be entitled to demand for) (Professional aid, Advice, Visits and Medicines)

**QODOBKA 8.1.7****(ARTICLE 8.1.7)****KA TIR TIRID AMA KALA NOQOSHADA SHATIGA DHAKHTAR Xoolaadka.  
(STRIKING OUT FROM THE REGISTER OR CANCELATION OF THE LICENCE OF  
THE VETERINARY SURGEON)**

- 1) Haddii dhakhtar xoolaad diiwaan gashan ama shatiile ahi ay ku caddaato inuu jebiyey qodobada qaanuunakan ama ka dib baaritaan ay sameeyeen maamulka DCX iyo / ama guddiga sare, ay sugnaato inuu ku kacay asluub darro, fadeexad iyo fal ceeb wayn ku ah takhasuska iyo mihnadda dhakhtarimo no Guddiga sare iyo Maamulka DCX waxay ku amrayaan diiwaan hayaha inuu magaca dhakhtar xoolaadkaasi ka tiro liiska diiwaan gashanayaasha (Haddii uu diiwaan gashanaa) iyo inay isla iyagu laysanka / shatiga kala noqdaan / ka qaadaan dambiile u yaal kaas laalidda (Suspension) diiwaan gelintu waxay si toos ah u burinaysaa laysanka oo ka dhigaysaa waxba kama jiraan (canceled, null or void).
- 2) Xubnaha baaritaanka arrinta warbixinnada ku saabsan arrin, iyo racfaarunada laga qaato go'aannada guddiga iyo maamulka DCX waxaa loo fulinayaa sida ku qeexan xeer nidaamyada qaanuunakan iyada oo lala tashanayo Maxkamadda Sare.
- 3) Inta baaritaanku socdo, guddiga sare (The Veterinary Board) isagoo la tashaday maamulka DCX, wuxuu go'aamin karaa inta muddadaasi ku siman diiwaan gelinta qofkaasi ama laysanka horay loo siiyey inaysan saamayn yeelanayn (Shall have effect)
- 4) Haddii amar lagu bixiyo in qofka magaciisa laga tiro diiwaanka ama in la laalo (Suspending) waxyaabaha uga dhasha (Effects) qofka diiwaan gelintisa sida qaanuunakan qorayo ama tirid / dib ugala noqosho amase laalidda shatigii horay loo siiyey qofkaasi sida ku qeexan qaanuunakan (Canceling or suspending a licence granted under this code) guddiga sare (The Veterinary Board) isagoo la tashaday maamulka DCX (Veterinary Admin), isagoo iskiis ugu dhaqaaqay ama ka dib tixglinta codsi uu soo qortay qofka arrintu khusayso (labada jeerba guddigu wuxuu samaynayaa baaritaanka la gudboonaada) waxa uu amar ku bixin karaa: in qofka dib loogu qoro magaciisa diiwaanka ama la qaado/la af-jaro (terminate) laalidda diiwaan gelinta (suspension of registration), ama hadba arrintu sida ay tahay, in laysan/shati cusub la siiyo ama laga qaado/la soo af-jaro laaliddii shatiga (Terminate suspension of the licence) ee qofkaasi. Xaalad kasta oo dhacda oo ka mid ah kuwa kor ku xusan, guddigu waxa uu go'aamin karaa: in qofkaasi lacag la'aan loogu sameeyo diiwaan gelinta/laysanka ama uu bixiyo khidmad aan ka bacinayn mudda loo gooyey diiwaan gelinta/shatiga (Registration/Licence fees).

(Translation) Inta baaritaanku socdo, guddiga sare (The Veterinary Board) isagoo la tashaday maamulka DCX, wuxuu go'aamin karaa inta muddadaasi ku siman diiwaan gelinta qofkaasi ama laysanka horay loo siiyey inaysan saamayn yeelanayn (Shall have effect)

**QODOBKA 8.1.8***(ARTICLE 8.1.8)***DIIWAAN GELINTA IYO XAQ U LA HAANSHAHA KU SHAQAYSIGA ZOO  
TEKNISHAN IYO KAALIYAHA DARYEELKA XOOLAHA.***(REGISTRATION AND ENTITLEMENTS TO PRACTICE AS ZOO-TECHNICIANS AND  
ANIMAL HUSBANDRY ASSISTANTS)*

- 1) Diiwaan gelinta (Registration) Zoo-teknishans iyo Kaaliyeyaasha daryeelka xoolaha waxaa loo samaynayaa hab ku salaysan tayadooda waxbarasho / khibradeed ee guddiga sare aqoonsado kuna qanco (On the bases of their qualifications recognized and approved by the board) iyo iyada oo la raacayo nidaamyada ku qeexan qodobbada : 8.1.1, 8.1.2 iyo 8.1.3 ee qaanuunakan.
- 2) Waxay fulinayaan xil waajibaadyada la xiriiira takhasus cilmiyeedkooda iyo waaya aragnimadooda iyo hawlaha kale ee uu aqoonsan yahay una oggolyahay guddiga sare iyo hab raaca nidaamyada ku qoran qaanuunakan.
- 3) Kaaliyeyaasha Caafimaadka Xoolaha (Animal health assistants) waxaa loo diiwaan gelinayaa inay galaan oo mihiinadooda ku shaqaystaan iyaga oo hoos tegaya laysanka iyo mas' uuliyadua dhakhtar xoolaad diiwaan gashan shatina haysta (Registered and licenced veterinarian surgeon).

**UTUBKA 8.2***(CHAPTER 8.2)***XIL WAAJIBAADKA DHAKHAATIIR XOOLAADKA RASMIGA AH IYO KUWA  
GAARKAAH***(VETERINARY PRIVATIZATION AND OFFICIAL VETERINARIAN DUTIES)***QODOBKA 8.2.1***(ARTICLE 8.2.1)***DHAKHTAR XOOLAADKA IYO XILALKA GUUD / RASMIGA AH***(OFFICIAL VETERINARIAN AND OFFICIAL TASKS)*

- 1) Sida qaanuunakani qeexayo dhakhaatiir xoolaad gaar ah oo diiwaan gashan (Registered) laysanna / shatina haysta waxaa qandaraas loogu xilsaari karaa shaqo fulin rasmi ah (adeeg guud) oo ay ku jiri karto hawlaha shahaado bixineed (Certification Schemes), iyaga oo matelaya / qareen ka ah maamulka DCX, markaas waxay noqonayaan dhakhaatiir xoolaad rasmi ah (Official Veterinarians).
- 2) Waa in si qayaxan loo kala saaraa (Clear Distinction) doorka gaarka ah iyo kan guud (Private and Public roles) ee xilalka qandaraas ahaan loogu dhiibay dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah (Private Veterinarians) arrintaasi waa in lagu sifeeyaa (Defined) heshiis qoraal ah ee qaabka ay isla meel dhigaan labada dhinac, maamulka DCX iyo Dhakhaatiir Xoolaadka Gaarka ah (Between the Veterinary Administration and Private Veterinarians) isla faqraddan waxaa weheliya (In this context):
  - a) Dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah waxay hoos imanayaan ilaalinta xukun (control) ee maamulka DCX, inta ay wadaan xilka loo wakiisho fulintiisa loomana oggola /waa ka

mamnuuc inay toos ugu shaqeyaan milkiilaha (Owner) badeecadda iyo adeegyada hawlaha ay qabanayaan. Maamulka DCX wuxuu la soconayaa / isha ku haynayaa wax qabalkooda hawl fulineed (The activities of Private Veterinarians) si uu ula socdo (To verify) madax-bannaanida (Independence), hufnaanta (Integrity) iyo eex la'aantooda.

- b) Maamulka DCX waxa qura ee uu ku abaal marin (Payment) karaa dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah hawlaha rasmiga ah ee ay fuliyeen.
- c) Dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah (Private Veterinarians) waa in aanay ku lahayn dan maaliyadeed ama dano kale oo ka baxsan/aan khusayn mihiinnaddooda (To the Profession) hawlaha qandaraas ahaan loogu xil saaray
- d) Musuq-maasuqa/falalka xun oo ay sameeyaan dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah waxay ku mutaysan karaan tallaabo maxkamadeed oo la xiriirta qaanuunka madaniga (Civil Case) ama kan ciqaabaadka (Criminal Case) ama mid maamul (Sida ganaax, digniin - canaan - qoraal ah IWM) oo ka timaadda maamulka DCX (Veterinary Administration) ka hawsha u xilsaaray dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah, awoodna u leh inuu kala noqdo xilalkaasi qandaraas ama heshiis hawl fulineed uu horay u siiyey, ama / iyo inay mutaystaan tallaabooyin mihiinnadeed (Professional Sanctions by the Board) oo uu qaado guddiga sare sida uu banneeyey / jideeyey qaanuunakani.
- e) Hufnaan mihiinnadeed (Professional integrity) dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah ee u xil saaran fulinta shaqo rasmi ah (Shaqo dan guud) waxay ka mudan yihiin ixtiraamka iyo xaq dhawrida maamulka DCX sida uu farayo qaanuunakani.

### CUTUBKA 8.3 (CHAPTER 8.3)

#### FULINTAADEEGYADA CAAFIMAAD Xoolaadka ee Dad Aan Ahayn DHAKHAATIIR Xoolaad (VETERINARY SERVICES DELIVERED BY NON-VETERINARIANS)

##### QODOBKA 8.3.1 (ARTICLE 8.3.1)

#### AWOODDA/XUKUNKA HAWLAHA CAAFIMAAD Xoolaad ee Meel Kasta (AUTHORITY OVER VETERINARY SERVICES IN ANY GIVEN AREA)

- 1) Maamulka DCX waxa uu sugayaa adeegyada / hawlaha ay qabtaan dadka aan dhakhaatiir xoolaadka ahayn inay ugu sidikan yihiin hab bayaansan oo qaab dhismeed nidaamsan loo jideeyey tala bixinta farsamo (Technical advise), taageeridda (Support) iyo kormeeridda hanuuninta ay ka helaan dhakhaatiir xoolaad diiwaan gashan, wuxuu kaloo sugayaa xoola dhaqatada u baahata wax ka qabashada caafimaadka xoolaha inay helaan, iyo in laga waantoobo isticmaalka khalidan ee daawada xoolaha, iyo ku xad gudubka adeegyada xoola daawaynta, iyo in wixii halis gelin kara caafimaadka guud (Public health) iyo ganaacsiga caalamiga ah aad loo yareeyo (Minimized).

- 2) Xafiis-dawladeedka Caafimaadka Xoolaha uu maamuulka DCX deegaan / dalka ka mid ah u xil saaray, wuxuu mas' uul ka yahay dhammaan arrimo caafimaadka xoolaha ee jiiddaasi oo dhakhaatiir xoolaadka gaarka ah iyo dad aan dhakhaatiir xoolaad ahayni ee meeshaas / jiiddaas ka shaqeeya waxay xiriir iskaashi (Shall cooperate with) la yeelanayaan xafiis dawladeedkaasi, ee dhaminaan waxyaabaha la xiriira adeegyada caafimaad xoolaadka meeshaasi.

**QODOBKA 8.3.2**  
(ARTICLE 8.3.2)

**GARGAARAYAASHA CAAFIMAADKA XOOLAHA**  
(COMMUNITY BASED ANIMAL HEALTH WORKERS)

- 1) Degaanada aanay ka jirin xarun (Clinic) adeegyada caafimaadka xoolaha lagu daryeelo iyo dhakhaatiir xoolaad iyo kaaliye caafimaadka xoolaha ee diiwaan gashan (Registered) oo hawshaas fuliya, gargaarayaasha caafimaadka xoolaha (CBAHWS) ayaa loo oggolaanayaa inay fuliyaan hawlaha asaasiga ah ee daawaynta xoolaha, haddii uu kormeerayo (If they are supervised) dhakhtar xoolaad laysan leh (Licensed Veterinary Surgeon) ama kaaliye caafimaad xoolaad diiwaan gashan oo la shaqeeya dhakhtar xoolaad laysan/shati leh.
- 2) Xulidda (The Selection), tababarka, xaashida ruqso bixinta (Certification), diiwaan gelinta, kormeerka (Supervision) iyo la socodka (Monitoring) CBAHWS-ka iyo adeegyada caafimaad xoolaadka (hawlaha asaasiga daawaynta xoolaha / tallaalika IWM) ee loo oggolyahay fulintooda waxaa lagu caddaynayaa (Shall be specified) xeer nidaamiyeyaal qaanunakani jideeyey (Regulations made under this code) ka dib la tashiga guddiga sare (Following consultations with the Veterinary Board).

**CUTUBKA 8.4**  
(CHAPTER 8.4)

**IIBSIGA IYO GADASHADA / QAYBINTA DAAWADA XOOLAHA IYO MIDDA**  
**TALLAALIDDA**  
(ACQUISITION AND DISTRIBUTION OF VETERINARY DRUGS AND VACCINES)

**QODOBKA 8.4.1**  
(ARTICLE 8.4.1)

**ISTICMAALKA DAAWOYINKA XOOLAHA**  
(USE OF VETERINARY DRUGS)

- 1) Dawada xoolaha waxaa loo isticmaalayaa si loo gaaro ujeedooyinka hoos ku taxan:
- Daawaynta iyo ka hor tagga cudurrada xoolaha
  - Xakamaynta subaaca (Control of predators).
  - Garashada/kashifidda/Diagnoosiska cudurrada xoolaha (Diagnoses of animal disease)



- 2) Dawooyinka dalka la keenaa (Imported drugs) waa kuwo in loo baahanyahay ay caddeeyaan maamul-dawladeedka DCX iyo kan caafimaadka guud (By veterinary and public health authorities) ee keeniddooda (Importation) uu oggolaaday maamulka DCX (Veterinary Administration) ka dib tala soo jeedinta / farriimaha (Recommendations) guddiga sare (Veterinary Board).
- 3) Maamulka DCX isaga oo la kaashanaya guddiga sare waxa uu diyaarinayaa liiska magacyada caamka ah (Generic names) ee daawooyin xooladka lama huraanka ah (Essential Veterinary Drugs) iyo badeecadaha la xiriira.
- 4) Sida ku qeexan Cutubka 2.3. Qodobka 2.3.3. ee qaanuunkan maamulka DCX waxa uu dejinayaa hab raac rasmi ah (Official Procedures), soona saarayaa awaamiir (Instruction) ku saabsan keenidda (Importation) iyo isticmaalka daawa-ta;aa;la iyo biyolojikaalka kale.

**QODOBKA 8.4.2**  
(ARTICLE 8.4.2)

***SHURUUDDA DIIWAAN GELINTA QOFKA KEENA (IMPORER), QAYBIYA / GANACSIGA JUMLADDA AMA KAN TAFARAARIKHDA DAAWOYIN XOOLAADKA (QUALIFICATIONS FOR REGISTRATION AS VETERINARY DRUGS IMPORTER, DISTRIBUTOR OR SELLER)***

- 1) Qof kasta ee raba inuu daawooyin xoolaad dalka keeno (Importer) , Qaybiyo / Ganacsiga jumlada (Distributor) ama iibiyo / Ganacsi tafaariikhda (Seller) waa inuu ahaadaa: Dhakhtar xoolaad diiwaan gashan. Farmashiiste xoolaad (Veterinary Pharmacist) ama kaaliye caafimaadka xoolaha uu kormeero (Supervised by) Dhakhtar xoolaad laysan / shatiile ah.
- 2) Qof kale oo weliba sida ganacsadeyaasha daawo xoolaadka waa inuu leeyahay dhakhtar xoolaad diiwaan gashan oo u shaqeeya mas'uulna ka noqonaya isticmaalka, dalbashada (Ordering), kaydinta (Storage) iyo qaybinta / ganacsiga jumlada (Distribution) ee daawooyinka la keenay (Of imported drugs).
- 3) Qofkii doonaya inuu noqdo daawo keene iyo / ama qaybiye idman (Approved drug importer and / or distributor) waa inuu:
  - a) Haystaa laysan/shatiga keenidda (Import License) ee wasaaradda ganacsiga,
  - b) Haystaa tashiilaad iyo jawi ku habboon kaydinta (Possess adequate facilities and conditions for storage of drugs).
  - c) U diiwaan gashan yahay (Be registered) qaabka la iska rabo ee ku qeexan qaamuunakan iyo hab raacyada xeer dhaqameed ee u degsan guddiga sare (Veterinary Board)

**QODOBKA 8.4.3**  
(ARTICLE 8.4.3)

**TASHIILAADKA IYO SHURUUDAHA KAYDINTA / BAKHAAR KU HAYNTA DAWOYIN Xoolaadka**  
(FACILITIES AND CONDITIONS FOR STORAGE OF VETERINARY DRUGS)

- 1) Baayac-mushtarka khuseeya iibka daawada waxaa loo samaynayaa buug u diiwaan gashan hab raac nidaameedka ku qeexan qaanuunakan
- 2) Bakhaarka / rugta daawada la dhigayo waa inay tahay meel nadiif ah oo aan lagu arag / ka maran jirr iyo cayayaanba
- 3) Bakhaarka / rugta waa inay si wacan u neecawsan tahay (Be well ventilated) ayna gaar u tahay isticmaalka (Use), dhigaalka (Storage) iyo / ama iibka (Sale) daawooyinka oo keliya.
- 4) Tashiilaadka qaboojiyeyaasha iyo kuwa wax barafeeya (Cold chain facilities and deep freezers) ee daawooyinka lagu dhigaaliyo laguna xafido waa in ay yaallaan bakhaarka daawada hadba intooda loo baahan yahay.
- 5) Xogta / tira koobka iyo daawada bakhaarka taal (Records and Inventories) ee dhammaan daawada la soo gatay (Purchases) iyo tan la iibshay (Sale) waa inay xisaabsan yihiin. si loola socdo / helo markii baaritaan la samaynayo (For inspection) iyo markii loo baahdaba.
- 6) Daawooyinka dhacay / khaa'isay (Expired drugs) waa in deg deg looga takhalusaa iyadoo xafiis-dawladeedka caafimaad-xoolaadka arrintu khusayso hortiisa lagu gubayo ama lagu aasayo booraan aad dheer oo dhulka hoostiisa laga qoday.

**QODOBKA 8.4.4**  
(ARTICLE 8.4.4)

**DIIWAANKA RASMIGA AH IYO SHURUUDAHA GELINTA GANACSATADA DAAWOYINKA XOLAHA**  
(OFFICIAL REGISTER AND REGISTRATION CONDITIONS OF DEALERS OF VETERINARY DRUGS)

- 1) Diiwaan geliyaha caafimaad xoolaadka (The Veterinary Registrar) waxa uu haynayaa diiwaan rasmi ah (An Official register) oo ay ku diiwaan gashan yihiin dhammaan kuwa loo jideeyey inay daawo xoolaad dalka keenaan (Import), qaybiyaan / ganacsi jumlo ah sameeyaan (Distribution), ama ganacsi / tafaaiikh ah (sale) iyo xarumahoodaba (bakhaarrada, Farmashiyeyaasha) hab raac nidaameedka diiwaan gelinta (Registration procedures) la raacayaa waa qaabka la iska rabo ee ku qeexan qaanuunakan (In the manner prescribed in this code).
- 2) Diiwaanka waa in la cusboonaysiiyaa sanad walba. Haddii qof daawo keene ahi (Importer) oo diiwaan gashan, uu san wax daawo xoolaad ah dibeddá ka keenin inta /muddada uu diiwaan gashanaa oo idil waxaa laga tir tirayaa (liiska) diiwaanka (Shall be cancelled from the register).

- 3) Diiwaan hayaha (The Registrar) waxa uu ka tir tirayaa (Shall delete) diiwaanka: Magaca diiwaan gashane geeriyooday ama magac kasta oo maamulka DCX isagoo la tashanaya guddiga sare uu sabab macquul ah darteed amar ku bixiyo tir tiriddaasi.
- 4) Diiwaan hayuhu (The Registrar) waa diidi karaa (May refuse) (sabab macquul ah / deeqda awgeed) inuu diiwaan geliyo ama wuxuu ka tir tiri karaa diiwaanka xarun kasta (bakhaar, Farmashiye IWM) ee maamulka DCX ugu muuqato (isaga oo la tashanaya guddiga sare) in rugtaasi / Farmashiyehaasi ay noqotay meel aan ku habboonayn / u qalmin in lagu fuliyo / loo isticmaalo ganacsiga daawada (Unsuitable for carrying there in the business of drug sales).
- 5) Qofna ma iibin karo daawooyinka iyo badeecadaha la xiriira haddii magaca iyo xaashida lagu diiwaan geliyey milkiilaha gacansigaasi aanu si wacan uga muuqan rugta ganacsigaasi ka socdo.

**QODOBKA 8.4.5**  
(ARTICLE 8.4.5)

**SHURUUDAHA KEENIDDA IYO QAYBINTA / GANACSI JUMLADEEDKA  
DAAWADA**  
(IMPORTATION AND DISTRIBUTION CONDITIONS)

- 1) Maamulka DCX ka dib marka uu tix geliyo tala bixinta guddiga sare ayuu ku boorrinayaa Wasaaradda Ganacsigu inay siiso (To issue an Import License) laysanka keenidda oo u oggolaanaya dadka qaab qaamuunakan waafaqsan loo diiwaan geliyey (To persons registered under this code) inuu dalka keeno daawo kasta iyo badeeco la xiriirtaba.
- 2) Qofka doonaya inuu daawo kasta keeno waa inuu isticmaalaa foomka codsiga la iska rabo, uuna ku tilmaamaa / sheegaa codsigiisa daawo keenidda waxyaabaha hoos ku taxan:
  - a) Shirkadda / Warshadda soo saartay / samaysay iyo meesha ay ka timi daawadu / badeecadda la keenayo. (Manufactured and source of the drug / product imported)
  - b) In badeecadda mid si rasmi ah loogu oggolaaday (Officially authorized) in lagu iibsho sunqyada dalka ay ka soo askuntay (Country of Origin) macnuhu waxa ay leedahay ruqsadda iib galka xorta ah ee sharciyaysan, (Has a legalized free sale certificate "FSC").
- 3) Iibka / ganacsi tafaariikheed ama jumlo (The sale by retail or whole sale) ee daawo kasta waa inay ku lamman tahay / la socotaa (Should be accompanied) xaashi astaameed (Label) ku dhegsan oo tilmaamaya / caddaynaya:
  - a) Magaca guud iyo kan ganacsi, iyo foormulaha ay ka samaysan tahay (Trade name, Generic name, and formula of compound).

- b) Digniinaha / waxyaabaha laga taxaddarayo marka isticmaalayo ama la maamulayo daawada (Precautions to be taken in administering the drug).
  - c) Inta markiiba laga qaadanayo iyo qaabka / sida loo isticmaalayo daawada (Dosage and route of administration).
  - d) Taariikhda la soo saaray / la sameeyey (Date of manufacture)
  - e) Taariikhda ay dhacayso / isticmaal beelayso (Expire date).
  - f) Lambarka tira wax soo saareed (Batch number).
  - g) Tilmaanta / caddaynta nidaam dhigaaleed (Indication of storage conditions).
- 4) Haddii ay maqan yihiin macluumaadkaasi kor ku taxan (oo xaaahi astaameedka ku dul qoran) waa in la keenaa / helaa xaashi kale oo tifaftiraysa warbaahintaasi / macluumaadkaasi kor ku qoran (In the absence of above information of the label a leaflet detailing the above information must be provided)
- 5) Si loo hubiyo in xaashiyahaasi daawo xoolaadda la socdaa ay sax yihiin, daawo iibiyihu waa inuu haystaa buugga ay ku qoran yihiin liiska daawooyinka (Reference book) ee laga baaro / fiiriyo macluumaadka daawooyinka ku saabsan, oo aan lagu qaldamin keenidda daawo aan ahayn tii loo baahnaa. (So as to avoid the importation of unsuitable drugs).

**QAYBTA 9-AAD**  
(SECTION 9)

**FARIIMA MAALIYADEED, CIQAABEED IY QAAR-KA**  
(FINANCIAL, PENAL AND OTHER VISIONS)

**CUTUBKA 9.1**  
(CHAPTER 9.1)

**FARIIMAHA MAALIYADEED**  
(FINANCIAL PROVISIONS)

**QODOBKA 9.1.1**  
(ARTICLE 9.1.1)

- 1) Maamulka D.Caafimaadka Xoolahu isaga oo raacaya tilmaamaha ku qeexan Qaanuunkan/Xeerkan, waa inuu go'aamiyaa (prescribes) khidmadaha adeegyada (service churches): khidmada ay bixiyaan macaamiishu (users fees) iyo khidmada kale oo la xiriira adeeg kasta oo loo fuliyey sida ku qoran xeerkan/Qaanuunakan, kuwaasi oo ay ka mid noqonayaan
  - a) Baaritaanka (inspection) iyo bixinta shahaadad caafimaad/fayo qabka ee xoolaha iyo badeecooyinka isir-xoolaadka ah oo loogu tala galay quudsiga dadka, ee dalka la dhoofinayo (Exportation) ama la keenayo (Importation).
  - b) Diagnoseska cudurrada, eegid-tijaabadeedka seroloojikaalka iwm (Disease diagnosis, serological tests etc).
  - c) Isticmaalka xeryaha xoolaha lagu sii hayo (Use of holding grounds) saldhid xero takooryada (Quarantine stations), kawanada rasmiga ah (abattairs) iyo adeegyo noocaas ah (similar services).
  - d) Diiwaan gelinta iyo leesiin/shati siinta (Registration and Licensing) Hawl-wadeennada/aqoonyahanada iyo xarumaha (farmashiye-yaashas oo kale) caafimaad xoolaadka (of Vet professionals and veterinary premises)
  - e) Ogollanshaha (Diiwaan gelinta shati/leesiin siin iwm) Keenista (Importation), Qaybinta/ka ganacsiga daawooyin-xoolaadka (Veterinary drugs) iyo qalabka kale ee biyoloojikaalka ah (biological materials) iyo qalabka la xiriira adeegyad baaritaanka iyo ilaalinta/xakameynta (inspection and control services)

**CUTUBKA 9.2.**  
(CHAPTER 9.2)

**HAYNTA, GOWRACAAMA KA-TAKHALUSIDDA/FOGEYNTA XOOLAHA  
JIRAN/BUKA**  
(DETECTION, SLAUGHTER OR DISPOSAL OF SICK ANIMALS)

**QODOBKA 9.2.1**  
(ARTICLE 9.2.1)

**GAAR-U-HAYNTA XOOLAHA BUKA AMA AAN FAYOQBAYN**  
(DETENTION OF SICK OR UNFIT ANIMALS)

- 1) Xafiis dawleedka caafimaadka-xoolaadku (Veterinary Authority) ama Dhakhaatiir-xoolaadka rasmiga waxay awood u leeyihiin diidmada in la dhoofiyo xoolo kasta oo buka (sick animals) ama aan ka bixi-karin shafarka dhoofka, ama aan u qalmin (for export) in la dhoofiyo xaalada jirkooda ku sugan yahay dartood - masuuliyiintaasi waxaa kale oo ay awood u leeyihiin inay xoolahaasi dib ugu celiyaan (to send back) saldhiga xero takoorida (Quarantine station) xerada xoolaha lagu hayo (holding ground)

**QODOBKA 9.2.2**  
(ARTICLE 9.2.2)

**MASUULIYAD-QAADISTA MILKIILAHA XOOLAHA AMA BADEECO  
XOOLAADKA LUMA AMA DHIBI GAARTO INTA BAARITAANKA LAGU HAYO**  
(OWNER'S LIABILITY FOR LOSS ON DAMAGE TO ANIMALS OR ANIMAL PRODUCTS  
UNDER INSPECTION)

- 1) Xoolaha ama badeecada xoolaadka iyaga oo aan habaysnayn (in a raw state) loo dhiibo XDCX (Veterinary Authority) sida dhakhtar xoolaadka baaritaanka (Veterinary Inspector) si uu baaritaan ugu sameyo, wixii ka yimaadana mulkiilaha ayey u taalaa oo sarkaalkaasi looma qabsan karo/uma qoolnaan karo dhimasho ama dhawaac ku yimaada xoolahaasi ama burburid (distruction) khasaaraha ku yimaada badeeco-xoolaadka, lagu reebo marka ay caddaato (proved) feejignaan la'aan (Negligence) iyo musuqmaasuqid hawl-fulineed (Mal-practices) ay sababeen khasaaraha dhacay ama hantida luntay, oo markaasi si sarkaalkaasi wax lala tiigsanayaa nidaamyada ku qeexan qaanuunkan.

**QODOBKA 9.2.3**  
(ARTICLE 9.2.3)

**GORACA XOOLAHA JIRAN**  
(SLAUGHTER OF SICK ANIMALS)

- 1) Maamuulka DCX ama XDCX awooddaas lihi waxa ay ku dhaqaaqi kartaa in la goraca neef kasta oo aafaysan ama la tuhmayo inuu aafaysan yahay ama siyaabo kale uu Infekshanku u gaaray ama cudur la iska wargeliyo (Notifiable disease) ee ku sifaysan nidaamyada qaanuunkan (specified in the regulations of this code).

**QODOBKA 9.2.4**  
(ARTICLE 9.2.4)

**KA TAKHALUSIDDA / FOGAYNTA RAQDA XOOLAHA LA GAWRACAY**  
(DISPOSAL OF CARCASSES OF SLAUGHTERED ANIMALS)

- 1) XDCX (Sida Sarkaal baaritaanka) wuxuu joojin karaa/xayiri karaa oo amar ku bixin karaa in laga takhaluso / la fogeeyo ama la baabi'yo (Destruction) raqda neef la gawracay ama qayb ka mid ah raqda (part of carcasses) iyada oo lagu dhaqmayo hab raacyada ku qeexan qaanuunakan.

**CUTUBKA 9.3**  
(CHAPTER 9.3)

**XEERKA U GAARKAAH EYDA**  
(SPECIAL PROVISION FOR DOGS)

**QODOBKA 9.3.1.**  
(ARTICLE 9.3.1)

**DIIWAAN-GALINTA IYO LEESAN BIXINTA**  
(REGISTRATION AND LICENSING)

- 1) Dadka eeyada leh ee ku sugan maamul-maxalli ah (local administration) waa inay iska diiwaan geliyaan dowladda hoose ee aaggaasi, waana inay yeeshaan leesiin sannad walba laga cusboonaysiiyo dowladda hoose (ka dib marka ay la yimaadaan xaashida talaalka ee jirta/shaqeysa uuna soo saaray XDCX ama dhakhtar-xoolad diiwaan-gashan.

**QODOBKA 9.3.2**  
(ARTICLE 9.3.2)

**EDEG-TAKOORIDDA IYO LAYNTA EYADA RAABIYADA (XABADDA) QABA**  
**AMA LAGU TUHUN-SAN YAHAY INAY QABAAN**  
(ISOLATION AND DESTRUCTION OF DOGS INFECTED OR SUSPECTED OF BEING INFECTED WITH RABIES)

- 1) Qof allaale oo iska leh ama haysta ey buka (cudurkaasi qaba) ama lagu tuhunsanyahay waa inuu wargeliyaa oo la socodsiiyaa dhakhtar xoolaadka ugu dhow isaguna isla-markiiba waa inuu ogaysiiyaa XDCX ee ugu dhow
- 2) XDCX (The vet Authority) waa inay nafta ka qaadaan eygaa (shall destroy), ama meshii ay ka jiraan tashiilaad/adeegyo (facilities) waa in aygaasi si dhab ah looga edeg-takoora xoolaha iyo dadkaba.

**QODOBKA 9.3.3**  
(ARTICLE 9.3.3)

- 1) XDCX (The Veterinary Authority) isagu oo la kaashanaya maamulka dowladda hoose (local administration) wuxuu amar ku bixinayaa in la laayo (destruction) dhammaan eyada baadida ah/cidina aany gacanta ku hayn ee loo arko inay xad-dhaaf yihiin (Considered to be in excess). Arrintani ma khusayso oo qodobkan lagu dabihiyo (does not apply) eyada diiwan-gashan ama leesan (License) u haysta qaabka ku jidaysan qaanuunakan ama xeer nidaamyadiisa.

**QODOBKA 9.4**  
(CHAPTER 9.4)

**QABASHADA / GACAN KU DHIGIDA XOOLAHA IYO BADEECOYINKA  
XOOLAADKA**  
(SEIZURE OF ANIMALS AND ANIMAL PRODUCTS)

**QODOBKA 9.4.1**  
(ARTICLE 9.4.1)

**SOO QABASHADA NEEFKA**  
(ANIMAL SEIZURE)

- 1) XDCX (Veterinary Authority) ama dhakhtar-xoolaad diiwaan gashan (a registred veterinary surgeon) ee gudanaya xil-waajibaad ku qoran qaanuunakan (on duty under this case) wuxuu qaban karaa idan maxkamadeed la'aan (without court warrant) neef/xoola kasta ama badeeca-xoolaad kasta oo ay jirto sabab uu ku aamino in arrin lug ku leh xoolahaasi/badeecooyinkaasi gaf/meel ka dhac lagu sameeyey nidaamyada qaannunakan (an offense under this code has been committed). Xoolaha iyo badeecooyin-xoolaadka noocaa waxaa ay ka kooban yihiin:
  - a) Xoolo ama badeecad xoolaad ujeedo gaar ah loo keenay (import for a specific purpose) dalka, laakin aanay wehelin xaashida faya-qab caafimaad ee laga rabay/munaasib ah (Without an appropriate health certificate).
  - b) Xoolo si sharci darro ah (unlawfully) u soo galay xeryaha xoolaha lagu hayo oo guud ahaan ama gaar ahaan loo xajissay/xirmeeyey (into reserved public or private holding areas).
- 2) Dhammaan xoolaha ama badeecooyinka sida khaaska ku tilmaaman qodobka kore ee 9.4.1 waxa lagu xerayn karaa/wareejin karaa (may be removed) xera - xoolaad qaab xabsiyeed ah (pound/enclosure) ama xarun (establishment) uu go'aamiyey XDCX (Veterinary Authority) ama si ku meel gaar ah uu u xulay (temporarily selected) Dhakhtar-xoolaadka hawshasi xil ku leh (by veterinary on duty) oo halkaas loogu hayo amarka XDCX ku shaqo-lehi (detained to the order of the competent veterinary authority)
- 3) Mar Walba ee xoolo ama badeecad xoolaad qaabka qodobkani tilmaamay loola wareego/loona qabto/xereeyo. Dhakhtar-xoolaadka hawshaasi ku xil-leh fulinteeda (veterinary on duty) waa in uu degdeg warbixin u tabiyaa XDCX (report to the veterinary authority)



**QODOBKA 9.4.2**  
(ARTICLE 9.4.2)

**LA WAREEGIDDA XOOLAHA AMA BADEECOYIN XOOLAADKA**  
(FORFEITURE OF ANIMALS OR ANIMAL PRODUCTS)

- 1) Maamulka DCXhu (the Veterinary Administration) waxaa uu amar ku bixin karaa isaga oo raacaya nidaamyada qaanuunkani jideeyey; bixinta (payment) lacag ugu muuqday mid macquul ah ee lagu daboolo (to cover) kharashka galay ee la xiriira hawlaha lagu qabtay xoolaha/badeeco muddadii la hayey sida ku qeexan qodobka 9.4.1 haddii aan lacagtaasi lagu bixin wakhti macquul ah gudihuisa sida la go'aamiyey (as prescribed) xoolaha iyo badeecada wa lala wareegayaa/waa lahaansha wareegayaaa (the animal and animal products shall be forfeited).
- 2) Neef kasta, xoolaha ama badeecooyin xoolaadka lo qabtay lana xereeyey sida ku qeexan qodobka 9.4.1, laakiin cida la maleenaayo gefkaas/falkaasi lagu xadgudbay/lagu tuntay qaanuunkan inay gasayh/sameysay iyo hantiilahaba aan la garanayn ama la helikarin xoolahaasi ama badeecad xoolaadkaasi waa lala wareegayaa.

**QODOBKA 9.4.3**  
(ARTICLE 9.4.3)

**SIDA LAGA YEELAAYO XOOLAHA LALA WAREEGAY**  
(DISPOSAL OF FORFEITED ANIMALS)

- 1) Xoolaha ama badeeco xoolaadka lala wareegay (forfeity) sida qanuukan ku qeexan waa in la gowracaa/qalaa (shall be slaughtered) la iibshaa (sold) ama haddii kale loola dhaqmaa (otherwise dealt with) sida uu go'aamiyo maamulka DCX (Vet. Admin) isaga oo ku dhaqmayaa nidaamyada ku qeexan qaanuunakan.
- 2) Mar haddii xoolaha ama dhaqdooda ama badeeca-xoolaadka lala wareegay (forfeited) amar lagu bixiyo in la iibsho (to be sold) Lacagta ka soo baxda/laga helo beecaasi/iibkaasi (sale) waxaa loo maareenayaa (shall be managed) si la mid ah khidmadda la xiriirta adeegyada loo fuliyo sida ku jideesan qaanuunakan, kuna qeexan qodobka 9.4.2

**CUTUBKA 9.5**  
(CHAPTER 9.5)

**MAG-DHAW-BIXINTA**  
(INDEMNITY OF PAYMENT OF COMPENSATION)

**QODOBKA 9.5.1**  
(ARTICLE 9.5.1)

- 1) XDCX (Veterinary Authority) ama maamulka D.C.X (Veterinary Administration) wax tallaabo ah (ganaax, ciqaab, canaan iwm) ka qaadi maayaan dhaktarka-xoolaadka diiwaan-gashan ee shaqada fulinteeda u xilsaaran wixii ka yimaada shaqo kasta oo uu u fuliyey si lilaahi/daacad iyo niyadsami ah, waafaqsanna qaanuunakan ee la xiriirta Diagnosis, ilalin (control)

ka-hortagga (prevention) ama daaweynta ciidduradda la-is-ogeysiyo (or treatment of notifiable diseases. Wax magdhow ah (no compensation) ah qofna laga siinmaayo arrin ka dhalatay shaqo loo fuliyey sida ku qeexan qaanunakan in maamulka DCX aanu si kale amar ku bixin.

**CUTUBKA 9.6**  
(Chapter 9.6)

**NIDAAMYO CIQAABEED**  
(PENAL PROVISIONS)

- 1) Qof kasta oo jebiya/ku tunta nidaamyada qaanuunakan wuxuu mutaysanayaa/ galabsanayaa (will be liable of):
  - a) Lix bilood oo xarig ah (6 months of imprisonment) ama ganaax dhan 1000 dollar (a fine of 1000\$) ama labada ciqaaboodba hadba sida ay la noqoto maxkamada.
  - b) In lagala wareego/uu lumiyo (forfeiture) daawa-tallaalka (vaccines) daawooyinka (drugs), xoolaha, badeecoyinkooda ama xarunta/daarta ama rugta/meesha falkaasi qaanuun-jabintu ay ka dhacday.
  - c) Tirtiridda diiwaan gelinta, leesan ama ruqsada lagu bixiyey hab raaca u degsan qaanuunakan (issued under this code).
- 2) Ciqaabaadka (sida ganaaxidda, tirtiridda leesanka, iwm) waxaa lagu soo saarayaa habraac waafaqsan nidaamyada qaanuunakan oo ku soo baxaya dekreeto Wasiireed (Ministerial decrees) marka laga reebo fal-dambiyeedyada ku qeexan qaanuunka ciqaabta (penal code)
- 3) In kasta oo ay jiraan nidaamyada ku qoran qodobadda 9.6.1.1 iyo 9.6.1.2, nidaamyada ciqaabeedyada qaanuunanka Janaayga ku qeexan ayaa lala tiigsanayaa ciddii jebisa siba waxyaabaha ay ka mid yihiin: carqaladaynta taakaynta dad xilkiisa gudanaya (obstruction of persons exercising their duties) musuq-maasuq (corruption), ku takrifal awooded (abuse of office) xil-waajib (failure to perform duties), diidmada adeeg sharciyan loogu yeeshay (refusal of service legally due), shaqo u xaadir la'aanta ee xubin aqoonyahannada ka tirsan, (omission to report by a member of the profession), caddeyn been ah (false evidence) ra'yi/argti been ah ee qof khabiiir ah uu bixiyo ama fasiraad ka been sheegid (false opinion of an expert or false interpretation) iyo been abuurid waraaqo iyo ducumentii dawladeed.

## Annex I

**List A and List B Diseases  
(OIE International Animal Health Code)****List A Diseases:**

Foot and mouth disease, Vesicular Stomatitis, Rinderpest, Peste des petits ruminants, Contagious bovine pleuroneumonia, Lumpy skin disease, Rift valley fever, Bluetongue, Sheep pox and goat pox, African horse sickness, Highly pathogenic avian influenza, Newcastle disease.

**List B Diseases within the category of multiple species diseases:**

Anthrax, Aujeszky's disease, Echinococcosis/Hydatidosis, Heartwater, Leptospirosis, Q fever, Rabies, Paratuberculosis, New world screwworm (*Cochliomyia hominivorax*), Old world screwworm (*Chrysomya bezziana*), Trichinellosis.

**List B Diseases within the category of cattle diseases:**

Bovine anaplasmosis, Bovine babesiosis, Bovine brucellosis, Bovine genital campylobacteriosis, Bovine tuberculosis, Bovine cysticercosis, Dermatophilosis, Enzootic bovine leucosis, Haemorrhagic septicemia, Infectious bovine rhinotracheitis/infectious pustular vulvovaginitis, Theileriosis, Trichomonosis, Typanosomosis (tsetse-transmitted), Malignant catarrhal fever, Bovine spongiform encephalopathy.

**List B Diseases within the category of sheep and goat diseases:**

Ovine epididymitis (*Brucella ovis*), Caprine and ovine brucellosis (excluding *B. ovis*), Caprine arthritis/encephalitis, Contagious agalactia, Contagious caprine pleuropneumonia, Enzootic abortion of ewes (*ovine chlamydiae*), ovine pulmonary adenomatosis, Nairobi sheep disease, Salmonellosis (*S. abortusovis*), Scrapie, Maedi-visna.

**List B Diseases within the category of avian diseases:**

Avian infectious bronchitis, Avian infectious laryotracheitis, Avian tuberculosis, Duck virus hepatitis, Duck virus enteritis, Fowl cholera, Fowl pox, Fowl typhoid, Infectious bursal disease (Gumboro disease), Marek's disease, Avian mycoplasmosis, Pullorum disease.

ANNEX II  
ELECTION OF THE CHAIRMAN OF THE VETERINARY BOARD

FORM 2/1  
FIRST SCHEDULE: NOMINATION FORM

***NOMINATION OF CANDIDATE FOR ELECTION FOR APPOINTMENT TO THE CHAIRMAN OF THE VETERINARY BOARD***

**Name and Address of Candidate in full  
(BLOCK LETTERS)**

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

**Name and Address of Proposer in full  
(BLOCK LETTERS)**

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

**I agree to accept nomination.**

**Signature of Candidate** \_\_\_\_\_

**Signature of Proposer** \_\_\_\_\_

**Date** \_\_\_\_\_

FORM 2/2  
SECOND SCHEDULE: VOTING PAPER

Names of Candidates	Insert X in this column against the name of the candidate for whom you wish to vote
1	
2	
3	
4	
5	
6	
7	

ANNEX III  
REGISTRATION AND LICENSING OF VETERINARY PROFESSIONALS

FORM 3/1  
APPLICATION FOR REGISTRATION AS A VETERINARY SURGEON,  
PHARMACIST, OR ANIMAL HEALTH ASSISTANT

The Registrar  
Veterinary Board  
Address: \_\_\_\_\_

I, ..... of  
Here by make application for registration as a Veterinary Surgeon/Pharmacist/Animal Health Assistant\*.

My qualifications are: \_\_\_\_\_

I enclose the following:

- a) Copies of certificates/diplomas/testimonials
- b) An affidavit as required by the Veterinary Board
- c) Letters from two referees

Date. ....  
Signature .....

*\*Delete as appropriate*

FORM 3/2  
CERTIFICATE OF REGISTRATION

Registration Number ...

Dr/Mr/Ms ..... is hereby  
registered as a Veterinary Surgeon/Pharmacist/Animal Health Assistant\* under the Na-  
tional Veterinary Code of  
.....

Given at Garowe this ..... day of .....20...

**Fee: US\$ 10**

.....  
Registrar, National Veterinary Board

*\* Delete as appropriate*

**FORM 3/3**  
**LICENSE TO PRACTICE AS A VETERINARY SURGEON**

Dr..... is hereby licensed to practice as a veterinary surgeon in accordance with the provisions under this Code on private veterinary services.

This license is subject to the conditions set out below.

Given at Garowe this..... Day of..... 20.....

**Fee: USS 50**

.....  
Registrar, National Veterinary Board

ANNEX IV  
REGISTRATION OF PREMISES

FORM 4/1  
APPLICATION FOR REGISTRATION OF PREMISES

The Registrar  
Veterinary Board  
Address:

I/We ..... wishing to carry on business of wholesale/retail dealer in veterinary drugs do hereby apply for registration of premises situated at ..... in the town of .....

The business will be under the control of ..... a registered pharmacist/veterinarian\* in accordance with provisions made under this Code.

**Fee: US\$ 50**

Date: .....

.....  
Signature of Applicant(s)

*\* Delete where appropriate*

FORM 4/2  
REGISTRATION OF PREMISES

Premises No. .... Situated at ..... in the town of .....

..... is hereby registered in accordance with the provisions made under this Code to carry on business of wholesale/retail drug sale under the control/supervision of ..... a registered pharmacist/veterinarian\*.

Date: .....

.....  
Registrar, National Veterinary Board  
Address of Board

*\* Delete where appropriate*



ANNEX V  
REGISTRATION AND LICENSING OF DRUG IMPORTATION AND  
DISTRIBUTION

Form 5/1  
APPLICATION FOR REGISTRATION OF WHOLESALE/RETAIL  
VETERINARY DRUG DEALER'S LICENSE

The Registrar  
Veterinary Board  
Address: .....

I/We ..... of ..... wishing to carry on  
a business as a wholesale/retail dealer in veterinary drugs at ..... in the town  
of ..... hereby apply for the issue/renewal of a wholesale/  
retail dealer's license.

The registered pharmacist or veterinarian in control of the business is  
.....  
resident in .....

Date .....

.....  
Signature of Applicant(s)

FORM 5/2  
WHOLESALE/RETAIL DRUG DEALER'S REGISTRATION

Messrs ..... of ..... carrying on a  
business at ..... are hereby registered to sell veterinary drugs  
by way of wholesale/retail dealing.

The registered pharmacist or veterinarian in control of the business is  
.....

Date .....

.....  
Registrar, National Veterinary Board

**FORM 5/3**  
**WHOLESALE/RETAIL DRUG DEALER'S LICENSE**

Messrs ..... of ..... carrying on  
a business at ..... are hereby authorized to sell veterinary drugs by  
way of wholesale/retail dealing.

Date .....

.....  
Local Government Officer

Note: This license expires on ..... Day of ....., 20 .....